

**GOLAHA NAAFOOYINKA KOBACEED EE OHIO (OHIO  
DEVELOPMENTAL DISABILITIES COUNCIL (ODDC))**

**QORSHAHA GOBOLKA EE SHANTA SANO  
2022 – 2026**

**ee  
NAAFOOYINKA KOBOCEED**

**Sharraxaadda Mashruuca**

*Si Kumeel Gaar ah Waxaa u Oggolaaday Golaha 12.04.2020*

**Macluumaadka Kabka**

"Macluumaadkan Kabka ah" waa qaybta akhristaha loogu talagalay ee Qorshaha Gobolka ee Shanta Sano 2022-2026. Waxa ku qoran wuxuu la mid yahay waxa aanu u diri doono Maamulka Naafooyinka Koboceed isagoo ah qaabkii loo baahnaa ee elektarooniga ah. Dokumentigan dhexdiisa waxaa sidoo kale mashruuc walba ku jira, qayb la dhaho Gundhigga, Asbaabta iyo Baaxadda Mashruuca. Si aad u codsato koobi dokumentiga EDS ah, ama liiska shurakada iska kaashanaya mashruucda, fadlan la xiriir Golaha 614-466-5205 ama 1-800-766-7426.

Dib loo eegay 11.23.2020 gld

## Shaxda Tasmada

MASHAARIICDA GUDIGA SARE .....	4
Xirfad Dhisid, U-Doodis, iyo Isbaddal Nidaamyada ah oo ay Sameeyaan	
Shaqaalaha Goluhu. ....	5
Isbaddalada Nidaamyada iyo U-Doodista oo ay Sameeyaan	
Xubnaha/Socdaalka Golaha .....	11
Xog-ururinta Qancidda Macmiilka .....	16
Qiimaynta Dibadda ee Mashaariicda & Nidaamyada Golaha .....	19
Maalgalinta Istikhyaariga ah ee Gudiga Fulinta .....	22
Wacyigalinta Dadwaynaha Iyadoo la Adeegsanayo Warbaahinta Dhijitaalka oo Loogu	
Talagalay Dadka leh Nafooyinka Koboceed.....	25
MASHAARIICDA CARRUURTA & CAAFIMAADKA.....	30
Isku Imaansho .....	31
Quwaynta Qoysaska .....	34
Madadaalada Aan Cidna laga Tagin .....	37
MASHAARIICDA AASAASIGA AH EE BULSHADA .....	40
Warbixinta DSP oo La Fulinayo .....	41
Koobi Garaynta iyo Ballaarinta Mashruuca Gaadiidka .....	46
Mashruucda Ohio ee SOAR & Golaha Nolasha Madaxabannaan ee Gobolka Ohio oo Dhan.....	51
MASHAARIICDA SHAQAALAYNTA .....	55
U Kharash Garaynta Lacagta si Macquul ah .....	56
Kaqaybgalka Loo-shaqeeyaha .....	60
Macluumaadka Shaqaalaynta .....	64
Fiidyowyada Ohio DB 101 .....	68
MASHAARIICDA KOBCINTA HOGGAAMINTA .....	71
U-Doodayaasha Soo Baxaya .....	72
Quwaynta Dadka Naafada ah .....	76

ODDC iyo U-Doodista .....	79
MASHAARIICDA FIDINTA .....	82
Mashruuca Dareemidda Cilladaha Gaarka ah ee Bulshada Amish-ka ah iyo Ta Aan Amish-ka Ahayn .....	83
Quwaynta Wargayska Caawinta E-Diversity .....	87
Ka Ganacsiga Dadka iyo Bulshooyinka Nugul .....	93
Bulshada LGBTQ iyo Dadka Naafada Ah ee Ohio .....	100
MASHAARIICDA SIYAASADDA DADWAYNAHA.....	105
Maalinta Deeqda Wacyigalinta iyo U-Doodista ee DD .....	106
Iskaashiga U-doodista Sharciga Federaalka (Federal Legislative Advocacy Partnership (FLAP)) .....	110
Kalfadhiyada Kookooban ee Kulanka Guud .....	113
Deeqaha Cilmibaarista Siyaasadda Dadwaynaha .....	117
Qiimaha PWD ( <u>B</u> arashada <u>X</u> irfadaha/ <u>S</u> harci-dejinta <u>I</u> yadoo <u>L</u> aShaqaalaynayo Dadka Leh Naafooyinka) .....	120

**GOLAHA NAAFOOYINKA KOBACEED EE OHIO (OHIO  
DEVELOPMENTAL DISABILITIES COUNCIL (ODDC))**

Sharraxaadda Mashruuca

2022 – 2026

**Marka la eego  
Dhanka  
Mashaariicda Guddida Fulinta**

**Cidda Lala Xiriiirayo: Carla Cox  
(614) 644-5538  
[Carla.Cox@dodd.ohio.gov](mailto:Carla.Cox@dodd.ohio.gov)**

## **AWOOD DHISIDDA, U-DOODISTA, IYO ISBADDALKA NIDAAMYADA OO AY SAMAYNAYEEN SHAQAALAH GOLUHU**

SHARCIGA DADWEYNAHA 106-402-OCT. 30, 2000 – 114 STAT. 1704  
(E) TAAGEERIDDA IYO WAXBARIDDA BULSHOYINKA - Goluhu wuxuu taageeri karaa oo uu hirgalin karaa hawlo si uu u kaalmeeyo xaafadaha iyo bulshooyinka si uu si wanaagsan ugu gargaaro shakhsiyaadka naafada koboceed leh iyo qoysaskooda;  
(i) Isagoo dhiirigalinaya ururada deegaanka si ay u bixiyaan taageerooyin toos ah iyo qaar dadbanba;  
(ii) Isagoo Adeegsanaya Waxbarasho.

### **Yoolka (hadafka):**

Siinta fursado badan oo kobcinta hoggaaminta ah ee dadka naafada koboceed leh, xubnaha qoysaskooda iyo ciddii ay iskaashi leeyihiin. Soo bandhigidda fursado kala duwan oo lagu kobcinayo xirfadaha ay u baahan yihiin si ay u noqdaan hoggaamiyayaal u dhaqdhaqaaqa naafada.

### **Ujeedada iyo saamaynta mashruuca:**

Xubnaha shaqaalaha goluhu waxay si firfircoon ugu lug yeelanayaan u-doodista, xirfad dhisidda iyo isbaddalka nidaamyada iyagoo ka wakiil ah dadka reer Ohio ee leh naafooyinka koboceed iyo qoysaskooda.

### **Gogoldhigga, asbaabta iyo baaxadda mashruuca:**

Shaqaalaha goluhu waxay ka shaqaynayaan hawlaha u-doodista, xirfad dhisidda iyo isbaddalka nidaamka ee Meelaha Fadaraalku Xoogga Saaro ee soo socda:

- Taageerooyinka Tooska ah iyo Kuwa Dadbadan ee Bulshada
- Waxbarashada iyo Caawinta Xilli Hore
- Shaqaalaynta
- Caafimaadka
- Guriyeynta
- Ilaalinta Tayada
- Isku Xirka (kordhinta aqoonta siyaasad-dejiyayaasha, dadwaynaha iyo qaybinta badeecadaha Golaha)
- Madadaalada
- Daryeelka carruurta

## Hawlaha muhiimka ah:

Ee Shaqaalaha Golaha:

- Inay kala shaqeeyaan dadka deeqda helaya fulinta hawlaha mashruuca
- Ka adeegaan golayaasha, guddiyada, iyo shaqaalaha fulinta ee la xiriira (fiiri liiska ku lifaaqan)
- Sameeyaan websayt oo warbaahinta bulshada ku biiraan si ay macluumaadka u gaarsiiyaan dadwaynaha, qoysaska shakhsiyaadka naafooyinka koboceed leh iyo daneeyayaasha
- La socdaan sharcidejinta gobolka iyo fadaraalka
- Lafaguraan shuruucda la dejinayo ee la sugayo
- Soosaaraan Xaqiiqooyin Dhakhso ah iyo agab kale si aqoontoda siyaasad-dejiyayaasha loo kordhiyo.
- Inay u joogteeyaan macluumaad wada-xiriirka ugu dambeeyey, xubnaha Kongareska, Golaha Guud ee Ohio, iyo Golaha Badhasaabka
- Qabiyaan badeecadaha Golaha iyo sidoo kale agabka kale ee meelaha kale ka yimi
- Ka kaalmeeyaan hay'adaha kale horumarinta siyaasadaha, badeecadaha, barnaamijyada, qorshayaasha dalbashada deeqda, iwm.
- Qoraan war saxaafadeed
- Saamayn ku yeeshaan wararka la xiriira hindisayaasha Golaha ee maqaalo cusub
- Ka jawaabaan maqaalada jaraa'idada, wararka telefishanada iyo warbaahinta kale ee arinta ka hadlaysa
- Ku biiraan guddiyada talobixineed ee deeqaha gobolka ee ka socda Xarumaha Adeegyada Medicaid iyo Medicare
- Sare u qaadaan oo kaalmeeyaan kobcinta hoggaamineed ee dadka leh naafooyinka koboceed, waalidiinta iyo xubnaha qoysaska
- Ku sameeyaan cilmibaaris iyo lafagur isbaddalada ku socda qaybta
- Ururiyaan macluumaad kusaabsan baahiyaha iyo doorashooyinka shakhsiyaadka iyo qoysaska
- Ogaadaan oo la wadaagaan macluumaadka hay'adaha iyo barnaamijyada kale
- Kaashadaan barnaamijyada "la-howlgalayaasha" Xeerka Naafooyinka Kobaceed (DD Act "sister")
- Gargaar gaarsiiyaan bulshooyinka kala jaadka ah
- Abuuraan iskaashi dhex mara bulshooyinka kala jaadka ah iyo adeegbixiyayaasha shakhsiyaadka naafooyinka koboceed leh iyo qoysaskooda.
- Inay qoysaska xogta ku siiyaan taleefan, boostada, websayt, warbaahinta bulshada iyo si fool ka fool ah
- Inay shakhsiyaadka naafooyinka koboceed leh xogta ku siiyaan taleefan, boostada, websayt, warbaahinta bulshada iyo si fool ka fool ah
- La shaqeeyaan hay'adaha kale si ay uga bartaan dhaqanada ugu wanaagsan
- Ka noqdaan xubno firfircoon iyo "shaqaale" guddiyada iyo shaqaalaha kale, sida inay noqdaan fududeeye, ajande qore, guddoominta kulannada

- Kala shaqeeyaan dadka deeqda la siinayo qorshaynta iyo hirgalinta shirarka
- Sare u qaadaan naafo-u-doodista gudaha Ohio
- U doodaan go'aanada Golaha
- Inay sare u qaadaan oo ay saamayn ku yeeshaan gaarista iyo kala jaadnimada heer qaran
- Ka qaybqaataan oo gacan ka gaystaan guddiyada NACCD iyo ADD iyo hawlaha
- Kaalmeeyaan fududaynta in lacag loo helo hindisayaasha Golaha
- Dhiirigaliyaan siyaasad-dejiyayaasha dadwaynaha inay soosaaraan go'aanno iyo shuruuc taageeraya arrimaha ay Goluhu soo saarayaan
- In markii muddo la joogaba kala shaqeeyaan la-taliyayaal gaar ah dhanka waafaqsanida dhaqanka si ay u siiyaan kaalmo farsamo xubnaha golaha iyo dadka deeqda helaya
- Kala shaqaynta u-doodayaal isiradoodu kala duwan yihiin arrimaha waafaqsan dhaqanka
- Kala shaqeeyaan hay'adaha iyo ururada gobolka kor u qaadista isticmaalka teknoolojiyadda marka la eego dadka leh naafooyinka koboceed

### **Natijooyinka:**

SC 1: Tirada dadaallada Golaha ee inuu u baddalo qaababka wajahidda ee kala daadsan inay noqdaan nidaam wada socda oo wax ku ool ah oo xaqiijinaya in shakhsiyaadka leh naafooyinka koboceed iyo qoysaskoodu ay kaqaybqaataan nashqadda oo gaaraan adeegyada bulshooyinka ee ay u baahan yihiin, taageerooyinka shakhsiga ah, iyo noocyada kale ee kaalmo ee sare u qaadaya aayo-ka-tashiga, madaxbannaanida, waxsoosaarka, iyo ku dhexjirka iyo ka qaybgalka dhammaan dhinacyada nololaha ee bulshada: 3

### **Natijooyinka muddada dhaw:**

Kororka aqoonta ee waxa Goluhu u doodo isagoo ka wakiil ah dadka leh naafooyinka koboceed iyo qoysaskooda ee Ohio.

### **Natijooyinka muddada fog:**

Dhammaadka sanad xisaabeed kasta, waxa jiri doona ugu yaraan 20 qof oo naafo ah iyo xubno qoysaska ah oo aqoontoodu korodho oo kaqaybgala ku doodista isbaddalka nidaamyada.

Qaybtan Qorshaha Gobolak waxa loogu daraa ujeedooyin ah ka war bixinta Fadaraalka.

**Macluumaadka lagu maalgalinayo:**

Federaalka: \$1,011,000  
Lacagta u Dhiganta: Looma baahna  
Wadarta: \$1,011,000

**Qaabka maalgalinta:**

Gudaha Ururka

**Deeq-helaha:**

Waxba

**Liiska Hay'adaha iyo Guddiyada Kala Duwan**

**National Affiliations (Xulafuoyinka Heer Qaran)**

National Association of Councils on Developmental Disabilities, Board of Directors (Ururka Qaranka ee Golayaasha Naafooyinka Koboceed, Guddiga Maamulka)  
National Organization on Disability (Hay'adda Qaranka ee Naafanimada)  
National Association of Council on Developmental Disabilities on Cultural Diversity (Uruka Qaranka ee Golayaasha Naafooyinka Kobaceed ee Kala Jaadnimada Dhaqanka (NACDD))

**State and Local Boards, Commissions and Committees (Guddiyada iyo Golayaasha Kala Duwan ee Gobolka iyo Deegaanka)**

American Association on Intellectual and Developmental Disabilities (Ururka Amerikaanka ee Naafooyinka Kobaceed ee Garashada),  
Ohio Chapter (Cutubka Ohio)  
Attorney General's Violence and Abuse Task Force (Ciidanka ka Hortagga Gaboodgalka iyo Xadgudubka ee Xeer Ilaaliyaha Guud)  
Center for Workers with Disabilities (Xarunta Shaqaalaha Naafooyinka Leh (CWD))  
Children's Oral Health Action Team (Kooxda Howlgalka Caafimaadka Afka ee Caruurta ((COHAT))  
Columbus Coalition on Family Violence (Xulufada Ohio ee Xadgudubka Qoyska)  
Conveners Positive Culture Group (Kooxda Isu-keenayaasha Dhaqanka Haboon)  
Disability Employment Process Improvement (Horumarinta Nidaamka Shaqaalaynta Naafada)  
Disability Policy Coalition (Xulufada Siyaasadda Naafada)  
Health Policy Institute of Ohio (Mac'hadka Siyaasadda Caafimaadka ee Ohio)  
Housing Policy Panel (Gudiga Siyaasadda Guriyaynta)



Information and Assistance Center for Councils on Developmental Disabilities (Xarunta Macluumaadka iyo Taageerada ee Golayaasha Naafooyinka Koboceed)  
 (ITACC) Self-Advocacy Committee (Gudiga Naafo-u-doodista)  
 Leadership Academy on Cultural Diversity and Cultural Linguistics - Georgetown University (Akadeemiyada Hogaaminta ee Kala Jaadnimada Dhaqanka iyo Luuqadda - Jaamacadda Georgetown)  
 Minority Health Advisory Committee/Office of Minority Health at Columbus (Gudiga Talobixinta Caafimaadka Dadka Tirada Yar/Xaafiiska Caafimaadka Dadka Tirada Yar ee Ohio)  
     Public Health (Caafimaadka Bulshada)  
 Minority Health/Prevention Committee (Gudiga Caafimaadka/Ka-hortagga Dadka Tirada Yar)  
 Multiethnic Advocates on Cultural Competency (U-doodayaasha Isirada Kala Duwan ee U-hogaansamidda Dhaqanka (MACC))  
 Ohio Alliance for Direct Support Professionals & Volunteer Credentialing Advisory Committee (Isbahaysiga Ohio ee Xirfadleyda Taakulaynta Tooska ah & Guddiga Talobixinta Aqoonsiga Tabarucaha)  
 Ohio APSE – The Network on Employment (Shabakadda Shaqaalaynta)  
 Ohio Asset Development Workgroup (Koox-shaqeeka Horumarinta Hantida Ohio)  
 Ohio Disability Program Initiative (Hindisaha Barnaamijka Naafada ee Ohio)  
 Ohio Health Sexual Assault Response Network of Central Ohio (Shabakadda Ohio ee Ka-jawaabidda Caafimaadka Xadgudubka Galmada ee Bartamaha Ohio (SARNCO))  
 Ohio Partners in Justice Team (Iskaashiga Ohio ee Kooxda Cadaaladda)  
 Ohio Olmstead Task Force (Ciidanka Ohio Olmstead)  
 Ohio Rehabilitation Association (Ururka Baxnaaninta ee Ohio)  
 Ohio Self-Determination Association (Ururka Aayo-ka-tashiga ee Ohio)  
 Opportunities for Ohioans with Disabilities (Fursadaha Dadka Reer Ohio ee Naafooyinka Leh)  
 Postsecondary Education and Employment for Youth Advisory Council (Golaha Talobixinta Waxbarashada iyo Shaqaalaynta Dugsiga Sare Kadib ee Dhalinyarada)  
 Professional Association of Retardation of Ohio (Ururka Xirfadlayaasha Dib-udhaca ee Ohio (PAR))  
 Project Search Quarterly Meetings (Kulannada Rubaclaha ah ee Mashruuc Raadinta (statewide))  
 Quarterly Statewide Regional Preparedness Planning Meeting (Kulanka Qorshaynta Gobolka oo Dhan ah ee Diyaargarowga Deegaannada)  
 RAMA Consulting (Talo-siinta RAMA)  
 Statewide Independent Living Council (Golaha Nololsha Madaxabannaan ee Gobolka Ohio oo Dhan)  
 Supreme Court of Ohio – Interpreter Services (Maxkamadda Sare ee Ohio - Adeegyada Tarjumaanada)  
 Transportation Equity Coalition (Isbahaysiga Usinaanta Gaadiidka)  
 Triple Jeopardy Project – Dayton (Mashruuca Ka-eexasho Bulsho oo Dhinacyo Badan - Dayton)

**DD Act “Sister” Programs (Barnaamijyada "La-howlgalayaasha" Xeerka Naafooyinka Koboceed)**

The Nisonger Center Citizens Advisory Committee (Gudiga Talosiinta Muwaadiniinta ee Xarunta Nisonger)

Cincinnati Children’s Hospital Medical Center, Developmental and Behavioral (Xarunta Caafimaadka ee Isbitaalka Caruurta Cincinnati, Kobaca iyo Hab-dhaqanka)

Pediatrics Advisory Committee (Gudiga Talo-bixinta Caafimaadka Caruurta)

Disability Alliance (Isbahaysiga Naafada)

Disability Rights Ohio (Xaquuqda Naafad Ohio)

Nisonger Director Search Committee (Gudiga Raadinta Maamullaha Nisonger)

Nisonger TOPS Advisory Committee (Gudiga Talo-siinta TOPS Nisonger)

Nisonger Disability Health Advisory Committee (Gudiga Talo-xiinta Caafimaadka Naafada Nisonger)

**Ohio Department of Health (Waxda Ohio ee Caafimaadka)**

Bureau of Children with Medical Handicaps/Parent Advisory Council (Golaha Talo-bixinta Xaafiiska Caruurta Leh Naafada/Waalidka)

**Ohio Department of Job and Family Services (Waxda Ohio ee Shaqada iyo Adeegyada Qoyska)**

Medicaid Fee-For-Service Consumer Service Advisory Committee (Gudiga Medicaid ee Talo-bixinta Adeegga Macmiilka Qidmad-kuhel-Adeeg)

Medically Fragile Task Force, Special Needs Subcommittee (Shaqaalaha Caafimaad Ahaan Nugul, Guddi-hoosaadka Baahiyaha Gaarka ah)

**Ohio Department of Development (Waxda Ohio ee Horumarinta)**

Ohio Consolidated Plan Advisory Committee (Gudiga Talo-bixinta Qorshaha La-Mideeyay ee Ohio)

**Ohio Department of Developmental Disabilities (Waxda Naafooyinka Kobaceed ee Ohio)**

Family Advisory Council (Golaha Talo-siinta Qoyska)

Employment First Advisory Committee (Gudiga Talobixinta Employment First)

Employment First Task Force (Howl-fuliyayaasha Employment First)

Family Support Community of Practice (Bulshada Taageerada Qoyska ee Kudhaqanka)

**Ohio Supreme Court (Maxkamadda Sare ee Ohio)**

Subcommittee on Adult Guardianship (Guddi-hoosaadda Qaabilsan Dhowrida Qofweyn)

**Ohio Department of Mental Health (Waxda Ohio ee Caafimaadka Dhimirka)**

Forensic Strategies Workgroup (Koox-shaqeedka Xeeladaha Danbi-baarista)

## **ISBADDALKA NIDAAMYADA IYO U-DOODISTA OO AY SAMAYNAYAAN XUBNAHA/SOCDAALKA GOLAHA**

SHARCIGA DAWLADDA 106-402-Oct. 30, 2000 – 114 STAT. 1703  
HAWLAHA U-DOODISTA, XIRFAD DHISIDDA IYO ISBADDALKA NIDAAMEED -  
Goluhu waa inuu noqdo mid u dooda shakhsiyaadka leh naafooyinka koboceed oo fuliyaan ama taageeraan barnaamijyada, mashaariicda iyo hawlaha loo fulinayo ujeedada cinwaan-hoosaadkan.

### **Yoolka (hadafka):**

Siinta fursado badan oo kobcinta hoggaaminta ah ee dadka naafada koboceed leh, xubnaha qoysaskooda iyo ciddii ay iskaashi leeyihiin. Soo bandhigidda fursado kala duwan oo lagu kobcinayo xirfadaha ay u baahan yihiin si ay u noqdaan hoggaamiyayaal u dhaqdhaqaaqa naafada.

### **Ujeedada iyo saamaynta mashruuca:**

Taageerada la kordhiyey waxa la siin doonaa ugu yaraan 10 xubnaha Golaha ah marka ay xoojiyaan xirfadahooda u-doodista iyo hoggaaminta, oo ay ka shaqeeyaan isbaddalka nidaamka marka la eego arrimaha muhiimka ah ee qaybta Naafooyinka Kobaceed.

### **Gogoldhigga, asbaabta, iyo baaxadda mashruuca:**

Xeerka Naafooyinka Kobaceed (DD Act) wuxuu dhigayaa in boqolkiiba 60 xubnaha Goluhu ay buuxiyaan mid ka mid ah qaybaha soo socda: 1) shakhsiyaadka leh naafooyinka koboceed; 2) waalidiinta ama masuulada carrurta leh naafada koboceed; 3) qaraabada dhaw ama masuulada dadka waawayn ee leh naafooyinka xagga dhimirka kuwaasi oon naftooda u doodi karin; iyo, 4) qaraabada dhaw ama masuulka qofka leh naafo koboceed kaasi oo ku sugnaa ama wali ku sugan xarun loogu adeego.

Shuruudaha xubinimada ee Golaha waxa ka mid ah "dhammaan murashaxiinta xubinimada Golaha Naafooyinka Koboceed waa inay waayoaragnimo u leeyihiin ka tirsanaanta guddiyada ama ururada ka shaqeeya arrimaha dadka leh naafooyinka koboceed." Qayb kamid ah shaqada xubinta Golaha waa in Golaha la keeno macluumaad kusaabsan baahiyaha iyo mashaakillo laga keenay kooxo dibadeed. Tani waxay ka kaalmaynaysaa Golaha aqoonsiga arrimaha iyo walaacyada gobolka oo dhan ka imanaya si uu wax ugaga qabto dadaaladiisa u-doodista iyo isbaddalka nidaamyada.

Qaybtani Qorshaha Gobolka ah waxa loogu daraa ujeedooyin la xariira warbixinta Fadaraalka ee kharashka ka qaybqaadashada xubinta Golaha ee kulamada, shirarka iyo dhacdooyinka la xiriira ee Golaha, oo dhammaan ku jihaysan dhanka u-doodista iyo isbaddalka nidaamyada. Liiska guddiyada kala duwan, golayaasha iyo ururada dibadeed waxuu muujinayaa baaxadda kaqaybgalka xubnaha ee Golaha Naafooyinka Kobaceed ee Ohio ee dadaalada u-doodista iyo isbaddalka nidaamyada ee gobolka oo dhan.

### **Hawlaha muhiimka ah:**

- Ku matalidda Golaha lagu matalayo Guddiyada iyo Golayaasha Kala Duwan
- Kaqaybgalaan shirarka
- Marag-fur ka sameeyaan dhagaysiyada
- Wargalin siyaasad-dejiyayaasha/saameeyaan sharciyada la dajinayo

### **Natijjooyinka:**

IFA 1.1: Tirada dadka leh naafooyinka koboceed ee kaqaybqaatay hawlaha Goluhu taageeray ee loogu talagalay inay kordhiyaan aqoontooda ku aaddan sida looga qaybqaato go'aanada saamaynta ku leh noloshooda, nolosha dadka kale, iyo/ama nidaamyada: 10

IFA 1.2: Tirada xubnaha qoyska ee kaqaybqaatay hawlaha Goluhu taageeray ee loogu talagalay inay kordhiyaan aqoontooda ku aaddan sida looga qaybqaato go'aanada saamaynta ku leh qoyska, nolosha dadka kale, iyo/ama nidaamyada: 10

SC 1: Tirada dadaallada Golaha ee inuu u baddalo qaababka wajahidda ee kala daadsan inay noqdaan nidaam wada socda oo wax ku ool ah oo xaqiijinaya in shakhsiyaadka leh naafooyinka koboceed iyo qoysaskoodu ay kaqaybqaataan nashqadda oo gaaraan adeegyada bulshooyinka ee ay u baahan yahiin, taageerooyinka shakhsiga ah, iyo noocyada kale ee kaalmo ee sare u qaadaya aayo-ka-tashiga, madaxbannaanida, waxsoosaarka, iyo ku dhexjirka iyo ka qaybgalka dhammaan dhinacyada nolosha ee bulshada: 10

### **Natijjooyinka muddada dhaw:**

Kororka aqoonta ee waxa Goluhu u doodo isagoo ka wakiil ah dadka leh naafooyinka koboceed iyo qoysaskooda ee Ohio.

### **Natijoooyinka muddada fog:**

Dhammaadka sanad xisaabeed kasta, waxa jiri doona ugu yaraan 20 qof oo naafo ah iyo xubno qoysaska ah oo aqoontoodu korodho oo kaqaybgala ku doodista isbaddalka nidaamyada.

### **Macluumaadka lagu maalgalinayo:**

Fadaraalka: \$115,000  
Lacagta u Dhiganta: Looma Baahna  
Wadarta: \$115,000

### **Qaabka maalgalinta:**

Kharashka Gudaha Ururka

### **Deeq-helaha:**

Waxba

### **Hay'adaha iyo Guddiyada Kala Duwan Kuwaasi oo Xubnuhu ka Tirsan Yihiin**

American Association on Intellectual and Developmental Disabilities – Paula Rabidoux  
American Speech Language Hearing Association – **Paula Rabidoux**  
Association of University Centers on Disabilities – **Paula Rabidoux**  
Ohio Speech Language Hearing Association – **Paula Rabidoux**  
Ohio State University Advisory Committee on Disability Issues – **Paula Rabidoux**  
Society for Disability Studies – **Paula Rabidoux**  
TASH – **Paula Rabidoux**  
Policy Committee – OPRA – **Joanna Spargo**  
Shared Living Committee – DODD – **Joanna Spargo**  
Quality Outcomes Committee – DODD – **Joanna Spargo**  
Healthy Students, Promising Futures Collaborative – **Mark Smith**  
Ohio School Health Services Association – **Mark Smith**  
National Alliance for Medicaid in Education – **Mark Smith**  
USDOE/USHHS Affinity Group – **Mark Smith**  
Association of University Centers on Disabilities (AUCD) – **Ilka Riddle**  
American Public Health Association (APHA) – **Ilka Riddle**  
American Association on Health and Disability (AAHD) – **Ilka Riddle**  
American Association on Intellectual and Developmental Disabilities (AAIDD) – **Ilka Riddle**  
Nisonger Center Community Advisory Committee – **Ilka Riddle**  
The Future is Now Aging Caregivers Advisory Council, Hamilton County Developmental Disabilities Services – **Ilka Riddle**

The Arc, National Chapter- **Ilka Riddle**  
 Health Care Transition Research Consortium – **Ilka Riddle**  
 Lucas County Board of DD Human Rights Committee – **Karen Kerr**  
 Sunshine Inc. of NWO Foundation Board – **Karen Kerr**  
 Sunshine Inc. of NWO Vocational Services Board – **Karen Kerr**  
 Allen County Special Olympics Advisory Council – **Jill Radler**  
 Toledo-Lucas County Commission on Disabilities – **Rochelle Hall-Rollins**  
 Gudiga Talobixinta ee Future is Now (Advisory Committee for The Future is Now):  
 Support for Aging Caregivers – **Emilia Jackson**  
 Ohio Children and Family First Cabinet Deputies Council – **Emilia Jackson**  
 Ohio Community Recovery Support Planning Council (OCRSPC) – **Emilia Jackson**  
 Ohio Grandparent Kinship Coalition – **Emilia Jackson**  
 APSI Board, Government Affairs Committee – **Michael Denlinger, II**  
 Community Advisory Council (CAC) UCEDD Cincinnati – **Michael Denlinger, II**  
 Housing Policy Panel – **Michael Denlinger, II**  
 The Housing Network of Hamilton County – **Michael Denlinger, II**  
 DODD MUI Committee – **Jean Jakovlic**  
 Autism Power – **Jean Jakovlic**  
 Commission on Accreditation of Rehabilitative Facilities – **Jean Jakovlic**  
 Ohio Partners in Justice – **Vicki Jenkins**  
 Ohio Family Violence Prevention Council – **Vicki Jenkins**  
 Guddi-hoosaadda Qofka Wayn ee Masuulka ee Advisory Committee on Children and Families, Maxkamadda Sare ee Ohio – **Vicki Jenkins**  
 External Review Committee of the Ohio Department of DD – **Vicki Jenkins**  
 Ohio Attorney General’s Commission on Elder Abuse – **Vicki Jenkins**  
 Ohio Department of Jobs and Family Services Adult Protective Services Advisory Committee – **Vicki Jenkins**  
 Ohio Dept. of MH Forensic Conference Planning Committee – **Vicki Jenkins**  
 Ohio Ex-Offender Reentry Coalition – **Vicki Jenkins**  
 Ohio Justice Alliance for Community Corrections – **Vicki Jenkins**  
 Ohio Interagency Council for Youth – **Shannon Komisarek**  
 Ururka Gobolka Ohio oo Dhan: Post-Secondary Advisory Council – **Shannon Komisarek**  
 Ohio Governor’s Interagency Workgroup on Autism – **Bobbi Krabill**  
 Ohio Department of Health Cancer Leadership Team – **Bobbi Krabill**  
 Project Stir – Franklin County, Ohio – **Marcella Straughter**  
 Council of Ohio Leaders (COOL) – **Marcella Straughter**  
 Self-Advocacy Advisory Council for Franklin County Board of Developmental Disabilities – **Marcella Straughter**  
 OSU Disability Expert Panel by OSU Nisonger Center – **Marcella Straughter**  
 UCEDD Community Advisory Committee (CAC) – **Rachel Rice**  
 Warren County Board of DD Human Rights Committee – **Rachel Rice**  
 Highland County Board of DD – **Michael Richards**  
 Ohio Self-Advocacy Task Force – **Michael Richards**  
 Ohio Department Veteran Service Advisory Committee – **Victor Wilson**

Franklin County Hazard Chemical Preparedness Committee –**Victor Wilson**  
New Albany CRAB – **Victor Wilson**  
New Albany Veterans Memorial Committee – **Victor Wilson**  
New Albany Community Events Committee – **Victor Wilson**  
Project Stir – Ottawa County, Ohio – **Brenda Brandon**  
UCCEDD Community Advisory Committee – **Rachel Rice**  
Warren County Board of DD Human Rights Committee – **Rachel Rice**  
Boundless Board – **Marcella Straughter**  
APSI Board, Chair of Development – **Marcella Straughter**  
ISP Work Group- **Marcella Straughter**  
Waiver Committee – OPRA – **Rhonda Rich**  
People First of Ohio – **Michael Richards**

## XOGURURINTA QANACSANIDA MACMIILKA

SHARCIGA DAWLADDA 106-402 - OCT. 30, 2000 - 114 STAT. 1705

Sida uu dhigayo Xeerka Naafooyinka Kobaceed ee 2000. Golayaasha Gobolka waxa looga baahan yahay dhammaadka sanad deeceed kasta inay fiiriyaan yoolalkooda oo "Go'aamiyaan ku qanacsanida macmiilka ee hawlaha Goluhu taageero iyo/ama la fuliyay."

### **Yoolka (hadafka):**

Dadka naafooyinka leh iyo qoysaskoodu waxay sidii hore si ka badan u heli doonaan adeegyada iyo teknoolojiyadda taasi oo sare u qaadaysa hoggaaminta, helitaanka, badbaadada, madaxbannaanida, gaarista, sinnaanta, ku dhexjirka bulsho, caafimaadka, fursadaha shaqo, iyo bulshada.

### **Ujeedada iyo saamaynta mashruuca:**

Sida uu dhigayo Xeerka Naafooyinka Koboaceed ee 2000 (DD Act of 2000), Golayaasha Gobolka waxa looga baahan yahay dhammaadka sanad deeceed kasta inay fiiriyaan yoolalkooda oo "go'aamiyaan ku qanacsanida macmiilka ee hawlaha Goluhu taageero ama fuliyo." (SEC.125(c)(3)(E)).

### **Gogoldhigga, asbaabta, iyo baaxadda mashruuca:**

Xeerka Naafooyinka Kobaceed ee 2000 wuxuu dhigayaa hanaan lagu aqoonsanayo loogana war bixinayo horumarka lagu gaaro hawlaha u-doodista, xirfad dhisidda, iyo isbaddalka nidaameed ee meelaha xoogga la saaray. Si loola socdo sida barnaamijyada Xeerka Naafooyinka Kobaceed ay wax uga qabtaan meelaha xoogga la saarayo, Tilmaamayaasha Horumarka ayaa la isticmaalaa si loo sharraxo loona cabbiro ugu yaraan:

1. Ku qanacsanida shakhsiyaadka qaba naafooyinka koboceed hawlaha u-doodista, xirfad dhisidda, isbaddalka nidaameed ee ay bixiyaan Golayaasha Gobolka, Nidaamyada Dhawrida & U-doodista iyo Xarumaha Jaamacadda ee Sare u Qaadidda Dadka Naafooyinka Koboceed Qaba, iyo

2. Ilaa heerka hawlahani ay ku keenaan horumar awoodda shakhsiyaadka naafooyinka koboceed leh si ay:



- I. u doortaan oo ay u maamulaan adeegyada, taageerooyinka iyo kaalmooyinka noocooda, xoogganidooda, iyo jadwalkooda kuwaasi oo shakhsiyaadku isticmaalaan
- II. inay si buuxda nolosha bulshada uga qaybqaataan iyagoo la nool cidda oo doortaan.
- III. ugu helaan adeegyada, taageerooyinka, iyo kaalmada qaab xaqiijinaya in dadkani ayna la kulmin gaboofal, dayac, uga faa'idaysi jinsi iyo maaliyadeed, ku xadgudub xuquuqda sharciga iyo aadanaha, iyo isticmaalka aan habboonayn ee xajinta iyo go'doominta

Sidoo kale, Golayaasha Gobolka waxa looga baahan yahay dhammaadka sanad deegeed kasta inay fiiriyaan yoolalkooda oo "go'aamiyaan ku qanacsanida macmiilka ee hawlaha Goluhu taageero ama fuliyo." (SEC.125(c)(3)(E). Warbixinaha Golaha waxa waajib ah in lagu daro "macluumaad kusaabsan qanacsanida macmiilka ee hawlaha Goluhu taageero ama fuliyo." (SEC.125(c)(E)(ii)).

#### **Hawlaha muhiimka ah:**

- La shaqaynta shaqaalaha Golaha Naafooyinka Kobaceed ee Ohio (ODDC) si loo go'aamiyo mashaariicda kaqaybqaadan doona Xog-ururinta Qanacsanida Macaamiisha.
- Go'aaminta tallaabooyinka xogta qanacsanida macmiilka looga aruurinayo kaqaybqaatayaasha hawlaha Goluhu taageero ama fuliyo
- In qanacsanida macmiilka lagu heli karo qaabab kala duwan oo badan
- Siinta natiijooyinka ugu dambeeya Golaha dhammaadka sanadka

#### **Natiijooyinka:**

IFA 3.1: Boqolkiiba inta dadka naafooyinka koboceed leh oo ku qanacsan hawsha mashruuca.

IFA 3.2: Boqolkiiba inta xubnaha qoyska ku qanacsan hawsha mashruuca.

#### **Natiijooyinka muddada dhaw:**

Qaabka xog-ururinta qanacsanida macmiilka ee shaqsigaa ayaa go'aaminaysa qanacsanida ka imanaysa qofka naafada koboceed leh, xubin qoyska ah, iyo dadka kale ee tooska ugu lugta leh hawlaha Golaha.

**Natiijooyinka muddada fog:**

Siinta golaha macluumaad macne leh

Qancinta Xafiiska Maamulka & Shuruudaha Xeerka Waxqabadka Miisaaniyadda iyo Natiijooyinka (Office of Management & Budget Performance and Results Act requirements)

Siinta macluumaad qorshaynta isbaddalka nidaamyada

Diiwaangalinta wax-ku-oolnimada golaha

**Macluumaadka lagu maalgalinayo:**

*Fadaraalka:	\$5,000.00
Lacagta u Dhiganta:	<u>\$1,666.67</u>
Wadarta:	\$6,666.67

\*Sii wadista maalgalintu waxay ku xiran tahay inay si guul leh ku dhammaadeen hawlaha sanadkii hore iyo helitaanka lacagaha.

**Qaabka maalgalinta:**

Heshiiska Adeegga Shakhsiyeed

**Deeq-helaha:**

Xarunta Nisonger ama Xarun kale oo Center of Excellence

## QIIMAYNTA DIBADDA EE MASHAARIICDA & NIDAAMYADA GOLAHA

SHARCIGA DADWEYNAHA 106-402-OCT. 30, 2000 – 114 STAT. 1680

Mid kasta oo ka mid ah deeqda, oo sharraxaysa -

(i) Yoolalka lagu gaaraayo deeqda, taasi oo, laga bilaabo sanad xisaabaadka 2012, ay tahay inay waafaqsanaato tilmaamayaasha horumarka khuseeya ee lagu sharraxay qaybta 104(a)(3);

(ii) Xeeladaha la isticmaalayo si loo gaaro yool kasta; iyo

(iii) Qaabka la isticmaalayo si loo go'aamiyo haddii yool kasta la gaaray.

### **Yoolka (hadafka):**

Dadka naafooyinka leh iyo qoysaskoodu waxay sidii hore si ka badan u heli doonaan adeegyada iyo teknoolojiyadda taasi oo sare u qaadaysa hoggaaminta, helitaanka, badbaadada, madaxbannaanida, gaarista, sinnaanta, ku dhexjirka bulsho, caafimaadka, fursadaha shaqo, iyo bulshada.

### **Ujeedada iyo saamaynta mashruuca:**

Xubnaha Golaha, shaqaalaha iyo dadka caadiga ah waxay helitaan fiican u yeelan doonaan natiijooyinka qiimaynta ee ugu yaraan 3 mashruuc Gole oo la doortay taasi oo keenaysa in hawlaha goluhu maalgaliyo ay yeeshaan saamayn sidii hore ka wayn.

### **Gogoldhigga, asbaabta, iyo baaxadda mashruuca:**

Ka qayb ahaan hannaanka qorshaynta ee horumarinta Golaha Naafooyinka Koboceed ee Ohio (ODDC), Qorshaha Gobolka 2022-2026, ODDC waxay u isticmaali mooddo macquul ah aalad ay ugu abuurto qaabdhismeed nuxureed mashaariicda la soo jeediyey kaasi oo faahfaahinaya xiriirada ka dhexeeya qaybaha barnaamijka. Qaababka macquulka ah waxay soo koobi doonaan xiriirka macquulka ah ee u dhexeeya baahiyaha kuwaasi oo ah diirad-saarka ODDC, yoolasha iyo ujeedooyinka ODDC, dadka loo danleeyahay, aragtida ama khayraadka ODDC, hawlaha/nidaamyada/natiijooyinka la soo jeediyey ee ku jihaysan baahiyaha/dadwaynaha loo danleeyahay, natiijooyinka la filayo ee muddada dhaw iyo muddada fog ee ODDC ay qorshaysay inay gaarto, iyo qorshaha qiimaynta ee cabbiridda ilaa xadka nidaamyada la soo jeediyey iyo natiijooyinku ay suurtoogaleen lana gaaray.

Maamulka Naafooyinka Koboceed wuxuu u sheegay dhammaan Golayaasha inay soosaaraan oo hirgaliyaan hannaan lagu fiirinayo horumarka laga sameeyey gaarista yoolasha Qorshaha Gobolka kuwaasi oo la soosaaray muddada hannaanka qorshaynta ODDC. Golayaasha waxa lagu boorinayaa inay samaystaan hababka iyo cabbiraadahooda u gaarka ah si ay u go'aamiyaan horumarka. Hannaanka Qiimaynta

Dibaddu (External Evaluation) wuxuu noqon doonaa ikhtiyaar uu Goluhu heli doono si uu u fiiriyo horumarka mashaariicda ODDC ay maalgaliso.

Goluhu wuxuu ka hirgalin doonaa hannaanka Qiimaynta Dibadda mashaariicda ah kuwa la isku khilaafsan yahay, magaca dheer ama hal-abuurka leh. Waxa lagu hirgalin doona codsi ka yimaada shaqaalaha, xubnaha Golaha ama dadka caadiga ah.

Marka lagu qiimaynayo mashruuca hannaanka Qiimaynta Dibadda, diiradda waxa la saari doonaa wakhtiga Qorshaha Gobolka ee 5 sano ee taagan, maya sanadadii hore. Sanadadii hore waxay mareen Qiimaynta Hannaanka Tartanka iyo Sii Wadista Deeqda (Competitive Process and Continuation Grant Reviews) sidaas darteed ma khuseeyaan.

#### **Hawlaha muhiimka ah:**

- Ilaa xadka yoolasha (hadafyada) la gaaray
- Xeeladaha gacanta ka gaystay gaarista yoolasha
- Arrimaha ku lammaansanaa gaarista yoolka/yoolasha
- Sharraxidda qaabka la marayo, kaasi oo noqon kara mid tireed ama qiimeed (qualitative or quantitative), kaasi oo loo isticmaali doono go'aaminta haddii baahiyaha la ogaaday lagana xaajooday la daboolayo iyo haddii natiijooyinka Golaha la gaarayo.
- Qeexista habraacyada Goluhu isticmaalay si uu ula socdo horumarka gaarista yoolashiisa kahor Qiimaynta Dibadda
- Ka xaajoodka hawlaha Golaha kuwaasi oo cabbiri doona ama haddii kale wax ka qaban doona wax-ku-oolnimada Golaha

#### **Natiijooyinka:**

**SC 1.3.4:** tirada dhaqanada ugu wanaagsan ee lagu taageero hawlaha Golaha: 3

**Natiijooyinka muddada dhaw:**

Golaha waxa uu sheegi doonaa in ikhtiyaarka Hannaanka Qiimaynta Dibadda loo isticmaali karo wixii mashruuc noqda mid la isku khilaafsan yahay, magac dheer, halabuur leh ama sabab kale oo kasta oo Golaha ama shaqaaluhu u arko inay daruuri tahay.

**Natiijooyinka muddada fog:**

Marka la gaaro Diisambar 2026, haddii Goluhu doorto inuu isticmaalo Hannaanka Qiimaynta Dibadda, Goluhu iyo dadka caadiga ah waxay macluumaad sidii hore ka badan ka heli doonaan natiijooyin qiiimaynta ee mashaariicda Golaha ee la doortay si loo go'aamiyo dhaqanada ugu wanaagsan.

Hawlaha ODDC maalgaliso waxay yeelan doonaan saamayn wayn iyadoo ay ugu wacan tahay hannaanka Qiimaynta Dibaddu.

**Khayraadka lagu maalgalinayo:**

*Fadaraalka:	\$20,000.00
Lacagta u Dhiganta:	<u>\$6,666.66</u>
Wadarta:	\$26,666.00

\*Sii socoshada maalgalintu waxay ku xirnaan helitaanka lacagta.

**Qaabka maalgalinta:**

Qandaraas

**Deeq-helaha:**

Waa la go'aaminayaa

## MAALGALINTA ISTIKHYAARIGA AH EE GUDIGA FULINTA

SHARCIGA DAWLADDA 106-402 - OCT. 30, 2000 - 114 STAT. 1704

(E) TAAGEERIDDA IYO WAXBARIDDA BULSHOYINKA - Goluhu wuxuu taageeri karaa oo uu hirgalin karaa hawlo si uu u kaalmeeyo xaafadaha iyo bulshooyinka si uu si wanaagsan ugu gargaaro shakhsiyaadka naafada koboceed leh iyo qoysaskooda -  
(i) Isagoo dhiirigalinaya ururada deegaanka si ay u bixiyaan taageerooyin toos ah iyo qaar dadbanba;  
(ii) Isagoo adeegsanaya waxbarasho.

### **Yoolka (hadafka):**

Siinta fursado badan oo kobcinta hoggaaminta ah ee dadka naafada koboceed leh, xubnaha qoysaskooda iyo ciddii ay iskaashi leeyihiin. Soo bandhigidda fursado kala duwan oo lagu kobcinayo xirfadaha ay u baahan yihiin si ay u noqdaan hoggaamiyayaal u dhaqdhaqaaqa naafada.

### **Ujeedada iyo saamaynta mashruuca:**

Kordhinta dadaalada wacyigalinta dadwaynaha, u-doodista iyo isbaddalka nidaamyada iyadoo loo marayo siinta maalgalin ugu yaraan 10 deeqood oo yaryar sanadkii.

### **Gogoldhigga, asbaabta, iyo baaxadda mashruuca:**

Goluhu wuxuu doonayaa inuu taageero hindisayaasha halka mar ah, ee aan haddii kale loogu darin qorshayaasha gobolka qaab dedejin, iyadoo aysan muhim noqon in la sugo kulanka dambe iyo gorgortanka Golaha oo dhan. Tan waxa lagu gaari karaa kafaale-qaadidda/ka wada-shaqaynta dhacdooyin/shirar kala duwan marka ay la xiriiraan arrimo muhiim u ah fagaaraha naafooyinka koboceed.

Goluhu wuxuu adeegsan doonaa xeelado xiriirka bulsheed ah si uu u xaqiijiyo in macluumaadka cusub ee muhiimka ah ay si dhib yar oo wakhtigii loo baahnaa ay u heli karaan bulshada naafooyinka koboceed.

Kharashaadku waa inay sii kordhiyaan go'aanada Golaha iyo dadaaladiisa uu ugu jiro taageeridda dadka leh naafooyinka koboceed iyo qoysaskooda si ay u noqdaan qaar si buuxda ugu dhex jira bulshooyinkooda, inuu wax badan ka ogaado naafooyinka kala duwan iyo qaababka ugu dambeeyey ee loo taageero qof nafo noocan ah qaba, iyo inuu xoojiyo wacyigalinta dadka ee ku aaddan arrimaha naafada iyo doorka Golaha ee sare u qaadista isbaddalka nidaamyada.

**Hawlaha muhiimka ah:**

- Sharrixidda sida dadka la hagraday si gaar ah loo gaari lahaa, kooxaha la bartilmaameedsan doono iyo xeeladaha la adeegsan doono.
- Bixinta qoraal miisaaniyadda ah oo faahfaahsan, oo lifaaq ahaan ah, kaasi oo faahfaahinaya sida lacagaha fadaraalka loo isticmaali doono iyo lacagaha u dhigma ee la bixinayo codsi kasta oo deeqaha yar ah.

**Natijooyinka:**

SC I.5.1: Tirada hawlaha isbaddalka nidaamyada ee Goluhu taageeray iyadoo hay'adana si firfircoon ugu lug lahaayeen: 10

**Natijooyinka muddada dhaw:**

Kororka aqoonta ee waxa Goluhu u doodo isagoo ka wakiil ah dadka leh naafooyinka koboceed iyo qoysaskooda ee Ohio.

**Natijooyinka muddada fog:**

Warbixinaha ugu dambeeya ayaa la dhammaystiri doonaa si loo soo bandhigo horumarka iyo/ama horumar la'aanta wacyigalinta dadwaynaha, u-doodista iyo/ama isbaddalka nidaamyada.

**Macluumaadka lagu maalgalinayo:**

*Fadaraalka:	\$60,000
Lacagta u Dhiganta:	<u>\$20,000</u>
Wadarta:	\$80,000

\*Sii socoshada maalgalintu waxay ku xirnaan helitaanka lacagta.

**Qaabka maalgalinta:**

Aan tartan lahayn

**Deeq-helaha:**

Waa la go'aaminayaa



## **WACYIGALINTA DADWAYNAHA IYADOO LA ADEEGSANAYO WARBAAHINTA DHIJITAALKA EE DADKA LEH NAAFOOYINKA KOBOCEED**

Sharciga Dawladda 106-402-OCT. 30, 2000 – 114 STAT. 1704

E) TAAGEERIDDA IYO WAXBARIDDA BULSHOOYINKA - Goluhu wuxuu taageeri karaa oo uu hirgalin karaa hawlo si uu u kaalmeeyo xaafadaha iyo bulshooyinka si uu si wanaagsan ugu gargaaro shakhsiyaadka naafada koboceed leh iyo qoysaskooda.

### **YOOLKA (HADAFKA):**

Dadka naafooyinka leh iyo qoysaskoodu waxay sidii hore si ka badan u heli doonaan adeegyada iyo teknoolojiyadda taasi oo sare u qaadaysa hoggaaminta, helitaanka, badbaadada, madaxbannaanida, gaarista, sinnaanta, ku dhexjirka bulsho, caafimaadka, fursadaha shaqo, iyo bulshada.

### **Ujeedada iyo saamaynta mashruuca:**

Xaqiijinta wacyigalinta dadwaynaha gobolka oo dhan ee caawimaada Golaha Naafooyinka Koboceed ee Ohio isagoo adeegsanaya shaqadiisa deeqda iyo hawlaha kale isagoo isticmaalaya hababka isgaarsiinta ee kala duwan iyo ololayaal diiradda saaraya waxbarashada iyo wargelinta kusaabsan arrimaha la xiriira dadka reer Ohio ee leh naafooyinka koboceed. Tani waxay keeni doontaa koror xiriirada iskaashi ee lala yeelanayo ururada naafada, hay'adaha gobolka, guddiyada degmada ee Naafooyinka Koboceed, shakhsiyaadka leh naafooyinka koboceed iyo dadka caadiga ah. Iskaashiga kordhay wuxuu saamayn ku yeelan doonaa sii jiritaanka xubinimada Golaha ee ugu yaraan saddex degmo, si sanadle ah iyo/ama shakhsiyaadka matalaya dadka la hagraday sida ay qeexeen shuruudaha Xeerka Naafooyinka Koboceed.

### **Gogoldhigga, asbaabta, iyo baaxadda mashruuca:**

Wacyigalinta Dadwaynaha waxa xoogga lagu saarayaa Kaalmada Naafada Koboceed iyo Sharciga Xeerka Xuquuqda ee 2000 (DD Act) sida uu dhigayo Hirgalinta Qorshaha Gobolka iyadoo loo marayo Gaarista iyo Taageeridda iyo Waxbaridda Bulshooyinka. Waa muhiim in la aqoonsado shakhsiyaadka leh naafooyinka koboceed iyo qoysaskooda kuwaasi oo haddii kale aan ogaan lanayn Golaha iyo sidoo akle taageerada, lana baro iyadoo loo marayo qorshaha wacyigalinta dadwaynaha.

Golaha Naafooyinka Koboceed ee Ohio wuxuu siin jiray badeecado, barnaamijyo, dhacdooyin iyo hawlo kale sanado badan dadka reer Ohio. Hase yeeshee, guud ahaan, dadka intooda badan kama war qabaan doorka Goluhu ka ciyaaro abuurista himilooyinka, tijaabinta qaababka cusub ee adeegyada iyo taageerooyinka, iyo u baddalidda nidaamyada si u dan ah shakhsiyaadka leh naafooyinka koboceed.

Sidoo kale, dadwaynuhu guud ahaan ma fahamsana ama kama war qabaan arrimaha, waxyaabaha ay ku fiican yihiin, awoodaha, doorashooyinka iyo baahiyaha dadka leh naafooyinka koboceed. Sidoo kale intooda badan ma garawsadaan qiimaha dadka leh naafooyinka ee ah inay waxtar u leeyahiin bulshooyinkeena aynu wadaagno.

Badeecadaha Goluhu waa inay baraan, tabobaran oo bixiyaan macluumaad qiime leh oo u muhiim ah kuna saabsan dadka leh naafooyinka koboceed iyo qoysaskooda iyo kuwa taageera. Tan waxa ka mid ah guddiyada degmada ee naafooyinka koboceed, hay'adaha gobolka, ururada naafada, iyo xarumaha bulshada iyo daneeyayaasha kale ee la xiriira. Badeecadaha oo dhan waxa loo baahan yahay in gobolka oo dhan la wada gaarsiiyo.

Iyadoo laga duulayo qaybinta, sanad kasta, waxa la sameeyaa isku-dayo dadaalo iyo wada shaqayneed si la iskugu xiro guddiyada degmada ee naafooyinka koboceed si loo hubiyo in gaarista (outreach) si dhab ah loogu xisaabtamay. Shaqaalaha Goluhu waxay si joogto ah ugu qaybiyaan agabyo daabacan, waxayna sare u qaadaan helitaanka agabka elektarooniga ah (websayt, warbaahinta bulshada, warsidayaasha elektarooniga ah) ay helayaan guddiyada degmada, Waaxda Naafooyinka Koboceed iyo hay'ado kale ee naafooyinka koboceed ku lugta leh. Goluhu wuxuu la samaystay xiriiro wada shaqayneed oo xooggan ururo badan oo naafada ka shaqeeya si ay uga caawiyaan baahinta farriinta Golaha iyo in goluhu uu iyaga caawiyo.

Isagoo dadaaladan u maraya, Goluhu wuxuu awood u yeeshay inuu si tartartiib ah u abuuray kala jaadnimo xubnihiisa ah isagoo u maraya matalaad ballaadhan oo ah xagga isirka iyo noocyada kala duwan ee naafooyinka koboceed ee dadku qabaan. Sidoo kale, tani waxay keentay gaarista xubnaha Golaha ee ka socda degmooyinka gobolka oo dhan kuwaasi oon waligood hore loo gaarin, gaar ahaan meelaha baadiyaha ah ee gobolka.

Muddadii lagu jiray Qorshihii Gobolka ee Shanta sano ee 2017-2021, Goluhu wuxuu ballaadihiyey meelaha laga heli karo isagoo horumariyey websaytkiisa iyo isagoo isticmaalay warbaahinta bulshada, suuqgaynta emeylka iyo soosaarista fiidyawga. Mar kasta oo teknoolojiyaddu sii horumarto, deeq-helaha waxa laga fili doonaa inuu bixiyo qaabab cusub oo la socda horumarka teknoolojiyadda si Goluhu u gaaro horumarka iyo qaybinta badeecadahiisa iyo hawlihiisa. Isticmaalka aalado isgaarsiin oo la aqoonsan yahay ayaa daruuri ah, badeecadaha iyo hawlahana waa in lagu soosaaro iyadoo la adeegsanayo xeelado isgaarsiin oo habboon. Tusaale ahaan, dhammaan waa in lagu soo bandhigo luuqad isticmaalaha u fiican, oo ay fahmi karaan isticmaalina karaan dadka loogu talagalay oo dhan, oo ay kujiraan dadka naafooyinka leh iyo kuwa aan lahayn. Xeeladahan isgaarsiineed ee wax-ku-oolka ah waxa la isticmaali doonaa heerarka oo dhan- laga bilaabo gudaha ururka ilaa dadka caadiga iyo warbaahinta.

## **Hawlaha muhiimka ah:**

- Abuurista fikrado halabuur leh iyadoo la adeegsanayo aalado iyo farsamooyin isgaarsiin oo kala duwan si loo hirgaliyo ololayaasha wacyigalinta dadwaynaha iyo qoraalada (daabacan iyo/ama elektaroonik ah) iyadoo laga amar qaadanayo Guddida Fulinta Golaha iyo/ama Shaqaalaha Golaha.
- Abuurista fikrado halabuur leh marka la eego iftiiminta Xubnaha Golaha iyo hawlaha Golaha iyadoo la adeegsanayo aalado iyo farsamooyin isgaarsiineed oo kala duwan si loo kordhiyo danaynta xubnaha cusub iyo deeq-helayaasha cusub ee ku soo biiri kara.
- Marka waxyaabo ay hirgalinayaan ama bilaabayaan Guddida Fulintu iyo/ama Shaqaalaha Goluhu, hubinta in agabka - ha noqdo mid daabacan, fiidyaw, websayt, dhagaysi, iwm. - loo soosaaro qaabab la heli karo, cidda isticmaalaysana u fiican, oo ay kamid yihiin isticmaalka luuqad waadax ah iyo luuqadda la adeegsanayo magacuyaalka koowaad.
- Ku darista barnaamijka aqoonsiga muuqaalka ee Golaha (midab, astaan, qaab hage) dhammaan badeecadaha iyo hawlaha.
- Soosaaridda nuqulo badeecadaha oo luuqado badan ku qoran marka la codsado.
- Marka badeecado cusub la soosaaro, samaynta qorshe qaybineed marka la eego mashruuca gaarka ah kaasi oo ay kujiri doonaan gaarista meelaha iyo bulshooyinka la hagraday.
- La shaqaynta Khabiirka Nashqadda Elektarooniga ah ee Golaha si loogu daro dhammaan badeecadaha iyo macluumaadka wakhtigan/ku taxaluqa websaytka iyo warbaahinta bulshada.
- Xiriir shaqaynaya la samaynta warbaahinta iyo siinta war saxaafadeedka ku taxaluqa; uga jawaabidda waraysiyada sida loo codsado.
- Ka kaalmaynta shaqaalaha Golaha mashaariicda wacyigalinta dadwaynaha ee kale, oo ay ka mid yihiin badeecadaha loogu talagalay xubnaha Golaha iyo/ama dadka leh naafooyinka koboceed, qoysaskooda iyo daneeyayaasha.

## **Natijjooyinka:**

IFA I.1: Tirada dadka leh naafooyinka koboceed ee kaqaybqaatay hawlaha Goluhu taageeray ee loogu talagalay inay kordhiyaan aqoontooda ku aaddan sida looga qaybqaato go'aanada saamaynta ku leh noloshooda, nolosha dadka kale, iyo/ama nidaamyada: 15

IFA I.2: Tirada xubnaha qoyska ee kaqaybqaatay hawlaha Goluhu taageeray ee loogu talagalay inay kordhiyaan aqoontooda ku aaddan sida looga qaybqaato go'aanada saamaynta ku leh noloshooda, nolosha dadka kale, iyo/ama nidaamyada: 15

IFA 3.1: Boqolkiiba inta dadka naafooyinka koboceed leh oo ku qanacsan hawsha mashruuca.

IFA 3.2: Boqolkiiba inta xubnaha qoyska ku qanacsan hawsha mashruuca.

**Natijooyinka muddada dhaw:**

Koror aqoonta ah oo kusaabsan dadka naafooyinka leh, gaar ahaan meelaha la hagraday ee Ohio, iyo bulshooyinka dhexdooda halkaasi oo ay ku noolyahiin taageerada iyo waxbarashada ay ka helaan badeecadaha iyo/ama hawlaha Golaha iyo deeq-helayaashiisa.

Ugu yaraan hal dadaal iskaashi oo cusub ayaa la samayn doonaa si loo sii wado wacyigalinta wax-ku-oolka ah loona horumariyo tirada adka la gaaray ee ku aaddan dadka naafooyinka leh iyadoo loo marayo badeecadaha iyo/ama hawlaha Golaha iyo deeq-helayaashiisa.

Qorshe qaybin ah ayaa la aburi doonaa kaasi oo kusalaysan mashruuc kasta oo Golaha ah si loo xaqiijiyo in dadka loo dan leeyahay ee ugu badan la gaaro.

**Natijooyinka muddada fog:**

Marka la gaaro dhammaadka 2021, Kala jaadnimada xubnimada Golaha ayaa ballaaran doonaa si loo gaaro ugu yaraan matalaadda ugu yar sida ku cad Xeerka Naafooyinka Koboceed.

Marka la gaaro dhammaadka 2021, xubnimada Golaha ayaa gaari doona ugu yaraan shan degmo oo cusub.

**Macluumaadka lagu maalgalinayo:**

*Fadaraalka:	\$80,000.00
Lacagta Aan ta Fadaraalka Ahayn:	<u>\$26,667.00</u>
Wadarta:	\$106,667.00

\*Sii socoshada maalgalintu waxay ku xirnaan helitaanka lacagta.

**Qaabka maalgalinta:**

Tartan leh

**Deeq-helaha:**

Waa la go'aaminayaa

**GOLAHA NAAFOOYINKA KOBACEED EE OHIO (OHIO  
DEVELOPMENTAL DISABILITIES COUNCIL (ODDC))**

Sharraxaadda Mashruuca

2022 – 2026

**Marka la eego  
Dhanka  
Children and Health Projects (Mashaariicda Carruurta iyo Caafimaadka)**

**Xiriirka Shaqaalaha: Sara Rebecca Bates  
(614) 644-5548  
[Sara.Bates@dodd.ohio.gov](mailto:Sara.Bates@dodd.ohio.gov)**

## ISKU IMAANSHO

114 STAT. 1682 SHARCIGA DAWLADDA 106-402-OCT. 30, 2000

(2) gacan ka gaysiga nidaam dhammaystiran oo isku duwan, oo ka duulaya macmiilka iyo qoyska, ku waajahan qoyska kaasoo ah niadaam dhamaystiran oo adeegyada bulshada ah, taageerooyinka la khaas yeelay, iyo qaababka kale ee kaalmada ee awoodda u siinaya shakhsiyaadka qaba naafooyinka koboceed inay dabbaqaan aayo-ka-tashiga, noqdaan qaar madaxbannaan, waxsoosaar leh, oo kaqayb ah kana tirsan dhammaan dhinacyada nolosha ee bulshada.

### **Yoolka (hadafka):**

Dadka naafooyinka leh iyo qoysaskoodu waxay sidii hore si ka badan u heli doonaan adeegyada kuwaasi oo sare u qaadaya hoggaaminta, helitaanka, badbaadada, madaxbannaanida, gaarista, sinnaanta, u dhanaanshaha, caafimaadka, fursadaha shaqo, iyo bulshada.

### **Ujeedada iyo saamaynta mashruuca:**

Tiro badan oo ah qoysaska dadka leh naafooyinka koboceed ee Ohio ayaa aqoon u yeelan doona oo heli doona taageerooyinka jira si ay si wanaagsan uga caawiyaan u-doodista xubintooda qoyska.

### **Gogoldhigga, asbaabta, iyo baaxadda mashruuca:**

2012, Machadka Cilmibaarista Adeegyada Aadanaha (Human Services Research Institute (HSRI)), oo adeegsanaya maalgalin qayb ah oo uu ka helay Golaha Naafooyinka Koboceed ee Ohio ayaa fuliyey Xogururinta U-doodista Qoyska Ohio. Xogururinta waxa lagu ogaaday inay jiraan wax ka badan 160 ururada u-doodista qoyska ah. Barnaamijyada u-doodista qoysku waxay siiyaan adeegyo muhiim ah shakhsiyaadka iyo qoysaska Ohio oo dhan. Adeegyadani waxay ka kaalmeeyaan qoysaska helitaanka iyo dhexgalka nidaamyada badan oo la xiriira waxbarashada, naafooyinka, caafimaadka dhimirka, badbaadada, iyo waxyaalo kale. Sidoo kale, marka la eego xogururinta qorshaha Gobolka ee Shanta Sano oo la fuliyey 2019, boqolkiiba 44 qoysaska xogururinta kaqaybgalay wali may fahmin sida adeegyada loo helo.

Sidoo kale waxa jira baahi la garawsaday oo loo qabo adeegyada ay bixiyaan u-doodayaasha tabobaran. Warbixintii 2012 ee ka timi HSRI, 62% barnaamijyada xogururinta kaqaybgalay waxay sheegeen inay heleen codsiyo adeegyada u-doodista tabobaran bil kasta.

Golaha Naafooyinka Koboceed ee Ohio (ODDC) wuxuu jeclaan lahaa inuu maalgaliyo mashruuc caawinaya isku duwidda iyo taageerada ururada u-doodista qoyska ee

gobolka Ohio oo dhan. Mashruucani wuxuu sare u qaadi doonaa iskaashiga dhex maraya ururada u-doodista qoyska, kordhinayaa awoodda bulshadu kaga jawaabayso baahiyaha qoyska, kaqaybgalinaya qoysaska heerka bilawga si ay ugu doodaan horumarinta nidaamyada, oo waxuu kordhinayaa natiijooyinka la rabo ee qoysaska.

ODDC waxay taageeri doontaa hawlo dhisaya xirfadaha iyo isbaddalka nidaameed iyadoo loo marayo gaaris, tabobar, cilmibaaris, kaalmo farsamo, taageeridda iyo waxbaridda bulshooyinka, iskaashi iyo wada-shaqayn dhexmarta hay'adaha, soo bandhigga qaabab cusub, saamayn ku yeelashada siyaasad-dejiyayaasha, iyo dajinta iyo dib u dajinta nidaamka.

Qorshayaashu waa inay sheegayaan, haddii ay daruuri tahay: gaadiidka, helitaanka, isticmaalka teknoolojiyada, dib u samaynta, sii jiritaanka, haddii mashruucu gaaro gobolka oo dhan ama meel gaar ah, naafada kala duwan, iyo dhaqamada kala duwan.

### **Hawlaha muhiimka ah:**

- Koror ku yimaadda iskaashiga ka dhexeeya ururada u-doodista qoyska.
- Aasaasidda barnaamij taageero oo loo isticmaali karo dhammaan ururada u-doodista qoyska marka la tababarayo u-doodayaasha.
- Soosaaridda nidaam gudbineed oo loogu talagalay qoysasku inay ku helaan u-doodayaasha.
- Wax-ku-oolnimada mashruuca in lagu qiimeeyo ururinta xog.

### **Natiijooyinka:**

IFA 1.2: Tirada xubnaha qoyska ee kaqaybqaatay hawlaha Goluhu taageeray ee loogu talagalay inay kordhiyaan aqoontooda ku aaddan sida looga qaybqaato go'aanada saamaynta ku leh qoyska, nolosha dadka kale, iyo/ama nidaamyada: 20

IFA 2.3: Boqolkiiba dadka awoodaya inay sidii hore si dhaanta u sheegtaan waxay doonayaan ama sheegtaan adeegyada iyo taageerooyinka ay doonayaan ama sheegtaan waxa u muhiimka ah iyaga: 20%

SC 1: Tirada dadaallada Golaha ee inuu u baddalo qaababka wajahidda ee kala daadsan inay noqdaan nidaam wada socda oo wax ku ool ah oo xaqiijinaya in shakhsiyaadka leh naafooyinka koboceed iyo qoysaskoodu ay kaqaybqaataan nashqadda oo gaaraan adeegyada bulshooyinka ee ay u baahan yahiin, taageerooyinka shakhsiga ah, iyo noocyada kale ee kaalmo ee sare u qaadaya aayo-ka-tashiga, madaxbannaanida, waxsoosaarka, iyo ku dhexjirka iyo ka qaybgalka dhammaan dhinacyada nolosha ee bulshada: 1



\*ODDC waxay go'aaminaysaa qanacsanida macmiilka marka la eego halwaha Goluhu taageero ama fuliyo. Deeq-helayaasha waxa looga baahan doonaa inay ka kaalmeeyaan ODDC hannaankan.

**Natijooyinka muddada dhaw:**

Kordhinta joogtaynta dhaqanka iyo yaraynta ku cel-celinta adeegyada.

**Natijooyinka muddada fog:**

Kororka wax-ku-oolnimada adeegyada ka caawinaya qoysasku inay gaaraan wax kasta oo ay u arkaan inuu yahay nolol wanaagsan.

**Macluumaadka lagu maalgalinayo:**

**2022, 2023, 2024, 2025, 2026**

*Fadaraalka:	\$40,000.00
Lacagta u Dhiganta:	\$13,333.33
Wadarta	\$53,333.33

\*Sii socoshada maalgalintu waxay ku xirnaan helitaanka lacagta.

**Qaabka maalgalinta:**

Tartan leh

**Deeq-helaha:**

Gadaal ayaa Lagasoo sheegi doonaa

## QUWAYNTA QOYSASKA

SHARCIGA DADWEYNAHA 106-402-OCT. 30, 2000 – 114 STAT. 1680 (2) shakhsiyaadka leh naafooyinka koboceed iyo qoysaskoodu waxay leeyihiin xirfado, awoodo, iyo hadafyo shakhsiyeed oo ay tahay in la garawsado, la taageero, oo la dhiirigaliyo, oo wixii kaalmo ku aaddan shakhsiyaadkanina waa inay noqdaan qaar loo bixiyo qaab la khaas yeelay, oo waafaqsan waxyaabaha qofku ku fiican yahay ee goonida ah, khayraadka, mudnaanaha, tabashooyinka, kartiyaha, iyo awoodaha shakhsiyaadkan.

### **Hadafka:**

Dhammaan carruurta, dhallinyarta, iyo ardayda qaba naafooyinka garasho/koboceed, ee da'doodu u dhaxayso dhalashada ilaa 21 jir, waxay heli doonaan taageerooyin iyo adeegyo la khaas yeelay, caddayn kusalaysan oo lagu bixinayo iyada oo aan cidna laga tagayn kaasi oo ka caawinaya inay gaaraan waxa ugu badan ee ay gaari karaan, oo ay kujiraan hawlaha aan manhajka ku jirin.

### **Ujeedada iyo saamaynta mashruuca:**

Xubnaha qoyska ee dadka leh naafooyinka koboceed waxay heli doonaan macluumaad iyo taageerooyin sidoo hore ka badan si ay ugu helaan adeegyo waxbarasho oo loo dhan yahay ilmahooda.

### **Gogoldhigga, asbaabta, iyo baaxadda mashruuca:**

Wixii ka horreeyey 1975, malaayiin carruur ah oo naafo ahaa ayaa ama gabi ahaanba bannaanka looga saaray ama la geeyay heer xaddidan ee iskuulada dadwaynaha. Markuu sanadku ahaa 1975, Kongareeska ayaa ansixiyey Xeerka Waxbarashada Dhammaan Carruurta Naafada ah kaasi oo dhigaya in dugsiyada dadweynuhu ayna kaliya waxbarasho oo qudha siin ardayda naafooyinka leh laakiin sidoo kale ay siiyan taageerooyinka iyo adeegyada ay u baahan yihiin. Sharcigan waxa ku lammaansanaa in waalidku ku lug yeesho. Kongareesku wuxuu ugu qoray waalidiinta sharciga la dejiyey 1975 inay hubiyaan in carruurta naafooyinka leh ay yeeshaan u-doodayaal ilaalinaya xuquuqdooda ah inay helaan waxbarasho bilaash ah, habboon, oo dadwayne. Ilaa 1975, xeerka dhawr jeer ayaa dib loo ansixiyey, oo 1990 ayaa magaciisii loo baddalay Xeerka Waxbarashada Shakhsiyaadka Naafooyinka leh (Individuals with Disabilities Education Act (IDEA)). Intii isbaddaladani socdeen oo dhan, ku lug yeelashada waalidku way jirtay waxaana, xaqiiqdii lagu sii adkeeyey sharciga.

Hase yeeshee, IDEA waa wax wayn oo ay adag tahay in la fahmo. Waalidiin badan waxa ku adag inay bartaan sharciga. Waalidiin badan waxa ku adag inay si fiican uga sheegaan waxay doonayaan kulamada Qorshaha Waxbarashada la Khaasyeelay (Individualized Education Plan (IEP)) kuwaasi oo ay dugsiga la yeeshaan iyadoo ay ugu wacnaan karto dareenka ku saabsan inay ilmahooda ka hadlaan, gaar ahaan meel ay dareensan yahiiin culays badan oo ay ugu wacan tahay kala duwanaanshaha awoodda u dhaxaysa waalidka iyo dugsiga.

Xogururinta qorshaha gobolka ee 5 sano ee uu fuliyay Golaha Naafuoyinka Koboceed ee Ohio (ODDC) waxa lagu ogaaday waayo-aragnimada qoysaska ee nidaamka waxbarashada gaarka ah inuu yahay arrinta ugu muhiimsan iyaga. Iyadoo ay jiraan ka wax badan 250,000 oo arday oo dhigta dugsiyada Ohio iyo tirada taageerooyinka loo marinayo barnaamijka Hagaha Waalidka iyo u-doodayaasha Xuquuqda Naafada ee Ohio oo xaddidan, ODDC waxay maalgalinausaa mashruuc si ay u kordhiso una horumariso taageerada qoysasku ay helaan inta lagu jiro hannaanka waxbarashada gaarka ah.

ODDC waxay taageeri doontaa hawlo dhisaya xirfadaha iyo isbaddalka nidaameed iyadoo loo marayo gaaris, tabobar, cilmibaaris, kaalmo farsamo, taageeridda iyo waxbaridda bulshooyinka, iskaashi iyo wada-shaqayn dhexmarta hay'adaha, soo bandhigga qaabab cusub, saamayn ku yeelashada siyaasad-dejiyayaasha, iyo dajinta iyo dib u dajinta nidaamka.

Qorshayaashu waa inay sheegayaan, haddii ay daruuri tahay: gaadiidka, helitaanka, isticmaalka teknoolojiyada, dib u samaynta, sii jiritaanka, haddii mashruucu gaaro gobolka oo dhan ama meel gaar ah, naafada kala duwan, iyo dhaqamada kala duwan.

#### **Hawlaha muhiimka ah:**

- Qoysaska waxa sare u kici doonta aqoontooda hannaanka waxbarashada gaarka ah.
- Qoysaska waxa sare u kici doonta helitaankooda taageerooyinka dhammaan hannaanka waxbarashada gaarka ah.

#### **Natiijooyinka:**

IFA 1.2: Tirada xubnaha qoyska ee kaqaybqaatay hawlaha Goluhu taageeray ee loogu talagalay inay kordhiyaan aqoontooda ku aaddan sida looga qaybqaato go'aanada saamaynta ku leh qoyska, noloshu dadka kale, iyo/ama nidaamyada: 30

IFA 3.2: Boqolkiiba inta xubnaha qoyska ku qanacsan hawsha mashruuc: 60%

SC 1.3: Tirada dhaqanada rajada fiican leh iyo/ama ugu fiican ee la abuuray ama la taageeray: 1

\*ODDC waxay go'aaminaysaa qanacsanida macmiilka marka la eego halwaha Goluhu taageero ama fuliyo. Deeq-helayaasha waxa looga baahan doonaa inay ka kaalmeeyaan ODDC hannaankan.

**Natiijooyinka muddada dhaw:**

Qoysasku aqoontooda iyo taageeradooda ayaa kordhi doonta markay kaqaybqaadanayaan hannaanka IEP-ga

**Natiijooyinka muddada fog:**

Xubnaha qoyska ee shakhsiyaadka leh naafooyinka koboceed waxay helayaan taageerada ay u baahan yihiin si ay ehelkooda uga caawiyaan inay noqdaan xubno madaxbannaan, waxsoosaar leh, oo si buuxda uga qayb ah bulshadooda.

**Macluumaadka lagu maalgalinayo:**

**2022, 2023, 2024, 2025, 2026**

*Fadaraalka:	\$65,000.00
Lacagta u Dhiganta:	\$21,666.66
Wadarta:	\$86,666.66

\*Sii socoshada maalgalintu waxay ku xirnaan helitaanka lacagta.

**Qaabka maalgalinta:**

Tartan leh

**Deeq-helaha:**

Gadaal ayaa Lagasoo sheegi doonaa

## MADADAALADA CIDNA AAN LAGA TAGAYN

SHARCIGA DADWEYNAHA 106-402-OCT. 30, 2000 – 114 STAT. 1680 (7) iyada oo ay jiraan waxbarasho iyo taageero, bulshooyinku waxay noqon karaan kuwo u furan oo ka jawaaba baahiyaha shakhsiyaadka leh naafooyinka koboceed iyo qoysaskooda, waxaana lagu xoojin karaa ka qaybggaadashada dhammaystiran ee firfircoon ee hawlaha bulshada, gacan ka gaysiyada, marka la eego shakhsiyaadka leh naafooyinka koboceed iyo qoysaskooda;

### **Hadafka:**

Dadka naafooyinka leh iyo qoysaskoodu waxay sidii hore si ka badan u heli doonaan adeegyada kuwaasi oo sare u qaada hoggaaminta, helitaanka, badbaadada, madaxbannaanida, gaaris, sinnaanta, u dhanaanshaha, caafimaadka, fursadaha shaqo, iyo bulshada.

### **Ujeedada iyo saamaynta mashruuca:**

Dadka leh naafooyinka koboceed waxay kordhin doonaan jimicsiga ay sameeyaan si ay u horumariyaan caafimaadka hoosna ugu dhigaan halista cudurrada daba dheeraada.

### **Gogoldhigga, asbaabta, iyo baaxadda mashruuca:**

Sida ku cad Qorshaha Horumarinta Caafimaadka Gobolka Ohio (OSHIP) ee 2020, 43.9 boqolkiiba dadka leh naafooyinku Ohio waxay sheegeen inaysan helin wax jimicsi ah. Habnololeedka fadhiga ah, ama qofku aanu dhaqdhaqaaq lahayn waxay si joogto ah u ahaayeen qaar ka mid ah shanta arrimood ee keena cudurrada wadnaha. OSHIP waxay sheegtay in dadka leh naafooyinka ee Ohio ay yihiin dad aad ugu nugul inay qaadaan cudurrada wadnaha, dhiigkar, iyo macaan. Xogururinta Gobolka oo Dhan ee Qorshaha Shanta Sano ee Golaha DD ee OHIO (ODDC) waxa lagu ogaaday in jimicsiga, barashada jimicsiga ama in qofka dhaqdhaqaaqiisu bato ay u wanaagsan tahay caafimaadka. Sidaas darteed, Jimicsiga waxa la ogaaday inuu horumariyo xakamaynta gulukoosta dhiigga ee macaanka nooca 2, uu yareeyo arrimaha keena wadne xanuunka, inuu keeno in qofka aanu miisaan fuulin oo uu u wanaagsan yahay fayoaqabkiisa.

Dadka leh naafooyinka koboceed waxay waajahaan caqabado waawayn markay doonayaan inay helaan hawlaha caafimaadka iyo caafimaadqabka. Marar badan, macluumaadka iyo adeegyada sare u qaada caafimaadka iyo caafimaadqabka looguma talogalin inay tixgaliyaan rabitanadooda, baahiyaha iyo naafooyinka ay qabaan. Si ay u taageerto dadaalada lagu kordhinayo jimicsiga laguna horumarinayo caafimaadka dadka leh naafooyinka koboceed, ODDC waxay taageeri doontaa mashruuc siin doona

macluumaad iyo nidaamyada dhaqanada ugu wanaagsan si ay u kordhiso tayada iyo helitaanka adeegyada madadaalada marka la eego dadka leh naafooyinka koboceed iyo qoysaskooda. Mashruucu wuxuu sii ballaarin doonaa hindisayaasha jira sida Abuurista Bulshooyin Caafimaad Qaba, kaasi oo ah hindise sii maraya Waaxda Caafimaadka ee Ohio, si loo kordhiyo fursadaha loogu talagalay jimicsiga iyo madadaalada loo dhan yahay ee lagu soo darayo dadka leh naafooyinka koboceed ee bulshooyinkooda dhexdooda.

ODDC waxay taageeri doontaa hawlo dhisaya xirfadaha iyo isbaddalka nidaameed iyadoo loo marayo gaaris, tabobar, cilmibaaris, kaalmo farsamo, taageeridda iyo waxbaridda bulshooyinka, iskaashi iyo wada-shaqayn dhexmarta hay'adaha, soo bandhigga qaabab cusub, saamayn ku yeelashada siyaasad-dejiyayaasha, iyo dajinta iyo dib u dajinta nidaamka.

Qorshayaashu waa inay sheegayaan, haddii ay daruuri tahay: gaadiidka, helitaanka, isticmaalka teknoolojiyada, dib u samaynta, haddii mashruucu gaaro gobolka oo dhan ama mandaqad gaar ah, naafada kala duwan, iyo dhaqamada kala duwan.

#### **Hawlaha muhiimka ah:**

- Sare u qaadista iyo joogtaynta kaqaybqaadashada jimicsiga iyo madadaalada loo dhan yahay ee dadka leh naafooyinka koboceed.
- Siinta macluumaad iyo tabobar xarumaha iyo xirfadlayda xarumaha madadaalada si loo kordhiyo fursadaha jimicsiga iyo madadaalada loo dhan yahay ee loogu talagalay dadka leh naafooyinka koboceed ee bulshooyinkooda dhexdooda.

#### **Natijooyinka:**

IFA 3.1: Boqolkiiba inta dadka naafooyinka koboceed leh ku qanacsan hawsha mashruuc: 25%

IFA 3.2: Boqolkiiba inta xubnaha qoyska ku qanacsan hawsha mashruuc: 10%

SC 1.3: Tirada dhaqanada rajada fiican leh iyo/ama ugu fiican ee la abuuray ama la taageeray: 1

\*ODDC waxay go'aaminaysaa qanacsanida macmiilka marka la eego halwaha Goluhu taageero ama fuliyo. Deeq-helayaasha waxa looga baahan doonaa inay ka kaalmeeyaan ODDC hannaankan.

#### **Natijooyinka muddada dhaw:**

Dadka qaba naafooyinka koboceed waxay galaangal sidii hore ka badan u yeelan doonaan fursadaha jimicsiga iyo madadaalada ee loo dhan yahay.

**Natiijooyinka muddada fog:**

Dadka leh naafooyinka koboceed waxa soo wanaagsanaan doona dhisnaanta jireed iyo caafimaadkooda.

**Macluumaadka lagu maalgalinayo:**

	<b>2022, 2023, 2024, 2025, 2026</b>
*Fadaraalka:	\$24,000.00
Lacagta u Dhiganta:	<u>\$8,000.00</u>
Wadarta:	\$32,000.00

\*Sii socoshada maalgalintu waxay ku xirnaan helitaanka lacagta.

**Qaabka maalgalinta:**

Tartan leh

**Deeq-helaha:**

Gadaal ayaa Lagasoo sheegi doonaa

**GOLAHA NAAFOOYINKA KOBACEED EE OHIO (OHIO  
DEVELOPMENTAL DISABILITIES COUNCIL (ODDC))**

Sharraxaadda Mashruuca

2022 – 2026

**Marka la eego  
Dhanka  
Mashaariicda Nolosha Bulshada**

**Shaqaalaha lala Xiriirayo: Fatica Ayers  
(614) 644-5543  
[Fatica.Ayers@dodd.ohio.gov](mailto:Fatica.Ayers@dodd.ohio.gov)**



## WARBIXINTA DSP OO LA FULINAYO

SHARCIGA DAWLADDA 106-402-OCT. 30, 2000

(F) siinta tabobar ama kaalmo farsamo xirfadlayda (oo ay kujiraan shakhsiyaadka bixinaya adeegyada waxbarashada iyo baxnaaninta), loo-shaqeeyayaasha, ama shakhsiyaadka kale ee bixiya adeegyo, shaqaaleeya, amase si joogto ah ugu lugta leh dhinacyada muhiimka ah ee nolosha shakhsi leh naafooyin koboceed.

### **Yoolka (hadafka):**

Dadka leh naafooyinka garasho iyo koboceed waxa adeegyo iyo taageerooyin siiya xirfadlayda taageerada tooska ah kuwaasi aqoon leh, tabobaran oo la taageero.

### **Ujeedada iyo saamaynta mashruuca:**

Dhammaadka sanadka koowaad, deeq-heluhu wuxuu fiirin doonaa "Warbixinta" ay soosaaraan Waaxda Ohio ee Naafooyinka Koboceed iyo Xifadlayaasha Taageerada Tooska ah ee Xulafada Ohio oo go'aamin doonta talobixinaha la hirgalin doono.

### **Gogoldhigga, asbaabta, iyo baaxadda mashruuca:**

Warbixinta ku socota Madaxwaynaha 2017, Dhibaataada Shaqaalaha Taageerada Tooska ah ee Ameerika: Saamaynaha ay ku leedahay Dadka leh Naafooyinka Garasho, Qoysaska, Bulshooyinka, iyo Dhaqaalaha Maraykanku wuxuu sheegay sidan soo socota:

30 sano ee la soo dhaafay, waxa jiray shaqo ka tagis sarraysa dhanka shaqaalaha taageerada tooska ah. Ugu dhawaan kala bar DSP-yadu waxay ka tagaan shaqooyinkooda sanadka koowaad gudihisa, intooda badanna lixda bilood ee u horreeya gudahooga. Tan waxa keena qayb ahaan mushahar yari, dheefaha oo aan buurnayn, iyo tabobar la'aan. Celceliska mushaharka DSP waa \$10.72 saacaddii, kaasi oo ka hooseeya heerka saboolnimada marka la eego qoys ka kooban afar qof. Kala bar DSP-yadu waxay ku tiirsan yihiin dheefaha dawladda, intooda badanna waxay u baahan yihiin inay ka shaqeeyaan laba ama saddex shaqo.

Sidoo akle, Warbixinta ku socota Madaxwaynaha 2017: Dhibaataada Shaqaalaha Taageerada Tooska ah ee Ameerika waxay sheegaysaa:

"Dadka leh naafada garasho (ID) waxay ku tiirsan yihiin Xirfadlayaasha Taageerada Tooska ah (DSPs) marka la eego taageerada maalinlaha ah taasi oo awood u siisa inay ku dhex noolaan karaan bulshooyinka Maraykanka. Qoysaskoodu waxay ku tiirsan yihiin shaqaalaha DSP inay siiyaan taageero tayo leh oo la isku hallayn karo si markaa ay u shaqayn karaan oo nasashona uga qaadan karaan xaaladaha adag ee maalin kasta ee daryeelidda. Caqabadaha helitaanka, ilaalinta, iyo tabobaridda shaqaalahan waa mid taagan waxayna gaareen heerar dhibaato ah marka loo eego qaybta adeegyada iyo taageerooyinka muddada dheer (LTSS). Shaqaalaha taageerada tooska ah waa mid kamid ah kuwa loogu baahi badan yahay Maraykanka.

Waxaa taasi keenaysaa in dad badan ay taageerooyin iyo adeegyo u baahan yihiin, laakiin dadka shaqaalaha ah ee ku shaqeeya DSP ahaan ay kooban yihiin. Sidaas oo kale, lacagta la galiyo adeegyada ID/DD ayaa iyaduna yar. Marka dhaqaaluhu xun yahay ee dadku shaqooyin u baahan yihiin, hay'aduhu way heli karaan dad ku shaqaysta DSP ahaan. Laakiin markii shaqo la'aantu ay hoosayso, waa wax adag helitaanka dad ku shaqaysta taageerada tooska ah. Wakhtigan, ka badan 9% shaqooyinka DSP waa bannaan yihiin. Tani waxay ku abuurtaa shaqo dheeraad ah iyo culays DSP-yada shaqada ku jira, waxayna keentaa daryeel tayadiisu hoosayso. Shaqaalaha DSP-yada ee ku daala shaqaynta saacado badan ama ka shaqeeya hal shaqo ka badan waxay aad ugu dhaw yihiin inay sameeyaan qaladaad iyo inay waajahaan xaalado culays badan. Marka shaqaalaha DSP-yadu aysan garanayn dadka ay taageerada u fidinayaan, waxa dhici karta inaysan aqoonsan calaamadaha iyo astaamaha jirrada.

Taageerada ay u baahan yihiin shakhsiyaadka leh Naafada garasho ama naafada koboceed (ID/DD) sida badan waxa siiya daryeelayaasha qoyska ka tirsan iyo shaqaalaha mushahar qaata. Taageerada mushaharka lagu qaato, oo gacanta ku haysa waxaa inteeda badan waxa qabta DSP-yada. Iyadoo ay ugu wacan tahay heerarka sare ee baahida kaalmo ee dadka leh ID/DD, Kongareesku wuxuu ogaaday in "maadaama ay sii kordhayso tirada shakhsiyaadka leh naafooyinka koboceed ay ku nool yihiin, wax ku baranayaan, ka shaqaynayaan kana qaybqaadanayaan dhammaan dhinacyada noloshu ee bulshada, inay jirto baahi sii kordhaysa ee shaqaale si fiican loo tabobaray... si loo siiyo adeegyada, taageerooyinka iyo qaabab kale ee kaalmo ee loo baahan yahay si awood loogu siiyo shakhsiyaadka inay fuliyaan hawlahaas" (Sec. 101(a)(14)). Mutaysiga III ee Xeerka DD, kaasi oo diiradda saaraya barnaamij loogu talagalay shaqaalaha taageerada tooska ah kuwaasi oo siiya kaalmo shakhsiyaadka leh naafooyinka koboceed, wuxuu muujinayaa in shaqaalahan ay doorar muhiim ah ka ciyaareen taageeridda dadka leh ID/DD iyo ballaarinta ikhtiyaarooda bulshadooda dhexdeeda.

Si loo hubiyo in dadka leh ID/DD ay isticmaali karaan dhammaan wixii ay bulshada ka heli karaan, waxa waajib ah inay helaan taageero xirfad ku dheehan tahay oo ay bixiyaan shaqaalaha taageerada tooska ah sugan, si fiicanna u diyaarsan. Caqabad kale oo haysata shaqaalaha DSP waa in taageerada tooska ah aan loo arag xirfad

qiime leh oo jirta, waxaana markaa jirta fursad yar in qofku sare u qaado aqoontiisa shaqadaas. Shaqaalaha taageerada tooska ah iyo nidaamka adeegga ee taageera waxay kujiraan xaalad xun. Natiijadu waxay noqon doontaa mid masiibo ku ah dadka qaba ID/DD iyo qoysaskooda haddii mar uun isbaddalo muhiim ah la samayn waayo."

Xog-ururinta Qorshaha Gobolka 5 Sano ee Golaha Naafooyinka Koboceed ee Ohio, tiro su'aalo ah ayaa laga waydiiyey bixiyayaasha/xirfadlayaasha taageerada tooska ah sida:

S20 - Dadka leh naafooyinka waxa la waydiiyey inay sheegaan aragtidooda ku aaddan sida adeeg bixiyahoodu uu si ka fiican ugu adeego karo. Waxa jiray 318 jawaabood oo ka soo noqday 324 kaqaybqaate (heerka kaqaybqaadasho 98.1%).

Kaqaybqaatayaasha waxay awood u lahaayeen inay doortaan hal jawaab ka badan.

S48 - Xubnaha qoyska waxa la waydiiyey waxay u malaynayaan inuu adeeg bixiyuhu sidii hore si dhaanta ugu qaban karo xubinta qoyskooda ah ee naafada ah. Waxa jiray 590 jawaabood oo ka soo noqday 598 kaqaybqaate (heerka kaqaybqaadasho 98.7%).

Kaqaybqaatayaasha waxay awood u lahaayeen inay galiyaan hal jawaab ka badan.

S77 - Adeeg bixiyayaasha iyo daneeyayaasha sidoo kale waxa la waydiiyey waxay u malaynayaan in xirfadlaha taageerada tooska ah qofku uu sidii hore si dhaanta u qaban karo. Waxa jiray 580 jawaabood oo ka soo noqday 581 kaqaybqaate (heerka kaqaybqaadasho 99.8%). Kaqaybqaatayaashu waxay awood u lahaayeen inay xushaan hal jawaab ka badan su'aashan.

Koox kasta waxay xuseen baahida loo qabo tabobar dheeraad ah oo la siiyo Xirfadlayaasha Taageerada Tooska ah.

Wixii ka horreeyay aafada cudurka safmarka ah, Xirfadlayaasha Taageerada Tooska ah ee Xulafada Ohio iyo Waaxda Naafooyinka Koboceed ee Ohio waxay ku shaqaynayaan "Warbixin" si ay u iftiimiyaan xogta kuna taliyaan nidaam lakabyo leh oo gobolka oo dhan ah oo loogu talagalay DSP-yada kaasi oo abuuray dallacaadyo shaqeed oo ka jira heerarka kala duwan oo sidoo kale ku dhasnaa dariiq looga gudbayo DSP looguna gudbiyo shaqooyinka kale ee xayndaabkaas ka jira.

"Warbixintu" waxay xogta ka keeni lahayd xogururinaha iyo daraasadaha la sameeyey inta dhibaataadu jirtay. Talobixinaha "Warbixintan" waa inay xoojiyaan xaqiiqda ah in DSP-yadu yihiin *xirfadlayaal* una qalmaan in looga *garaabo* inay awood u yeeshaan inay kasbadaan mushahar noloshooda kaafiya iyo in waxa ay qaadanayaan la kororto waayoaragnimooda iyo tabobarka. Macnaha guud ee warbixintu waxay ammaan u jeedin doontaa Ohio maadaama uu yahay gobolka KALIYA ee waddanka waxa qofka shaqaalaha la siinayaa ay la kororto waayoaragnimadiisa, laakiin waxay iftiimin doontaa caqabadaha qaabdhismeedka wakhtigan kuna talin doontaa "dib-u-eegidda" nuxurka koobaya DSP-yada oo dhan.

ODDC waxay jeclaan lahayd inay lacag galiso mashruuc dib u eegi doona "Warbixinta" markii la dhammaystiro oo go'aamin doona talobixinaha xaqiiqdii la hirgalin karo, siina waari kara.

#### **Hawlaha muhiimka ah:**

- Dib-u-eegidda "Warbixinta".
- Warbixin siinta Nolasha Bulshada Community Living) ee talobixinaha la hirgalin doono.
- Go'aaminta sida talobixinaha loo hirgalin doono.
- Hirgalinta talobixinaha.

#### **Natijjooyinka:**

SC 1.3.2: Tirada ballanqaadyada rajada fiican leh ee lagu taageeray hawlaha Golaha.

SC 1.4: Tirada dadka lagu tabobaray ama wax lagu baray hawlaha isbaddalka nidaameed ee Golaha.

\*ODDC waxay go'aaminaysaa qanacsanida macmiilka marka la eego halwaha Goluhu taageero ama fuliyo. Deeq-helayaasha waxa looga baahan doonaa inay ka kaalmeeyaan ODDC hannaankan.

#### **Natijjooyinka muddada dhaw:**

Mashruucu wuxuu dib u eegi doonaa "Warbixinta" wuxuuna go'aamin doonaa talobixinaha la hirgalin doono.

#### **Natijjooyinka muddada fog:**

Mashruucu wuxuu soosaari doonaa qaabab lagu joogtaynayo hawlaha la hirgalinayo ee laga keenay talobixinaha ku yaala "Warbixinta."

#### **Macluumaadka lagu maalgalinayo:**

**2022, 2023, 2024, 2025, 2026**  
\*Fadaraalka: \$40,000.00  
Lacagta u Dhiganta: \$13,333.33

Wadarta: \$53,333.33

\*Sii socoshada maalgalintu waxay ku xirnaan helitaanka lacagta.

**Qaabka Maalgalinta:**

Tartan leh

**Deeq-helaha:**

Waa La Go'aaminayaa

## **KOOBI GARAYNTA IYO BALLAARINTA MASHRUUCA GAADIIDKA**

SHARCIGA DAWLADDA 106-402-OCT. 30, 2000

(11) shakhsiyaadka leh naafooyinka koboceed waxay u baahan yihiin inay galaangal u yeeshaan oo adeegsadaan gaadiidka dadwaynaha, si ay u noqdaan qaar madaxbannaan oo si toos ah gacan uga gaysta kana qaybqaata dhammaan dhinacvada nolosha bulshada:

### **Yoolka (hadafka):**

Dadka naafooyinka leh iyo qoysaskoodu waxay sidii hore si ka badan u heli doonaan adeegyada iyo teknoolojiyadda taasi oo sare u qaadaysa hoggaaminta, helitaanka, badbaadada, madaxbannaanida, gaarista, sinnaanta, ku dhexjirka bulsho, caafimaadka, fursadaha shaqo, iyo bulshada.

### **Ujeedada iyo saamaynta mashruuca:**

Marka la gaaro dhammaadka sanadka labaad ee mashruuca, ugu yaraan laba meelood oo ka baxsan Degmada Athens iyo degmooyinka doortay inay qayb ka noqdaan ayaa heli doona kaalmo farsamo iyo tabobar kusaabsan sida loo bilaabo nidaam gaadiid kaasi oo soo saaraya lacag, wada-shaqayn leh, oo kaligiis is wadi kara.

### **Gogoldhigga, asbaabta iyo baaxadda mashruuca:**

Golaha Naafooyinka Koboceed ee Ohio wuxuu fuliyey daraasad kusaabsan gaadiidka taasi oo lagu ogaaday in helista gaadiid badbaado leh, raqiis ah, oo habboon ay aad ugu adag tahay dadka reer Ohio ee naafooyinka leh. Gaadiidka hadda jiraa had iyo jeer ma hawlgalaan mararka qaar ama kamana hawlgalaan meelaha looga baahan yahay. Gaadiidka jiraa sida badan uma adeego, ama uma adeegi karo naafooyinka kala duwan ee bulshada dhexdeeda ka jirta. Waxa jira caqabado xagga jadwalka ah kuwaasi oo keena in qofku sugo muddo dheer si uu gaadiid u helo. Dadka rakaabka ah may rumaysnayn inay qaadan karaan go'aano socdaal oo degdeg ah ama furfuran, taasi oo xaddidaysa ama ka horjoogsanaysa inay kaqaybqaataan hawlo kala duwan, carqaladna ku ah dhexgalka bulshadooda. Marka dhankooda la fiiriyo, bixiyayaasha adeegga gaadiidku waxay muujiyeen inay dhib ku qabaan dheellitirka buuxinta baahiyaha macaamiishooda iyadoo ay jiraan caqabado miisaaniyadda ah iyo shuruudaha qaynuunka iyo waraaqaha. Daneeyayaasha kala duwan - dadka reer Ohio ee leh naafooyinka, bixiyayaasha adeegga gaadiidka, iyo xirfadlayaasha kale - inta badan heshiis ayey ka ahaayeen aqoonsiga xaaladaha jira, waxayna inta badan isku raacsanaayeen xalalka ugu haboon.

Bulshada Ohio si gaabis ah ayey u koraysaa marka loo eego gobolo kale oo badan. Meelaha Ohio ay dadku kordhayaan, kororka inta ugu badan waxa keenaya dadyowga waddamada kale ka soo jeeda. Inta ugu badan shakhsiyaadkani waxay u soo guurayaan magaalooyinka. •• Bulshooyinka waddamada kale soo jeeda waxay aad u doorbidaan raacitaanka gaadiidka dadwaynaha. Qaar badani waxay filayaan oo doonayaan adeegyada gaadiidka dadwaynaha haddii ay doonayaan inay Ohio si rasmi ah u degaan. Dadka reer Ohio waa sii duqoobayaan oo sabool sii noqonayaan, gaar ahaan meelaha baadiyaha ah. ••Dadka waayeelka iyo kuwa saboolka ah waxay si aad ah ugu tiirsanaan doonaan gaadiidka dadwaynaha, taasi oo cadaadis dheeraad ah saari doonta nidaamyada gaadiidka si loo buuxiyo baahidan sii kordhaysa. Adeegyada caafimaadka iyo aadanuhu waxay si sii kordhaysa diiradda u saarayaan inay dadka ugu adeegaan bulshooyinkooda dhexdooda; waxayna ku boorinayaan inay dadka guryahooda joogaan.

••Hirgalinta barnaamijyadani waxay u baahan yihiin maalgalin u dhiginta oo gaadiidka ah; tan waxa lala kaashan karaa adeegyada gaadiidka dadwaynaha si loo yareeyo in adeeg iyo dadaal isku mid ah uu soo noqnoqdo. (Daraasadda Baahiyaha Gaadiidka Gobolka Ohio oo Dhan ee 2014)

Barnaamijka tijaabada ah, oo ah Athens On Demand Transit, waxa la hirgaliyey Noofambar 2012. Adeeggu wakhtigaas wuxuu lahaa gaadiid qafilan oo yaryar oo waafaqsan ADA oo kursiga curyaanku gali karo. Adeeggu dalab ayuu ka jawaabayey waana in rakaabku bixiyaan ogaysiis 24 saacadood kahor ah wixii codsiyo safar ah. Dadka daryeelka shakhsiga ah ka shaqaynayaa lacag la'aan ayey ku raacayaan. Tabobar socdaalka ah ayaa la bixinayaa si looga caawiyo rakaabka inay fahmaan sida adeeggu u shaqeeyo. AODT waxay isticmaashaa softiweer jadwal samaynta ah iyo kala diridda loo adeegsado oo laga helay shirkadda loo yaqaan PCTrans. HAPCAP waxay horeba uga iibsatay PCTrans alaab ay ugu talogashay Logan Public Transit, aadna qaali umay ahayn in lagu daro shatiyada isticmaalka AODT. (Warbixinta Qiimaynta Dibadda ee 2013 ee Waaxda Gaadiidka ee Ohio)

AODT waxay rakaab kasta kaadhka mudnaanta gaarka ah ku siisaa meesha lagu dajinayo. Kaadhku wuxuu muujinayaa magaca iyo lambarka taleefanka gacanta ee darawalka qaadi doona qofka rakaabka ah, iyo sidoo kale wakhtiga la qaadayo. Dadka rakaabka ah waxa loo sheegaa inay xirtaan Qoolka Athens On Demand Transit, iyadoo kaarka mudnaanta gaarka ahna kujiro galka qoolka. (Warbixinta Qiimaynta Dibadda ee 2013 ee Waaxda Gaadiidka ee Ohio)

Athens On Demand Transit wuxuu u shaqeeyaa si wanaagsan raacitankiisuna wali waa sii badanayaa. Wax badan oo tan kamid ah waxa keenay jadwalka iyo qorshaynta oo la horumariyey. Raacitaanka soo noqnoqda ee macaamiishooda Naafooyinka Kobaceed wuxuu u dhigmaa 75-80% goobaha oo dhan, qaar badan oo kuwan ah waxay ku lug leeyihiin hawlo shaqo la xiriira.

2020 AODT waxay ballanqaaday inay u bixiso gaadiid raqiis ah oo la adeegsan karo ee qaab xirfad iyo badbaado ku dheehan tahay. Dillaaca cudurka COVID-19 wuxuu sii

kordhiyey kaliya baahida. AODT, iyo barnaamijyadeeda kale ee gaadiidka, waxay sii wadeen inay shaqeeyaan wakhtiga dhibaataada iyadoo isbaddalo kooban sameeyay. Marka la eego arrinta Athens On Demand Transit, waxay sameeyeen isbaddaladan soo socda -

- Waxay si aad ah u kordhiyeen dhaqanooda nadiifinta iyo jeermis-dilidda.
- Baabuurta qafilan waxa lagu masaxaa jeermis-dile inta u dhaxaysa safar kasta, si dhammaystiran ayaana loo nadiifiyaa oo jeermiska looga dilaa dhammaadka maalinta.
- Muddada Amarka Joog Guriga, waxay si kumeel gaar ah u hakiyeen adeegga Sabtida. Intaa kadibna dib ayey u bilaabeen adeegga Sabtida.
- Waxay sii wadeen inayna lacag rakaabka ka qaadin. Tani waxay yaraysay culayska maaliyadeed ee dheeraadka ah ee saarnaa dadka markii horeba iska dhibanaa. Sidoo kale waxay meesha ka saartay hal shay oo kale oo ay suurtoagal ahayd in jeermisku u kala gudbo rakaabka iyo darawalada.
- Darawalada waxa lagu amray inay xirtaan waji dabool.
- Rakaabka sidoo kale waxa looga baahday inay xirtaan waji dabool sida uu dhigayo amarka gobolku.
- Baabuurta qafilan ee AODT waxa ku socota in lagu xiro darbi ilaalineed oo marna la xiri karo marna la furi karo kaasi oo ka caawin doona darawalka iyo rakaabka inaysan isu gudbin COVID-19.

Goluhu wuxuu jeclaan lahaa inuu laba qaab oo mashruuca gaadiidka ah uu ula maalgaliyo AODT:

- Inay fuliso tijaabo u saamaxaysa AODT inay adeeg gaadiid siiso wixii ka baxsan degmada Athens iyo dadka loo adeegayo ee leh naafooyinka inay ugu horreeyaan dadka la qaayo. In lagu daro teknoolojiyadda markii loo baahd.
- La shaqeeyaan degmooyinka danaynaya si ay u koobi gareeyaan guusha mashruucooga oo diiradda u saaraan qaabab looga sameeyo lacagta, wada shaqayn ay u samaynayaan, oo u helaan qaabab ay isku filaansho u gaarayaan.

#### **Hawlaha muhiimka ah:**

- Soosaaridda nidaam loogu talagalay gaadiidka degmada ka baxsan ee shakhsiyaadka leh naafooyinka (sida Jadwal dajinta, baahiyaha darawalka iyo gaadiidka, kharashka, iwm.)
- Raadinta teknoolojiyad si loo kaalmeeyo jadwal dajinta iyo isgaarsiinta safarada degmada ka baxsan.
- Go'aaminta waxyaalaha ugu waawayn ee keenaya safarka marka la eego shakhsiyaadka leh naafooyinka ee u socdaalaya dibadda degmada si loo kaalmeeyo ururinta xogta, baahiyaha bulshada, iyo qorshaynta mustaqbalka.
- Go'aaminta kharashka waxyaalaha keenaya safarka marka la eego shakhsiyaadka leh naafooyinka ee u socdaalaya dibadda degmada si loo kaalmeeyo ururinta xogta, qorshaynta mustaqbalka, baahida.



- Barnaamijka Athens Hocking Mobility Management Program wuxuu xiriir la samaynayaa degmooyinka danaynaya inay koobi gareeyaan Barnaamijka AODT.
- Barnaamijka AHMM wuxuu qaban doonaa tabobarro iyo guudmarro barnaamij oo loogu talagalay degmooyinka danaynaya marka la eego koobi garaynta barnaamijka AODT.
- Barnaamijka AHMM wuxuu siin doonaa taageero dalabyada degmooyinka dalbanaya inay koobi gareeyaan barnaamijka AODT.
- Barnaamijka AHMM wuxuu la shaqayn doonaa AODT si uu u martigaliyo degmooyinka danaynaya uguna hadlo maalgalinta iyo hawlgalka barnaamijka.

### **Natijooyinka:**

SC 1.1: Tirada siyaasadaha iyo/ama habraacyada la abuuray ama la baddalay: 3

SC 1.4: Tirada dadka la tabobaray ama la affixiyey iyadoo loo marayo hindisayaasha nidaameed ee Golaha: 150

\*ODDC waxay go'aaminaysaa qanacsanida macmiilka marka la eego halwaha Goluhu taageero ama fuliyo. Deeq-helayaasha waxa looga baahan doonaa inay ka kaalmeeyaan ODDC hannaankan.

### **Natijooyinka muddada dhaw:**

Dadaalo xeeladeed ayaa la samayn doonaa si loo hubiyo in dadka naafooyinka leh ee aagagga Athens ay awood ugu yeeshaan inay u socdaalaan dibadda Degmada Athens.

### **Natijooyinka muddada fog:**

Degmooyin la soo xulay oo ku yaala meelaha baadiyaha ah ee gobolka oo danaynaya inay helaan kaalmo farsamo oo ku aaddan koobi garaynta gaadiidka abaabulan kaasi oo ay kujiraan kaalmada farsamo ee sida looga dhaliyo lacagta, wada shaqayn loo sameeyo loona helo qaabab la iskugu fillaan karo ayaa ay heli doonaan.

**Macluumaadka lagu maalgalinayo:**

**2022, 2023, 2024, 2025, 2026**

\*Fadaraalka: \$80,000.00  
Lacagta u dhiganta: \$26,666.66  
Wadarta: \$106,666,66

\*Sii socoshada maalgalintu waxay ku xirnaan helitaanka lacagta.

**Qaabka maalgalinta:**

Tartan leh

**Deeq-helaha:**

Waa La Go'aaminayaa

## **MASHRUUCA SOAR OIHO & GOLAHA NOLOSHA MADAXABANNAAN EE GOBOLKA OO DHAN EE OHIO**

SHARCIGA DAWLADDA 106-402-OCT. 30, 2000

(7) iyadoo ay jiraan waxbarasho iyo taageero, bulshooyinku waxay qaabili karaan oo ka jawaabi karaan baahiyaha shakhsiyaadka leh naafooyinka koboceed iyo qoysaskooda, waxaana lagu xoojin karaa kaqaybgqaadashada dhammaystiran ee firfircoon ee hawlaha bulshada, gacan ka gaysiyada, marka la eego shakhsiyaadka leh naafooyinka koboceed iyo qoysaskoodu; (C) ku darid hawlaha la xiriira wadashaqaynta hay'adaha dhexdooda iyo midaynta nidaamyada kuwaasi oo keenaya adeegyo, taageerooyin, iyo kaalmooyinka kale oo la horumariyey lana xoojiyey oo gacan ka gaysanaya oo dhawraya aayo-ka-tashiga, madaxbannaanida, waxsoosaarka, iyo midaynta iyo ka wada qaybgalka dhammaan dhinacyada nolosha ee bulshada, ee shakhsiyaadka leh naafooyinka koboceed.

### **Yoolka (hadafka):**

Dadka leh naafooyinka koboceed iyo qoysaskooda/masuuladooda waxa lagu xoojiyaa inay go'aan ka gaaraan noloshooda si ay u gaaraan halka ugu sarraysa ee ay gaari karayaan.

### **Ujeedada iyo saamaynta mashruuca:**

Markay dhammaato saddex sano, mashruuca SOAR Ohio wuxuu ku tabobari doonaa wax ka badan 300 oo maareeyaal kiis ah iyo shaqaale Xarunta Nolosha Madaxabannaan gobolka oo dhan wax kusaabsan farsamooyinka guud ee horumarinta oggolaanshaha dalabyada SSI iyo SSDI. Mashruucu wuxuu si gaar ah diiradda u saari doonaa sidii si dhakhso ah isla markaana meelmar ah dheefahu uga gudbi lahaayeen hay'adda uguna gudbi lahaayeen bulshada. Sidoo kale wuxuu siin doonaa kaalmo farsamo si loo go'aamiyo sababta faa'iidadu ay dib ugu dhacday iyo sida ugu wanaagsan ee dhibaataada loo xallin karo.

### **Gogoldhigga, asbaabta, iyo baaxadda mashruuca:**

Mashruuca SOAR Ohio ee Iskaashiga Darbijiifka iyo Guriyeynta Ohio wuxuu ka caawiyaa dadka reer Ohio ee aadka u nugul inay gaaraan caafimaad iyo madaxbanaani wayn isagoo siinaya guryeyn badbaado leh, fiican, oo raqiis ah. Mashruuca SOAR Ohio wuxuu ku takhasusay ka caawinta shakhsiyaadka leh naafooyinka ee isku diyaarinaya inay xarumaha ka baxaan inay helaan faa'idooyinka Supplemental Security Income/Social Security Disability Insurance (SSI/SSDI) – taageero muhiim ah oo albaabka u furta guriyeynta iyo degganaansho muddo dheer. Hannaanka dalabka ee SSI/SSDI aad ayuu u kakan yahay waana adag tahay in laga hawlgalo, gaar ahaan dadka dhibaataada darbijiifnimada qaba ama ka soo baxaya xarun, taasi oo noqon karta caqabad aad u wayn. COHHIO waxay qaadatay moodada

SOAR (SSI/SSDI, Gaarista, Helitaanka, iyo Soo Kabashada), kaasi oo ah qaab caddayn kusalaysan oo si aad ah loogu dadajin karo hannaanka sarena loogu qaadi karo suurtagalnimada in la aqballo. **COHHIO waxa loo xilsaaray inay noqoto hay'adda hoggaaminta SOAR ee Ohio waxaana u xilsaaray Maamulka Adeegyada Isticmaalka Daroogada iyo Caafimaadka Dhimirka (SAMHSA).**

Waaxda Ohio ee Medicaid waxay uga faa'iidayatay si meelmar ah Mashruuca SOAR Ohio si ay uga caawiso dad ka diiwaangashanaa barnaamijka HOME Choice ee ka baxayay daryeelka xarumeed inay dhakhso u helaan dheefaha SSI iyo SSDI. Barnaamijku sidoo kale wuxuu caawiyey kuwii isku dayey inay ka soo raraan dheefaha xarunta oo keenan bulshada.

Goluhu wuxuu rumaysan yahay in mashruuca SOAR Ohio uu siin karo taageero muhiim ah dadka ka diiwaangashan Barnaamijka Kaalmada Kirada ee Waaxda Naafooyinka Koboceed ee Ohio.

Kala-tagsanida: Qaar kamid ah dadka ka wareegaya xarun ee u wareegaya bulshadu waxay la kulmaan dib u dhacyo waawayn dhanka helitaanka faa'idadooda bulshada ee buuxda oo ah \$771 bishii. Intaas kahor, sida badan waxa waajib ku ah inay nafta ku sasabaan heerka xarumeed oo ah \$30 bishii, taasi oo qiyaastii mid aan suurtagal ahayn ka dhigaysa helitaanka guriyeynta.

Isagoo adeegsanaya iskaashiga uu la leeyahay Maareeyaha Guriyeynta DODD, mashruuca SOAR Ohio horeba wuxuu uga shaqaynayey xallinta dib u dhacyada faa'idada taasi oo saamaysay shakhsiyaadka leh naafada koboceed ee ka wareegaya xurmaha una wareegaya bulshada. In kastoo wax ka qabashadani ay daruuri yihiin, tabobar iyo waxbarasho balaadhan tahay ayay suurtagal ahaan lahayd inay yeeshaan saamayn juquraafiyeed oo wayn, taasi horseedi lahayd xalal "xilli hore ah" marka la eego dib u dhacyada faa'idooyinka. Waxaanu rumaysannahay inay tani yarayn doonto dib u dhacyada faa'idada, kordhin doonto helitaanka guriyeynta, oo ugu dambaynta keeni doonto isdhexgal bulsho oo meelmar ah.

Hiigsiga Noloshu Madaxabannaan ee Gobolka oo Dhan waa ka kaalmaynta dadka reer Ohio ee leh naafooyinka waawayn riyadooda madaxbannaanida. Ohio waxay leedahay 12 CIL-yo oo si gudaha ah loo maamulo kuwaasi oo bixiya adeegyo si ay uga kaalmeeyaan dadka naafooyinka daran leh inay si madaxbannaan u noolaadaan oo ka fogaadaan ku noolaanshaha xarumaha. Adeegyada ay bixiyaan waxa kamid ah macluumaad gudbin, u-doodis, talo ka timaadda cidda xaaladooda oo kale soo martay, iyo tabobar xirfadaha noloshu madaxabannaan. Goluhu wuxuu jeclaan lahaa mashruuca SOAR Ohio inuu ugu daro tabobar iyo kaalmo farsamo CIL-yada Ohio si lacag la'aan ah, si ay u siiyaan shaqaalahooda aqoon, xirfado iyo farsamooyin dheeraad ah oo ay ku kaalmeeyaan dadka leh naafooyinka arrimaha SSI/SSDI.

**Mashruucani kaliya kuma eka maareeyayaasha kiisaska, shaqaalaha SSA-yada iyo OSILC. Ciddii kasta ee taageeraysa dadka leh naafooyinka ee uga baahan kaalmo farsamo arrintan waxay awood u yeelan doontaa inay hesho.**

### **Hawlaha muhiimka ah:**

- Aqoonsiga diiwaanka SSA iyo buuxinta koorsada onlaynka ah ee is-wadda ee National SOAR marka la eego 20 C.E.U. oo bilaash ah oo shahaadadana ay bixinayso SAMHSA SOAR TA Center.
- Si fool-ka-fool ah uga qaybgalka shahaado bixinta SOAR Ohio iyadoo ahmiyadda koowaad la siinayo aaladaha iskaashiga Fadaraalka iyo Gobolka, markii si meelmar ah loo dhammeeyo koorsada Onlaynka ah ee National. Waxaa la bixinayaa afar jeer sanadkii iyadoo lagu dhiganayo fasal ay kujiraan 25 qof. Shahaadada dhammaystirka waxa la bixinayaa fasalka kadib.
- Tabobar webka laga bixinayo iyo TA loogu talagalay dhammaan shaqaalaha tabobaran ee hadda ee shahaado ka qaatay SOAR Ohio oo marka loo baahdo ah oo ay weheliyaan afar webinaarada GoTo ah oo loo qorsheeyay si rubucle ah.
- Kulamo GoTo ah oo rubucle ah oo loogu talagalay dhammaan shaqaalaha shahaado ka haysta SOAR inay kaqaybgalaan si ay u helaan xogtii iyo sharuudahii ugu dambaysay ee Fadaraalka iyo Gobolka. Su'aal iyo jawaab loogu talagalay shaqaalaha dhawaanta qalinjabiyey oo loo bixinayo si loogu dhiso heer xirfadeed iyo tayada isticmaalka.
- Tabobaridda ka badan 300 oo maareeyaalka kiis ah iyo shaqaalaha Xarunta Noloshaha Madaxabannaan ee Gobolka oo Dhan oo lagu tabobarayo farsamooyinka guud ee horumarinta oggolaanshaha dalabyada SSI iyo SSDI, iyo gaar ahaan sida si dhakhso leh oo meelmar ah looga soo wareejin karo dheefaha xarun loona soo wareejin karo bulshada.
- Kaalmo farsamo si loo go'aamiyo sababta faa'ido ay dib ugu dhacday iyo sida ugu wanaagsan ee dhibaataada loo xallin karo.
- Ururinta xog kusaabsan kuwan soo socda:
  - Oggolaanshaha Dalabyada SSI/SSDI
  - Diidista Dalabyada SSI/SSDI
  - Wadarta Go'aamada
  - Oggolaanshaha boqolkiiba
  - Tirada wicitaanada taleefanka iyo emeylada
  - Tirada tabobarrada iyo cidda kaqaybgashay
  - Tirada Kaalmada Farsamo ee la bixiyey iyo cidda la siiyey

### **Natijooyinka:**

SC 1.4.1: Tirada dadka la tabobaray ama la aflixiyey iyadoo loo marayo hindisayaasha isbaddalka nidaameed ee Golaha: 300

\*ODDC waxay go'aaminaysaa qanacsanida macmiilka ee halwaha Goluhu taageero ama fuliyo. Deeq-helayaasha waxa looga baahan doonaa inay ka kaalmeeyaan ODDC hannaankan.

### **Natijooyinka muddada dhaw:**

Koror ku yimaadda tirada maareeyayaasha kiisaska/ aqoonta SSA-yada ee gobolka oo dhan oo kusaabsan farsamooyinka guud ee horumarinta oggolaanshaha dalabyada SSI iyo SSDI.

Koror ku yimaadda tirada shaqaalaha Ohio SILC aqoontooda ee gobolka oo dhan oo kusaabsan farsamooyinka guud ee horumarinta oggolaanshaha dalabyada SSI iyo SSDI.

**Natiijooyinka muddada fog:**

Yaraynta dib u dhacyada faa'idada, kordhinta helitaanka guriyeynta, iyo ugu dambaynta keenista isdhexgal bulsho oo meelmar ah.

**Macluumaadka lagu maalgalinayo:**

**2022, 2023, 2024, 2025, 2026**

*Fadaraalka:	\$75,000.00
Lacagta u Dhiganta:	<u>\$25,000.00</u>
Wadarta:	\$100,000.00

\*Sii socoshada maalgalintu waxay ku xirnaan helitaanka lacagta.

**Qaabka maalgalinta:**

Sii Wadidda Qoondaynta

**Deeq-helaha:**

Xulafada Darbijiifka iyo Guriyaynta ee Ohio (Coalition on Homelessness and Housing in Ohio, inc).

**GOLAHA NAAFOOYINKA KOBACEED EE OHIO (OHIO  
DEVELOPMENTAL DISABILITIES COUNCIL (ODDC))**

Sharraxaadda Mashruuca

2022 – 2026

**Marka la eego  
Dhanka  
Mashaariicda shaqaalaynta**

**Shaqaalaha lala xariirayo: Leslie Connelly  
(614) 644-5542  
[Leslie.Connelly@dodd.ohio.gov](mailto:Leslie.Connelly@dodd.ohio.gov)**

## U KHARASH GARAYNTA LACAGTA SI MACQUUL AH

Sharciga Dawladda 106-402-Oct 30, 2000 Qaybta 125(c) (5) (C) TABOBAR.--Goluhu waxa dhici karta inuu qabto tabobarro loogu talagalay shakhsiyaadka leh naafooyinka koboceed, qoysaskooda, iyo shaqaalaha (oo ay kujiraan xirfadlayda, kaaliyayaasha, ardayda, tabarucayaasha, iyo xubnaha kale ee bulshada) si ay awood ugu yeeshaan dadkani inay helaan, ama ay bixiyaan, adeegyada bulshada, taageerooyin la khaasyeelay, iyo qaabab kale oo kaalmo, oo ay kujiraan la qabsiga gaarka ah ee adeegyada bulshada guud ama adeegyo takhasus ah oo loogu talagalay shakhsiyaadka leh naafooyinka koboceed iyo qoysaskooda.

### **Hadafka:**

Dadka naafooyinka leh iyo qoysaskoodu waxay sidii hore si ka badan u heli doonaan adeegyada iyo teknoolojiyadda taasi oo sare u qaadaysa hoggaaminta, helitaanka, badbaadada, madaxbannaanida, gaarista, sinnaanta, ku dhexjirka bulsho, caafimaadka, fursadaha shaqo, iyo bulshada.

### **Ujeedada iyo saamaynta mashruuca:**

Aqoonta maaliyaddu waxay sare u qaadi doontaa degganaanshaha dhaqaale iyo horumarka shakhsiyaadka leh naafooyinka koboceed iyo xubnaha qoysaskooda.

### **Gogoldhigga, asbaabta, iyo baaxadda mashruuca:**

Aqoonta maaliyaddu waa "maaraynta maaliyadeed, daynta kaa maqan iyo daynta kugu maqan iyo aqoonta daruuriga u ah qaadashada go'aano maaliyad ahaan macquul ah-oo ah go'aano qayb muhiim ah ka ah nolosheena aasaasiga ah." Waddanka Maraykanka, waxa jira faham la'aan guud oo ku aaddan dhaqaalaha. Aqoon la'aantani waxay saamayn kartaa qof sanado badan oo soo socda. Waxa jira dadaalo lagu horumarinayo aqoonta maaliyadda Maraykanka oo sida badan loogu talagalay ardayda kuleejooyinka iyo dhallinyarta. Halkan Ohio, dugsiyada sare waxay bixiyaan waxbarasho kusaabsan aqoonta dhaqaalaha iyo maaliyadda, hase yeeshee koorsooyinkani ma buuxiyaan baahiyaha ardayda leh naafooyinka iyo qoysaskooda sababo badan awgood. Manhajka aqoonta maaliyadeed caadi ahaan ma tixgaliyo isticmaalka iyo joogtaynta dheefaha naafada ee fadaraalka iyo gobolka. Halkan Ohio, sharci-dejiyayaasha gobolka waxa ka go'an hubinta shakhsiyaadka leh naafooyinka koboceed inay helaan fursado dheeraad ah dhanka shaqaalaynta iyo sare u qaadista mihnada hooga. Shakhsiyaadka leh naafooyinka koboceed waxay isticmaali



karaan waxyaalaha ay ku fiican yihiin iyo kartidooda si ay u kordhiyaan dakhligooda, oo ay u helaan dareen guulaysi oo ay u abuuraan aqoonsigooda bulsho ee u gaarka ah. Dad badan oo leh naafooyin waligood may maarayn miisaaniyad, ma furan xisaab dhigaal ama socota, isticmaalin Dhiirigalinta Shaqada Sooshiyaal Sikiyuuriti (Social Security Work Incentive), ama dhisin hanti. Waxa muhiim ah shakhsiyaadkani inay helaan waxbarashada maaliyadda si ay u horumariyaan degganaanshahooda dhaqaale una taageeraan horumar dhaqaale inta ay isticmaalayaan dheefaha gobolka iyo fadaraalka.

Sanadadan, Golaha Naafooyinka Koboceed ee Ohio (ODDC) wuxuu maalgalinayey mashaariic badan oo loogu talagalay siinta shakhsiyaadka leh naafooyinka koboceed iyo kuwa taageerada u fidiyaa fursadda inay xoojiyaan xirfadaha aqoonta maaliyadeed ee muhiimka ah. Hase yeeshee, aqoon darrada maaliyadeed wali waa mushkilad taagan. Natiijooyinka Xog-ururinta Dadwaynaha Qorshaha Gobolka 5 Sano ee ODDC waxay muujiyeen in dadka leh naafooyinka iyo kuwa taageeraa ay rumaysan yihiin fahmida dheefaha iyo lacagtu inay yihiin mid kamid ah caqabadaha ugu waawayn marka la eego dadku inay ku noolaadaan nolosha ay doonayaan inay ku noolaadaan.

Si uu uga duulo mashaariicdii hore, Golaha Naafooyinka Koboceed ee Ohio wuxuu maalgalin doonaa mashruuc uu ku horumarinayo degganaanshaha dhaqaale iyo sare u qaadista dadka leh naafooyinka isagoo horumarinaya aqoonta maaliyadeed. Qaybaha aqoonta maaliyadeed **waxa kujiri kara, tusaale ahaan:** soosaaridda miisaaniyad nolosha ku filan, fiirinta kharash garaynta wakhtigan, wax dhigashada inta dheefahu qofka u socdaan, sida loo helayo dheefaha gobolka iyo fadaraalka, macluumaadka lagu go'aamiyo dheefaha, soo amaahashada lacag, aqoonsiga xatooyada, halka lacagta la dhigto, isticmaalidda kaararka dhibitka iyo kiridhitka, sida loo ilaaliyo lacagtaada, xeraysiga cashuuraha, ilaalinta dakhliga iyo hantida, waxbarashada faa'idooyinka gobolka iyo fadaraalka, khayraadka iyo dheefaha jira ee aan naafada la xiriirin, fahmida ka dhaafidda Medicaid, u qorshaynta waxbarashada dugsiya sare kadib, xisaabo deggan, qorshaynta maaliyadeed ee mustaqbalka, qorshaynta hawlgabka, aalado si qofku u noqdo mid fursadda uu ku shaqo-galayaa sarrayso taasi oo kadib oggolaanaysa horumar.

ODDC waxay taageeri doontaa hawlo dhisaya xirfadaha iyo isbaddalka nidaameed iyadoo loo marayo gaaris, tabobar, cilmibaaris, kaalmo farsamo, taageeridda iyo waxbaridda bulshooyinka, iskaashi iyo wada-shaqayn dhexmara hay'adaha, soo bandhigga qaabab cusub, saamayn ku yeelashada siyaasad-dejiyayaasha, iyo meesha ka saaridda caqabadaha, iyo naqshadaynta iyo dib u nashqadaynta nidaamka.

ODDC waxay bixin doontaa maalgalin sida ku cad hoos sanad kasta oo mashruucu socdo. Qorshayaashu waa inay sheegayaan, **haddii ay daruuri tahay:** gaadiidka, helitaanka, isticmaalka teknoolojiyada, ku celinta, sii socoshada, haddii mashruucu gaaro gobolka oo dhan ama meel gaar ah, naafada kala duwan, iyo dhaqamada kala duwan.

### **Hawlaha muhiimka ah:**

- Soosaaridda iyo hirgalinta xeelad lagu horumarinayo aqoonta maaliyadeed ee dadka leh naafada.
- Kordhinta aqoonta shakhsiyaadka leh naafooyinka, xubnaha qoyska, iyo bixiyayaasha adeegyada.

### **Natijooyinka:**

IFA 1.1: Tirada dadka leh naafooyinka koboceed ee kaqaybqaatay hawlaha Goluhu taageeray ee loogu talagalay inay kordhiyaan aqoontooda ku aaddan sida looga qaybqaato go'aanada saamaynta ku leh noloshooda, nolosha dadka kale, iyo/ama nidaamyada: 50

IFA 1.2: Tirada xubnaha qoyska ee kaqaybqaatay hawlaha Goluhu taageeray ee loogu talagalay inay kordhiyaan aqoontooda ku aaddan sida looga qaybqaato go'aanada saamaynta ku leh qoyska, nolosha dadka kale, iyo/ama nidaamyada: 50

IFA 1.3: Tirada 'shakhsiyaadka kale' ee kaqaybqaatay hawlaha Goluhu taageeray ee loogu talagalay kordhinta aqoontooda: 50

SC 1.3.1: Tirada dhaqanada ugu wanaagsan ee lagu taageeray hawlaha Golaha: 2

\*ODDC waxay go'aaminaysaa qanacsanida macmiilka marka la eego halwaha Goluhu taageero ama fuliyo. Deeq-helayaasha waxa looga baahan doonaa inay ka kaalmeeyaan ODDC hannaankan.

### **Natijooyinka muddada dhaw:**

Dadka reer Ohio ee leh naafooyinka koboceed waxa kordhi doodna aqoontooda maaliyadeed.

### **Natijooyinka muddada fog:**

Waxa jira koror deggaanshaha dhaqaale iyo horumar dadka leh naafooyinka.

### **Macluumaadka lagu maalgalinayo:**

**2022, 2023, 2024, 2025, 2026**

\*Fadaraalka: \$50,000.00  
Lacagta u Dhiganta: \$16,666.66  
Wadarta: \$66,666.66

\*Sii socoshada maalgalintu waxay ku xirnaan helitaanka lacagta.

**Qaabka maalgalinta:**

Tartan leh

**Deeq-helaha:**

Gadaal ayaa Lagasoo sheegi doonaa

## KA QAYBGALKA LOO -SHAQEEYAHA

Sharciga Dawladda 106-402-Oct 30, 2000 Qaybta 125(c) (5)  
(I) SOOSAARIDDA ISKAASHI IYO KA QAYBQAADASHADA  
MUWAADINIINTA. Goluhu wuxuu taageeri karaa oo fulin karaa hawlo uu  
dadwaynaha ku barayo awoodaha, doorashooyinka, iyo baahiyaha  
shakhsiyaadka leh naafooyinka koboceed iyo qoysaskooda.

### **Hadafka:**

Dadka naafooyinka leh iyo qoysaskoodu waxay sidii hore si ka badan u heli doonaan adeegyada iyo teknoolojiyadda taasi oo sare u qaadaysa hoggaaminta, helitaanka, badbaadada, madaxbannaanida, gaarista, sinnaanta, ku dhexjirka bulsho, caafimaadka, fursadaha shaqo, iyo bulshada.

### **Ujeedada iyo saamaynta mashruuca:**

Saddex ah dhaqanada ugu wanaagsan waxay kordhin doonaan wacyigalinta iyo xirfad dhisidda iyo tirada loo-shaqeeyayaasha ee shaqaalaynaya dadka leh naafooyinka koboceed.

### **Gogoldhigga, asbaabta, iyo baaxadda mashruuca:**

Halkan Ohio, sharci-dejiyayaasha gobolka waxa ka go'an xaqiijinta shakhsiyaadka leh naafooyinka koboceed inay helaan fursado dheeraad ah dhanka shaqaalaynta iyo sare u qaadista mihnadahooda. Shakhsiyaadka leh naafooyinka koboceed waxay isticmaali karaan waxyaalaha ay ku fiican yihiin iyo kartidooda si ay u kordhiyaan dakhligooda, oo ay u helaan dareen guulaysi oo ay u abuuraan aqoonsigooda bulsho ee u gaarka ah. Kaqaybgalka loo-shaqeeyuhu wuxuu daruuri u yahay ku fogaanshaha hannaankan.

"Shaqaalaynta dadka leh naafooyinka waxay u wanaagsan yihiin faa'idadaada. Sida cilmibaaris lagu sheegay, 92% dadwaynaha Ameerikaanku waxay u arkaan in laga jecel yahay shirkadaha shaqaaleeya dadka leh naafooyinka marka la babar dhigo kuwa aan shaqaalayn. Iyo, 87% dadwaynaha ka mid ah waxay doorbidi lahaayeen inay la shaqeeyaan shirkado shaqaaleeya dadka leh naafooyinka.

Shaqo-galinta dadka leh naafooyinku waxay caawiyaan soosaaridda dakhli iyagoo u saamaxaya loo-shaqeeyayaasha inay isticmaalaan suuqa naafada, ay dhisaan kalsooni ay macaamiishu ku qabaan ganacsigooda, oo abuuraan waxsoosaar iyo adeegyo cusub.

Abuurista goob shaqeed loo dhan yahay waxay yarayn kartaa kharashka shaqaalaha shaqada ka taga maadaama dadka leh naafooyinku ay sida badan shaqada muddo dheer joogaan (62% shaqaalaha leh naafadu waxay shaqo kaliya joogeen saddex sano ama ka badan); shaqaalaha leh naafooyinku xagga maqnaanshaha iyo xanuunka waa kala mid ama wayba ka fiican yihiin shaqaalaha aan naafada ahayn. Warbixinaha suuqu si joogto ah ayey u sheegaan in shaqaalaha leh naafooyinka ay yihiin dhexdhexaad ama ka sarreeyaan dhexdhexaad xagga hawlqabadka, qaayaha iyo qiimaha shaqada, u dabacsanaanta baahiyaha, imaanshaha iyo badbaadada.

Shaqaalaynta Dadka leh Naafooyinka Garasho iyo Koboceed: Warbixin uu soosaaray Mac'hadka Waxsoosaarka Shirkadeed (Institute for Corporate Productivity (i4cp))

Naafada: Baabi'inta Khuraafaadka, Sida Dadka leh Naafooyinku U Dabooli Karaan Baahiyaha Loo-shaqeeyaha

Shaqaalaynta dadka leh naafooyinku waxay u fiican yihiin ganacsiga. Hase yeeshee, loo-shaqeeyayaal badan ma oga khayraadkan dihin ama sida si wanaagsan loogu qorto, loogu haysto oo sare loogu qaado dadka leh naafooyinka. Sidoo kale, bixiyaasha adeegga qaar badan oo kamid ah xirfad uma leh la shaqaynta loo-shaqeeyayaasha iyo ka taageeridda loo-shaqeeyayaasha inay qaabilaan shaqaalaha leh naafada.

Golaha Naafooyinka Koboceed ee Ohio wuxuu kordhin doonaa shaqaalaynta tartarka leh ee dadka reer Ohio ee leh naafooyinka koboceed isagoo kordhinaya maalgalinta Disability:IN si uu uga taageero loo-shaqeeyayaasha Ohio hindisayaashooda kaqaybgalinta naafada lana wadaago khayraadka iyo xeelaha u shaqo-galinta shaqo-doonka leh naafooyinka qaabab cusub oo halabuur leh.

Disability:IN Ohio waa urur khayri oo leh ka badan 200 xubnood oo ganacsi iyo 10 xubnood oo guddida fulinta ah oo tabarucayaal ah oo uu hoggaaminayo Huntington Bank. Disability:IN Ohio wuxuu xulafo la yahay Disability:IN, oo ah khayraad khayri ah oo hormood ah kaasi oo ka shaqeeya in ganacsiyadu shaqaaleeyaan naafada adduunka oo dhan. Disability:IN iyo 27 xulafo la ah ayaa cod midaysan ku sheegay in isbaddal fiican dhaco marka la eego dadka leh naafooyinka ee ganacsiyada ka shaqeeya.

Disability:IN Ohio waxay soosaari doontaa dhawr barnaamij loo diiradda saaraya kaqaybgalinta naafada ee loo-shaqeeyaha. Barnaamijyadan waxa kamid noqon doona:

- Baridda qandaraaslayaasha fadaraalka dhaqanada horseedka ah iyadoo la kaashanayo Ohio Industry Liaison Group (Kooxda Xiriirka Suuqa Ohio).
- Disability Inclusion@Work Trainings (Tabobarrada Kaqaybgalinta Shaqada ee Naafada) iyadoo la kaashanayo EARN, JAN iyo sidoo kale xeeldheerayaal arrimaha naafada ku takhasusay. Tabobarrada maqal iyo muuqaalka ah waxay bixin doonaan xeeladaha dhaqanada ugu wanaagsan ee loo-shaqeeyayaasha iyadoo la iftiimin doono kaqaybgalinta suuqa, goobta shaqada iyo shaqaalaha.
- WrightChoice Virtual Mentoring Program (Barnaamijka Hagista Maqal iyo Muuqaalka WrightChoice) kaasi oo abuuraya waayoaragnimo uu loo-shaqeeyuhu hagayo oo loogu talagalay loo-shaqeeyayaasha Ohio.

- Ohio Regional Disability Employer Assessment/Consulting (Qiimaynta/La-talinta Loo-shaqeeyaha Naafada Goboleed ee Ohio) iyadoo la abuurayo xeelado loogu talagalay loo-shaqeeyayaasha Ohio si ay iskaashi ula sameeyaan bulshada bixiyaha adeegyada naafada ee deegaankooda.

**Hawlaha muhiimka ah:**

- Baridda qandaraaslayaasha fadaraalka dhaqanada horseedka ah ee shaqaalaynta naafada.
- Baridda loo-shaqeeyayaasha xeeladaha kaqaybgalinta naafada ah iyo dhaqanada ugu wanaagsan.
- Dhisidda buundada isku xiraysa loo-shaqeeyayaasha iyo bixiyayaasha adeegyada naafada si loo kordhiyo aqoonta iyo awoodda horseedaysa natiijooyinka shaqaalaynta naafada oo kordha.
- Loo-shaqeeyayaashu waxay wajahi doonaan Hagista Naafada ee ardayda kuleejyada

**Natiijooyinka:**

IFA.1.3: Tirada 'shakhsiyaadka kale' ee kaqaybqaatay hawlaha Goluhu taageeray ee loogu talagalay kordhinta aqoontooda: 250

IFA 3.1: Boqolkiiba inta dadka naafooyinka koboceed leh ee ku qanacsan hawsha mashruuc: 90

IFA 3.2: Boqolkiiba inta xubnaha qoyska ku qanacsan hawsha mashruuc: 90

SC 1.3.1: Tirada dhaqanada rajada fiican leh ee lagu taageeray hawlaha golaha: 4

\*ODDC waxay go'aaminaysaa qanacsanida macmiilka marka la eego halwaha Goluhu taageero ama fuliyo. Deeq-helayaasha waxa looga baahan doonaa inay ka kaalmeeyaan ODDC hannaankan.

**Natiijooyinka muddada dhaw:**

Soosaaridda dhaqanada ugu wanaagsan ee kaqaybgalinta loo-shaqeeyaha waxay horseeddaa koror aqoonta iyo awoodda ganaciyada iyo bixiyayaasha adeegyada.

**Natiijooyinka muddada fog:**

Qaar badan oo kamid ah dadka reer Ohio ee Naafooyinka Koboceed leh ayaa si tartan ah lagu shaqaaleeyay.

**Macluumaadka lagu maalgalinayo:**

**2022, 2023, 2024**

*Fadaraalka:	\$65,000.00
Lacagta u Dhiganta:	<u>\$21,666.67</u>
Wadarta:	\$86,666.67

\*Sii socoshada maalgalintu waxay ku xirnaan helitaanka lacagta.

**Qaabka maalgalinta:**

Qoondaynta

**Deeq-helaha:**

Disability:IN Ohio

## MACLUUMADKA SHAQAALAYNTA

Sharciga Dawladda 106-402-Oct 30, 2000 Qaybta 125 (c) (5)  
(H) BURBURINTA CAQABADAHA, NASHQADAYNTA IYO DIB-U-SHAQADAYNTA NIDAAMYADA.--Goluhu wuxuu taageeri karaa oo uu fulin karaa hawlo uu meesha kaga saarayo caqabadaha si ay shakhsiyaadka leh naafooyinka koboceed u helaan una isticmaalaan adeegyada bulshada, waxuu xoojin karaa nashqadaynta iyo dib-u-nashqadaynta nidaamyada, xoojin karaana kaqaybqaadashada muwaadinka si wax looga qabto arrimaha lagu sheegay Qorshaha Gobolka.

### **Hadafka:**

Dadka naafooyinka leh iyo qoysaskoodu waxay sidii hore si ka badan u heli doonaan adeegyada iyo teknoolojiyadda taasi oo sare u qaadaysa hoggaaminta, helitaanka, badbaadada, madaxbannaanida, gaarista, sinnaanta, ku dhexjirka bulsho, caafimaadka, fursadaha shaqo, iyo bulshada.

### **Ujeedada iyo saamaynta mashruuca:**

Dadka leh naafooyinka, qoysaska iyo bixiyayaasha adeegyada waxay aqoon u yeelanayaan oo ay helayaan khayraadka, teknoolojiyadda iyo barnaamijyada shaqaalaynta la xiriira taasi oo keenaysa in shaqaalayntu sare u kacdo.

### **Gogoldhigga, asbaabta, iyo baaxadda mashruuca:**

Dhawaan Golaha Naafooyinka Koboceed ee Ohio wuxuu fuliyey Xogururinta Dadwaynaha Qorshaha Gobolka 5 Sano oo ahayd tallaabada koowaad ee aqoonsiga dhibaatooyinka iyo baahiyaha la doonayo in wax lagaga qabto qorshaha gobolka ee golaha.

Natijjooyinka muhiimka ee xogugurintan lagu ogaaday xagga shaqaalaynta:

- Laba kamid ah arrimaha ugu waawayn si ay dadka leh naafooyinku ugu noolaadaan noloshu ay doonayaan waxay ahaayeen: Helidda shaqo ama helidda shaqo tan ay hayaan dhaanta ama lacag dheeraad ah iyo fahmidda sida loo helo adeegyada.
- Mid kamid ah sababaha ugu waawayn ee dadka leh naafooyinku ay u shaqo tagi la'ayihiin waxay ahayd inay ka cabsanayaan inay waayaan dheefaha ay helaan.



- Caqabadaha sii wadashada waxbarashada ama tabobarka kadib dugsiga waxay ahaayeen aqoon darro ka haysay barnaamijyada.
- Fahmida dheefaha, oo ay kujiraan Medicaid, SSI, iyo SSDI, waxa loo aqoonsaday inay yihiin baahi wayn.
- Caqabadaha ka hor taagnaa helitaanka teknoolojiyadda waxa kamid ahaa: ma yaqaanaan nooca teknoolojiyadda anfici karta, mana hubaan sida loo bixiyo kharashka teknoolojiyadda.

Golaha Nafooyinka Koboceed ee Ohio (ODDC) wuxuu maalgalin doonaa dhawr mashruuc oo uu ku xaqiijinayo in dadka leh nafooyinka, qoysaska iyo bixiyayaasha adeegyadu ay aqoon u yeestaan oo helaan khayraadka, teknoolojiyadda iyo barnaamijyada shaqaalaynta la xiriira. ODDC waxay maalgalinaysaa dhawr mashruuc inta u dhaxaysa 2022-2026. ODDC waxay siin doontaa lacag u dhaxaysa \$10,000-\$50,000 mashruuciiba sanad kasta. Qorshayaashu waxa waajib ah inay muujiyaan tirada sanadada maalgalinta la codsanayo (1 ilaa 5 sano 2022, 1 ilaa 4 sano 2023, 1 ilaa 3 sano 2024, 1 ilaa 2 sano 2025, 1 sano 2026) iyo xaddiga maalgalinta.

ODDC waxay taageeri doontaa hawlo dhisaya xirfadaha iyo isbaddalka nidaameed iyadoo loo marayo gaaris, tabobar, cilmibaaris, kaalmo farsamo, taageeridda iyo waxbaridda bulshooyinka, iskaashi iyo wada-shaqayn dhexmara hay'adaha, soo bandhigga qaabab cusub, saamayn ku yeelashada siyaasad-dejiyayaasha, iyo meesha ka saaridda caqabadaha, iyo naqshadaynta iyo dib u nashqadaynta nidaamka.

Qorshayaashu waa inay sheegayaan, **haddii ay daruuri tahay**: gaadiidka, helitaanka, isticmaalka teknoolojiyada, dib ugu samaynta, sii jiritaanka, inta mashruucu soconayo, haddii mashruucu gaarayo gobolka oo dhan ama meel gaar ah, naafada kala duwan iyo dhaqamada kala duwan.

#### **Hawlaha muhiimka ah:**

- Kordhinta aqoonta shaqaalaynta ee la xiriirta khayraadka, teknoolojiyadda iyo barnaamijyada shakhsiyaadka leh nafooyinka, xubnaha qoyska, iyo bixiyayaasha adeegyada.
- Kordhinta helitaanka khayraadka, teknoolojiyadda iyo barnaamijyada la xiriira shaqaalaynta shakhsiyaadka leh nafooyinka, xubnaha qoyska, iyo bixiyayaasha adeegyada.
- Dad badan oo nafooyin leh in laga shaqogaliyo shaqaalaynta tartanka ah ee midaysan.

**Natijooyinka:** (mashaariicda la maalgaliyey oo dhan)

IFA 1.1: Tirada dadka leh naafooyinka koboceed ee kaqaybqaatay hawlaha Goluhu taageeray ee loogu talagalay inay kordhiyaan aqoontooda ku aaddan sida looga qaybqaato go'aanada saamaynta ku leh noloshooda, nolosha dadka kale, iyo/ama nidaamyada: 20

IFA 1.2: Tirada xubnaha qoyska ee kaqaybqaatay hawlaha Goluhu taageeray ee loogu talagalay inay kordhiyaan aqoontooda ku aaddan sida looga qaybqaato go'aanada saamaynta ku leh qoyska, nolosha dadka kale, iyo/ama nidaamyada: 20

IFA 1.3: Tirada 'shakhsiyaadka kale' ee kaqaybqaatay hawlaha Goluhu taageeray ee loogu talagalay kordhinta aqoontooda: 20

SC 1.3.1: Tirada dhaqanada rajada fiican leh ee lagu taageeray hawlaha golaha: 4

SC 2.2: Tirada dadaalada Golaha ee la fuliyey si qaababka wajahidda oo kala daadsan loogu badalo nidaam isku xiran oo wax ku ool ah oo xaqiijinaya in shakhsiyaadka leh naafooyinka koboceed iyo qoysaskoodu ay kaqaybqaataan naqshqadda oo ay helaan adeegyada bulshooyinka baahan, taageerooyinka shakhsiga ah, iyo noocyada kale ee kaalmo ee sare u qaadaya aayo-ka-tashiga, madaxbannaanida, waxsoosaarka, iyo midaynta iyo ka wada qaybgalka dhammaan dhinacyada nolosha ee bulshada: 4

\*ODDC waxay go'aaminaysaa qanacsanida macmiilka marka la eego halwaha Goluhu taageero ama fuliyo. Deeq-helayaasha waxa looga baahan doonaa inay ka kaalmeeyaan ODDC hannaankan.

**Natijooyinka muddada dhaw:**

Dadka reer Ohio ee leh Naafooyinka Koboceed waxaa u kordhay aqoonta ku saabsan helitaanka khayraadka, teknoolojiyada, iyo barnaamijyada la xiriira shaqaalaynta.

**Natijooyinka muddada fog:**

Waxa jira koror deggaanshaha dhaqaale iyo horumar dadka leh naafooyinka.

**Khayraadka lagu maalgalinayo:** (mashaariicda la maalgaliyey oo dhan)

	<b>2022 and 2023</b>	<b>2024</b>	<b>2025 iyo 2026</b>
*Fadaraalka	\$50,000.00	\$89,000.00	\$134,000.00
lacagta u Dhiganta:	<u>\$16,666.66</u>	<u>\$29,666.66</u>	<u>\$44,666.66</u>
Wadarta	\$66,666.66	\$118,666.66	\$178,666.66

\*Sii socoshada maalgalintu waxay ku xirnaan helitaanka lacagta.

**Qaabka maalgalinta:**

Tartan leh

**Deeq-helaha (helayaasha):**

Gadaal ayaa Lagasoo sheegi doonaa

## FIIDYAWYADA OHIO DB 101

Sharciga Dawladda 106-402-Oct 30, 2000 Qaybta 125 (c) (5)  
(H) BURBURINTA CAQABADAHA, NASHQADAYNTA IYO DIB-U-SHAQADAYNTA NIDAAMYADA.--Goluhu wuxuu taageeri karaa oo uu fulin karaa hawlo uu meesha kaga saarayo caqabadaha si ay shakhsiyaadka leh naafooyinka koboceed u helaan una isticmaalaan adeegyada bulshada, waxuu xoojin karaa nashqadaynta iyo dib-u-nashqadaynta nidaamyada, xoojin karaana kaqaybqaadashada muwaadinka si wax looga qabto arrimaha lagu sheegay Qorshaha Gobolka.

### **Yoolka:**

Dadka naafooyinka leh iyo qoysaskoodu waxay sidii hore si ka badan u heli doonaan adeegyada iyo teknoolojiyadda taasi oo sare u qaadaysa hoggaaminta, helitaanka, badbaadada, madaxbannaanida, gaarista, sinnaanta, ku dhexjirka bulsho, caafimaadka, fursadaha shaqo, iyo bulshada.

### **Ujeedada iyo saamaynta mashruuca:**

Ka badan 1,200 oo ah dadka leh naafooyinka ayaa sanadkii awood loo siin doonaa inay go'aano xogogaal ah ka qaataan shaqaalaynta midaysan ee tartanka leh.

### **Gogoldhigga, asbaabta, iyo baaxadda mashruuca:**

Dheefaha Naafada Ohio (Ohio's Disability Benefits 101) ([www.oh.db101.org](http://www.oh.db101.org)) waa websayt dhammaystiran kaas oo awood u siiya dadka leh naafooyinka inay ka qaataan go'aano xogogaal ah si shaqaalaynta midaysan ee tartanka leh ay uga dhigaan qayb kamidah noloshooda. OHDB 101 wuxuu bixiyaa aalado iyo macluumaad Ohio ku gaar ah, oo la khaasyeelay oo ku saabsan shaqaalaynta iyo qorshaynta mihiyadda, ikhtiyaarada caymiska caafimaadka, dheefaha naafada, dhisidda hanti, waxbarashada, guriyeynta, iyo nolosha bulshada. OHDB 101 waxa la heli karaa 24/7 iyadoo laga heli karo aalado qorshayneed oo waxtar leh, macluumaad, iyo waxbarasho qofku is-hagayo oo la xoojiyey taasi oo qoto dheeranaysa aqoonta kusaabsan fursadaha shaqada, furidda kartida dadka aaminsanaan kara in shaqadu tahay yool aan la gaari karin. OHDB 101 waxa isticmaali kara dad kala duwan, oo ay kujiraan dhallinyarta leh naafooyinka, shaqo-doonka leh naafooyinka, bixiyayaasha adeegyada, iyo bulshooyinkooda.

Ohio dhawaan ayey la casriyaysay websaytka OHDB 101 World Institute on Disabilities (<https://wid.org/about/vision/>) si looga dhigo bar ay si dhib yar u adeegsan karaan oo soo jiidasho u leh dadka Ohio, horayna u mariso faa'idada aaladaha.

Waaxda Ohio ee Naafooyinka Koboceed waxay qandaraas la gashay World Institute on Disability (WID) si uu uga siiyo kaalmo farsamo midaynta OHDB101 oo dhinac ah iyo dhaqanada iyo siyaasadaha maalin kasta oo dhinaca kale ah si looga jawaabo tilmaamaha iyo hindisayaasha fadaraalka iyo gobolka ee ku aaddan shaqaalaynta midaysan ee tartanka leh ee dheefaha dadka leh naafooyinka iyo kuwa aan lahayn. WID waa hay'ad waddanka laga wada yaqaan taasi oo maaraysa degalka webka OHDB101 (<https://www.db101.org/>) marka la eego gobolo badan oo waddanka oo dhan ah.

ODDC waxay maalgalin doontaa dadaalo joogto ah oo ay ku horumarinayso sida ay u isticmaalayaan dadka leh naafooyinka garsho iyo koboceed. Tan waxa kamid ah isticmaalka casharro fiidyaw ah oo isticmaalayaasha lagu siinayo hab la adeegsan karo oo macne leh marka la eego wax ka ogaanshaha sida ay uga faa'idaysanayaan dheefahooda naafada si ay uga qaybgalaan shaqaalaynta tartanka leh ee midaysan. Waxyaalaha fiidyawiyadu ka hadlayaan waxa kamid noqon kara, laakiin aan ku ekayn: Waa maxay SSI, SSI iyo Shaqo, barnaamijka Xisaabta Ohio STABLE iyo ka Tanaasulidda Medicaid.

#### **Hawlaha muhiimka ah:**

- Soosaaridda iyo maaraynta casharrada fiidyawiyada ee OHDB101.
- Horumarinta helitaanka OHDB101.
- Kordhinta aqoonta maaliyadeed ee shakhsiyaadka leh naafooyinka, xubnaha qoyska, iyo bixiyayaasha adeegyada.

#### **Natijooyinka:**

IFA 1.1: Tirada dadka leh naafooyinka koboceed ee kaqaybqaatay hawlaha goluhu taageeray ee loogu talagalay inay kordhiyaan aqoontooda ku aaddan sida looga qaybqaato go'aanada saamaynta ku leh noloshooda, nolosha dadka kale, iyo/ama nidaamyada: 1,000

SC 1.3.1: Tirada dhaqanada rajada fiican leh ee lagu taageeray hawlaha golaha: 2

\*ODDC waxay go'aaminaysaa qanacsanida macmiilka marka la eego halwaha Goluhu taageero ama fuliyo. Deeq-helayaasha waxa looga baahan doonaa inay ka kaalmeeyaan ODDC hannaankan.

**Natijooyinka muddada dhaw:**

Dadka reer Ohio ee leh naafooyinka koboceed waxay haystaan macluumaad dheeraad ah si ay u qaataan go'aano xogogaal ah oo la xiriira shaqaalayta midaysan ee tartanka leh.

**Natijooyinka muddada fog:**

Waxa jira koror deggaanshaha dhaqaale iyo horumar dadka leh naafooyinka.

**Macluumaadka lagu maalgalinayo:**

	<b>2022 iyo 2023</b>
*Fadaraalka	\$39,000.00
Lacagta u Dhiganta:	<u>\$13,000.00</u>
Wadarta:	\$52,000.00

\*Sii socoshada maalgalintu waxay ku xirnaan helitaanka lacagta.

**Qaabka maalgalinta:**

Qoondaynta

**Deeq-helaha:**

World Institute on Disabilities (Mac'hadka Aduunka ee Naafooyinka)

**GOLAHA NAAFOOYINKA KOBACEED EE OHIO (OHIO  
DEVELOPMENTAL DISABILITIES COUNCIL (ODDC))**

Sharraxaadda Mashruuca

2022 – 2026

**Marka la eego  
Dhanka  
Mashaariicda Kobcinta Hoggaaminta**

**Shaqaalaha lala xariirayo: Leslie Connelly  
(614) 644-5542  
[Leslie.Connelly@dodd.ohio.gov](mailto:Leslie.Connelly@dodd.ohio.gov)**

## EMERGING ADVOCATES

Sharciga Dawladda 106-402-Oct 30, 2000 Qaybta 125(c) (5) (K) (i) SOO BANDHIGIDDA QAABAB CUSUB OO ADEEGYADA IYO TAAGEEROOYINKA KU AADDAN. Goluhu waxa dhici karta inuu taageero oo fuliyo, wakhtiyo kooban, hawlo si uu u soo bandhigo qaabab cusub oo ku aaddan u adeegidda shakhsiyaadka leh naafooyinka koboceed taasi oo qayb ka ah xeelad guud oo isbaddalka nidaameed ah. Xeeladdu waxay ku lug yeelan kartaa baridda siyaasad-dejiyayaasha iyo dadwaynaha sida si wax-ku-ool ah wax looga qabto shakhsiyaadka leh naafooyinka koboceed iyo qoysaskooda, adeegyada, taageerooyinka, iyo kaalmada taasi oo gacan ka gaysanaysa gaarista ujeedada cinwaan-hoosaadkan.

### **Hadafka:**

Siinta fursado badan oo kobcinta hoggaaminta ah dadka naafada koboceed leh, xubnaha qoysaskooda, iyo ciddii ay iskaashi leeyihiin. Soo bandhigidda fursado kala duwan oo lagu kobcinayo xirfadaha ay u baahan yihiin si ay u noqdaan hoggaamiyayaal u dhaqdhaqaaqa naafada.

### **Ujeedada iyo saamaynta mashruuca:**

Muddada shanta sano ee deeqdu socoto, carruurta iyo dhallinyarada leh naafooyinka koboceed waxa lagu xoojin doonaa in sare loo qaado xirfaddooda iyo fursadaha ay naftooda iyo dadka kaleba ugu doodi karaan.

### **Gogoldhigga, asbaabta, iyo baaxadda mashruuca:**

Sida uu sheegay Sharciga Wrights, naftaa-u-doodistu waa:

Barashada sida naftaada loogu hadlo, qaadashada go'aanada nololaha khuseeya, barashada sida loo helo macluumaad si aad u fahmi karto waxyaalaha aad danaynayso, helitaanka cidda kugu taageeri doonta socdaalkaaga, ogaanshaha xuquuqdaada iyo waajibaadyadaada, dhibaato xallinta, dhagaysiga iyo barashada, la xiriirista dadka kale markii aad u baahan tahay caawimo iyo saaxiibtinimo, iyo wax ka ogaanshaha aayo-ka-tashiga.

Waa maxay sababta Nafaa-u-Doodistu Muhiim u Tahay?



Waxaad leedahay aqoontii looga baahnaa guulaysiga waxaana lagu siinayaa fursad aad kaga qaybqaadato go'aanada naftaada laga qaadanayo.

\*(<https://www.wrightslaw.com/info/self.advocacy.htm>)

Kobcinta xirfadaha naftaa-u-doodistu waa wax aad ugu muhiim ah dhallinyarta leh naafooyinka si ay u gaaraan yoolalkooda oo sarena ugu qaadaan isku-fillaanshaha. Bilaabista barashada xirfadahan wakhti kasta ayaa la bilaabi karaa. aasaaska naftaa-u-doodistu wuxuu bilaabmi karaa markii ilmahu uu yar yahay, wuxuuna kadib sii ballaaran karaa marka ilmuhu kujiro dugsiga hoose, dhexe, iyo sare.

Wakhtigan halkan Ohio, waxa jira barnaamijyo waxbarasho oo kooban oo loogu talagalay dhallinyarta leh naafooyinka si ay u horumariyaan xirfadaha naftaa-u-doodista. Barnaamijyada badankoodu waxay diiradda saaraan dadka waawayn ee leh naafooyinka. Nasiib wanaag, dhawr dugsi degmeed ayaa soosaaray yoolal diiradda saaraya naftaa-u-doodista iyo aayo-ka-tashiga ardayda, laakiin taasi kuma filna. Sida badan barnaamijyada ardaydu waxay qabsoomaan sanadada ugu dambeeya ee dugsiga sare, taasi oo ku dhaafaysa dhallinyartii oon xirfad ku filan lahayn si ay codkooda sare ugu qaadan kana qaybqaataan go'aan ka qaadashada muhiimka u ah noloshooda, iyo sidoo kale inay noqdaan hoggaamiyayaal markii ay waynaadaan.

Golaha Naafooyinka Koboceed ee Ohio (ODDC) wuxuu maalgalin doonaa mashruuc si uu u kordhiyo una horumariyo:

- taageerada carruurta iyo dhallinyarta leh naafooyinka koboceed ay ka helaan qoysaska, dugsiyada, bixiyayaasha adeegyada tooska ah, iyo hay'adaha kale si ay u bartaan naftaa-u-doodista iyo xirfadaha hoggaaminta oo ay xirfadahan si toos ah u dabbaqaan.
- fursadaha carruurta iyo dhallinyarta leh naafooyinka koboceed ay tahay inay u isticmaalaan xirfadaha u-doodista ee qorshaynta waxbarasho, oo ay kujiraan Barnaamijyada Waxbarashada la Khaasyeelay (IEP-yada), qorshayaasha kala-guurka, iyo dhammaan go'aan-qaadashooyinka.
- xirfadaha naftaa-u-doodista iyo u-doodista ee carruurta iyo dhallinyarta leh naafooyinka koboceed si ay iyagu naftooda iyo ta dadka kaleba ugu doodaan.

ODDC waxay taageeri doontaa hawlo dhisaya xirfadaha iyo isbaddalka nidaameed iyadoo loo marayo gaaris, tabobar, cilmibaaris, kaalmo farsamo, taageeridda iyo waxbaridda bulshooyinka, iskaashi iyo wada-shaqayn dhexmara hay'adaha, soo bandhigga qaabab cusub, saamayn ku yeelashada siyaasad-dejiyayaasha, iyo meesha ka saaridda caqabadaha, iyo naqshadaynta iyo dib u nashqadaynta nidaamka.

ODDC waxay bixin doontaa maalgalin sida ku cad hoos sanad kasta oo mashruucu socdo. Qorshayaashu waa inay sheegaan sanad kasta oo mashruuca ah. Qorshayaashu waa inay sheegayaan, **haddii ay daruuri tahay**: gaadiidka, helitaanka, isticmaalka teknoolojiyada, dib ugu celinta, sii socoshada, haddii mashruucu gaaro gobolka oo dhan ama mandaqad gaar ah, naafada kala duwan, iyo dhaqamada kala duwan.

### **Hawlaha muhiimka ah:**

- Sare u qaadista xirfadaha naftaa-u-doodista iyo u-doodista ee carruurta iyo dhallinyarta leh naafooyinka koboceed
- Horumarinta taageerada naftaa-u-doodista iyo u-doodista ee laga helo qoysaska, barayaasha, iyo bixiyayaasha adeegyada.
- Horumarinta wacyagalinta qoysaska, barayaasha iyo bixiyayaasha adeegyada ee kusaabsan naftaa-u-doodista iyo u-doodista ee carruurta iyo dhallinyarta leh naafooyinka koboceed
- Kordhinta fursadaha carruurta iyo dhallinyarta u-doodis u samayn karaan ee ay u noqon karaan hoggaamiyayaal

### **Natijooyinka:**

IFA 1.1: Tirada dadka leh naafooyinka koboceed ee kaqaybqaatay hawlaha goluhu taageeray ee loogu talagalay inay kordhiyaan aqoontooda ku aaddan sida looga qaybqaato go'aanada saamaynta ku leh noloshooda, nolosha dadka kale, iyo/ama nidaamyada: 50

IFA 1.3: Tirada 'shakhsiyaadka kale' ee kaqaybqaatay hawlaha Goluhu taageeray ee loogu talagalay kordhinta aqoontooda: 50

IFA 2.4: Boqolkiiba dadka hadda kaqaybqaadanaya hawlaha u-doodista: 75

IFA 2.4IND: Ee wadarta IFA 2.1B, tirada dadka leh naafooyinka koboceed ee ku jawaabay inay 'kaqaybqaadanayaan hadda hawlo u-doodis': 30

SC 1.3.3: Tirada dhaqanada wanaagsan ee la abuuray: 2

\*ODDC waxay go'aaminaysaa qanacsanida macmiilka marka la eego halwaha Goluhu taageero ama fuliyo. Deeq-helayaasha waxa looga baahan doonaa inay ka kaalmeeyaan ODDC hannaankan.

### **Natijooyinka muddada dhaw:**

Carruurta iyo dhallinyarta leh naafooyinka koboceed oo ay horumarto xirfadahooga naftaa-u-doodista iyo aqoontooduba.

**Natiijooyinka muddada fog:**

Carruurta iyo dhallinyarta leh naafooyinka koboceed oo noqda naftaa-u-doodayaal iyo hoggaamiyayaal wax-ku-ool ah bulshooyinkooda dhexdooda.

**Macluumaadka lagu maalgalinayo:**

**2022, 2023, 2024, 2025, 2026**

*Fadaraalka	\$85,000.00
Lacagta u Dhiganta:	<u>\$28,333.00</u>
Wadarta:	\$113,333.00

\*Sii socoshada maalgalintu waxay ku xirnaan helitaanka lacagta.

**Qaabka maalgalinta:**

Tartan leh

**Deeq-helaha:**

Gadaal ayaa Lagasoo sheegi doonaa

## QUWAYNTA DADKA NAAFADA AH

Sharciga Dawladda 106-402-Oct 30, 2000 Qaybta 125(c) (5)  
(I) SAMAYNTA ISKAASHI IYO KAQAYBQAADASHADA  
MUWAADINKA.--Goluhu wuxuu taageeri karaa oo uu fulin karaa hawlo  
uu dadwaynaha ku barayo awoodaha, doorbidyada, iyo baahiyaha  
shakhsiyaadka leh naafooyinka koboceed iyo qoysaskooda iyo inuu  
soosaaro oo taageero iskaashiyo taageeraya ajandaha siyaasadda ee  
Golaha, oo ay kujiraan tabobarka naftaa-u-doodista, waxbaridda  
siyaasad-dejiyayaasha, iyo xirfadaaha hoggaaminta muwaadinka.

### YOOLKA:

Siinta fursado badan oo kobcinta hoggaaminta ah dadka naafada koboceed leh, xubnaha qoysaskooda, iyo ciddii ay iskaashi leeyihiin. Soo bandhigidda fursado kala duwan oo lagu kobcinayo xirfadaha ay u baahan yihiin si ay u noqdaan hoggaamiyayaal u dhaqdhaqaaqa naafada.

### Ujeedada iyo saamaynta mashruuca:

Shakhsiyaadka leh naafooyinka koboceed waxay kobcin doonaan xirfadahooda naftaa-u-doodista iyo hoggaaminta si ay ugu noolaadaan nolosha ay doortaan uguna doodaan arrimaha muhiimka u ah iyaga.

### Gogoldhigga, asbaabta, iyo baaxadda mashruuca:

Xeerka DD, markii dib loo ansixiyey, waxa kujira shardi dhigaya in Gole Naafooyinka Koboceed ka shaqeyta oo kasta uu wax ka qabto saddex meelood:

- (I) aasaasidda ama xoojinta barnaamij loogu talagalay maalgalinta tooska ah urur naftaa-u-doodista Gobolka ah oo ay hoggaaminayaan shakhsiyaad leh naafooyin koboceed;
- (II) taageeridda fursadaha loogu talagalay shakhsiyaadka leh naafooyinka koboceed ee loo tixgaliyo hoggaamiyayaal si ay u siiyaan tabobar hoggaamineed shakhsiyaadka leh naafooyinka koboceed ee noqon kara hoggaamiyayaal; iyo
- (III) taageeridda iyo ballaarinta kaqaybqaadashada shakhsiyaadka naafooyinka koboceed leh hoggaaminta naafooyinka kala duwan iyo dhaqamada kala duwan

Si ay u buuxiyaan shuruudahan, Golaha Naafooyinka Koboceed ee Ohio waxay:

- Maalgalinayaan mashaariic buuxinaya shuruudaha Xeerka Naafooyinka Koboceed, sida sare ku xusan.
- Taageerid hawlaha dhisaya awoodda iyo isbaddalka nidaamka iyagoo u maraya gaaris, tabobar, cilmibaaris, kaalmo farsamo, taageeridda iyo waxbaridda bulshooyinka, iskaashiga iyo wada shaqaynta hay'adaha dhexdooda, soo bandhigidda qaabab cusub, saamayn ku yeelashada siyaasad-dejiyayaasha, iyo nashqadaynta iyo dib-u-nashqadaynta nidaamka.

Dhawr mashruuc oo shan sano ah ayaa loo dooran karaa maalgalinta. ODDC waxay siin doontaa lacag u dhaxaysa \$10,000-\$35,000 mashruuciiba sanad kasta. Qorshayaashu waa inay sheegayaan, haddii ay daruuri tahay: gaadiidka, helitaanka, isticmaalka teknoolojiyada, dib u samaynta, haddii mashruucu gaaro gobolka oo dhan ama mandaqad gaar ah, naafada kala duwan, iyo dhaqamada kala duwan. Sidoo kale, qorshe kasta waa inuu si cad u sheegayaa aagga ama aagagga shuruudaha Xeerka Naafooyinka Koboceed ee qorshuhu uu sheegayo. Qorshayaasha aan sheegin mid kamid ah aagagga maalgalinta lagu dari maayo.

#### **Hawlaha muhiimka ah:**

- Xoojinta hoggaamiyayaasha iyo u-doodayaasha
- Siinta fursado hoggaamineed
- Kordhinta xirfadaha naftaa-u-doodista
- Taageeridda iyo ballaarinta kaqaybqaadashada hoggaaminta naafooyinka kala duwan iyo dhaqamada kala duwan

**Natiijooyinka:** (mashaariicda la maalgaliyey oo dhan)

IFA 1.1: Tirada dadka leh naafooyinka koboceed ee kaqaybqaatay hawlaha goluhu taageeray ee loogu talagalay inay kordhiyaan aqoontooda ku aaddan sida looga qaybqaato go'aanada saamaynta ku leh noloshooda, nolosha dadka kale, iyo/ama nidaamyada: 100

IFA 2.4: Boqolkiiba dadka hadda kaqaybqaadanaya hawlaha u-doodista: 75

IFA 2.4IND: Ee wadarta IFA 2.1B, tirada dadka leh naafooyinka koboceed ee ku jawaabay inay hadda 'kaqaybqaadanayaan hawlo u-doodis': 75

IFA 2.5IND: Ee wadarta IFA 2.1B, tirada dadka leh naafooyinka koboceed ee ku jawaabay inay 'kaqaybqaadanayaan iskaashiyada, guddiyada, iyo/ama qabashada jagooyinka hoggaaminta naafooyinka kala duwan': 30

SC 1.3.3: Tirada dhaqanada wanaagsan ee la abuuray: 2

\*ODDC waxay go'aaminaysaa qanacsanida macmiilka marka la eego halwaha Goluhu taageero ama fuliyo. Deeq-helayaasha waxa looga baahan doonaa inay ka kaalmeeyaan ODDC hannaankan.

#### **Natijoooyinka muddada dhaw:**

Shakhsiyaadka leh naafooyinka koboceed iyo qoysaskooda oo ay horumarto xirfadahooda naftaa-u-doodista iyo hoggaaminta.

#### **Natijoooyinka muddada fog:**

Shakhsiyaadka leh naafooyinka koboceed iyo qoysaskooda oo noqda hoggaamiyayaasha bulshooyinkooda una dooda arrimaha muhiimka u ah iyaga.

**Khayraadka lagu maalgalinayo:** (mashaariicda la maalgaliyey oo dhan)

	<b>2022, 2023, 2024, 2025, 2026</b>
*Fadaraalka	\$70,000.00
Lacagta u Dhiganta:	<u>\$23,333.33</u>
Wadarta:	\$93,333.33

\*Sii socoshada maalgalintu waxay ku xirnaan helitaanka lacagta.

#### **Qaabka maalgalinta:**

Tartan leh

#### **Deeq-helaha:**

Gadaal ayaa Lagasoo sheegi doonaa

## ODDC IYO U-DOODISTA

Sharciga Dawladda 106-402-Oct 30, 2000 Qaybta 125(c) (5)  
(I) SAMAYNTA ISKAASHI IYO KAQAYBQAADASHADA  
MUWAADINKA.--Goluhu wuxuu taageeri karaa oo uu fulin karaa hawlo  
uu dadwaynaha ku barayo awoodaha, doorbidyada, iyo baahiyaha  
shakhsiyaadka leh naafooyinka koboceed iyo qoysaskooda iyo inuu  
soosaaro oo taageero iskaashiyo taageeraya ajandaha siyaasadda ee  
Golaha, oo ay kujiraan tabobarka naftaa-u-doodista, waxbaridda  
siyaasad-dejiyayaasha, iyo xirfadaaha hoggaaminta muwaadinka.

### **Hadafka:**

Siinta fursado badan oo kobcinta hoggaaminta ah dadka naafada koboceed leh, xubnaha qoysaskooda, iyo ciddii ay iskaashi leeyihiin. Soo bandhigidda fursado kala duwan oo lagu kobcinayo xirfadaha ay u baahan yihiin si ay u noqdaan hoggaamiyayaal u dhaqdhaqaaqa naafada.

### **Ujeedada iyo saamaynta mashruuca:**

Muddada deeqda ee shanta sano, hoggaamiyayaasha naftaa-u-doodista ee leh naafooyinka koboceed ayaa la xoojin doonaa iyadoo la kobcinayo xirfaddooda iyo fursadaha ay ku noqon karaan hoggaamiyayaal.

### **Gogoldhigga, asbaabta, iyo baaxadda mashruuca:**

Xeerka DD, markii dib loo ansixiyey, waxa kujira shardi dhigaya in Gole Naafooyinka Koboceed ka shaqeeya oo kasta uu wax ka qabto saddex meelood:

- (IV) aasaasidda ama xoojinta barnaamij loogu talagalay maalgalinta tooska ah urur naftaa-u-doodista Gobolka ah oo ay hoggaaminayaan shakhsiyaad leh naafooyin koboceed;
- (V) taageeridda fursadaha loogu talagalay shakhsiyaadka leh naafooyinka koboceed ee loo tixgaliyo hoggaamiyayaal si ay u siiyaan tabobar hoggaamineed shakhsiyaadka leh naafooyinka koboceed ee noqon kara hoggaamiyayaal; iyo
- (VI) taageeridda iyo ballaarinta kaqaybqaadashada shakhsiyaadka naafooyinka koboceed leh hoggaaminta naafooyinka kala duwan iyo dhaqamada kala duwan

Si ay u buuxiyaan shuruudahan, Golaha Naafooyinka Koboceed ee Ohio waxay:

- Siin kaalmo farsamo ururada naftaa-u-doodista gobolka si ay u taageerto xubnahooda si ay ugu doodaan siyaasadaha meesha ka saaraya caqabadaha ka hor taagan kaqaybgalka buuxa ee dadka leh naafooyinka koboceed iyo qoysaskooda,
- Xaqiijin in waraaqaha iyo agabka Golaha lagu qoro luuqad fudud iyo waliba qaab u habboon dadka loogu talagalay,
- Taageerid ururada naftaa-u-doodista ee kala duwan si ay uga kaalmayso wada shaqaynta iyo iskaashiga,
- Xubnaha Goluhu waxay hagi doonaan dadka kale ee kujira bulshada.

**Hawlaha muhiimka ah:**

- Aqoonsiga hoggaamiyayaasha naftaa-u-doodista
- Siinta fursado hoggaamineed
- Kordhinta xirfadaha naftaa-u-doodista

**Natijooyinka:**

SC 1.3.4: Tirada dhaqanada ugu wanaagsan ee lagu taageero hawlaha Golaha: 3

**Natijooyinka muddada dhaw:**

Shakhsiyaadka leh naafooyinka koboceed iyo qoysaskooda oo ay horumarto xirfadahooda naftaa-u-doodista iyo aqoonta

**Natijooyinka muddada fog:**

Shakhsiyaadka naafooyinka koboceed leh iyo qoysaskoodu inay noqdaan naftaa-u-doodayaal iyo hoggaamiyaal wax-ku-ool ah bulshooyinkooda dhexdooda.



**Macluumaadka lagu maalgalinayo:**

*Fadaraalka	\$00.00
Lacagta u Dhiganta:	<u>\$00.00</u>
Wadarta:	\$00.00

**Qaabka maalgalinta:**

Gudaha Ururka

**Deeq-helaha:**

Waxba

**GOLAHA NAAFOOYINKA KOBACEED EE OHIO (OHIO  
DEVELOPMENTAL DISABILITIES COUNCIL (ODDC))**

Sharraxaadda Mashruuca

2022 – 2026

**Marka la eego  
Dhanka  
Hindisayaasha Gaarista**

**Shaqaalaha lala Xiriirayo: Kenneth Latham  
(614) 644-5546  
[Kenneth.Latham@dodd.ohio.gov](mailto:Kenneth.Latham@dodd.ohio.gov)**

## **DAREEMIDDA KHALKHALKA GAARKA AH EE MASHRUUCA BULSHOYINKA AMISHKA IYO MASHRUUCA BULSHOYINKA AAN AMISH AHAYN**

SHARCIGA DAWLADDA 106-402-OCT. 30, 2000 (B) GAARISTA.--Goluhu wuxuu taageeri karaa oo uu fulin karaa hawlo gaaris ah si uu u aqoonsado shakhsiyaadka leh naafooyinka koboceed iyo qoysaskooda kuwaasi oon haddii kale dareenka Goluhu aanu u soo jeesteen, wuxuuna ka kaalmaynayaa oo uu awood u siinayaa shakhsiyaaska leh naafooyinka iyo qoysaskooda inay helaan adeegyada, taageerooyinka la khaasyeelay, iyo noocyada kale ee kaalmooyinka, oo ay kujiraan helitaanka la qabsiga gaarka ah ee adeegyada bulshada ee caadiga ah ama adeegyada takhasuska ah.

(b) UJEEDADA.--Ujeedada cinwaankan waa hubinta in shakhsiyaadka leh naafooyinka koboceed iyo qoysaskoodu ay kaqaybqaataan nashqadaynta iyo inay helaan adeegyada bulshada, taageerooyinka la khaasyeelay, iyo qaababka kale ee kaalmooyinka ee ay u baahan yihiin kuwaasi oo sare u qaadaya aayo-ka-tashiga, madaxbannaanida, waxsoosaarka, iyo isdhexgalka iyo u dhannaanshaha dhammaan dhinacyada nolosha bulshada iyadoo loo marayo barnaamijyo dhaqamada waafaqsan oo cinwaankan lagu oggolaaday.

### **Yoolka (hadafka):**

Dadka naafooyinka leh iyo qoysaskoodu waxay sidii hore si ka badan u heli doonaan adeegyada iyo teknoolojiyadda taasi oo sare u qaadaysa hoggaaminta, helitaanka, badbaadada, madaxbannaanida, gaarista, sinnaanta, ku dhexjirka bulsho, caafimaadka, fursadaha shaqo, iyo bulshada.

### **Ujeedada iyo saamaynta mashruuca:**

Marka la gaaro dhammaadka sanadka labaad, mashruucu wuxuu aqoonsan doonaa ugu yaraan 3 khalkhal oo kale oo ay leeyihiin 160 cudur ee hadda wax lagu siiyo bulshooyinka Amishka iyo kuwa Aan Amish ahayn.

### **Gogoldhigga, asbaabta, iyo baaxadda mashruuca:**

Mashruuca Amishka waa deeq gooni ah taasi oo cilmibaaris laga dhex sameeyo bulshada Amishka. Bulshada Amish waa bulsho xirxiran waxayna ka faa'idaysataa waxa ugu yar khayraadka bulshada ee ay heli karaan. Maadaama ay tahay bulsho xirxiran, deeqda wakhtigan, rugta caafimaadka DDC waxay samaysatay wada shaqayn si ay u bixiso daryeel caafimaad, cilmibaaris, iyo daawayn loogu talagalay xaaladaha khalkhalka hidde-sidaha.

Deeqdan gaarka ah waxay caddaysay inay tahay mid halabuurkeedu aad u sarreeyo, oo aan gobolka kaliya ahayn laakiin waddanka oo dhan ah. Wada shaqayn lala yeesho

xirfadlayaasha, qoysaska, isbitaalada, iyo macallimiintu waxay wax ka bartaan shaqada ka dhacaysa deegaanka Amishka ee Waqooyi-bari, Ohio.

Adeegyada gaarista ee Degmada Holmes ee dhawrkii sano ee u dambeeyey waxay ka ciyaareen door muhiim ah samaynta rug caafimaad oo cusub oo deegaanku taageerayaan - taasi oo ah tallaabo muhiim u ah aasaasidda joogtayn muddo dheer ah ee daryeelka caafimaadka bulshada Amishka ee Naafooyinka Koboceed leh ee mandaqaddan. Laakiin baahida ay u qabaan iyo saamaynta adeegyadu ku leeyihiin qoysaska Amishka ee Ohio oo dhan waa mid wayn iyo fursadan maalgalinta lagu kordhinayo waqtigii loo baahnaa. Bulshada Amish ee Ohio hadda waxa lagu qiyaasaa 67,000 oo qof wayna kordhayaan (waxa lagu qiyaasa inay labalaabmaan 15-20 sanoba mar), taasi oo u taagan 10,000 oo qoys inay ku nool yihiin 55 deegaan. Lacagta laga qaado qoysaska kharashka iska bixiya baaritaanada la doonayo badankooda waa \$75 oo kaliya - taasi oo aad uga yar kharashka dhabta ah ee sida caadiga ah la qaado, sidoo kale wax yar oo jajab ahna ka ah khidmadda ay qaadaan xarumaha caafimaad iyo shaybaadhada ganacsiga loogu talagalay.

Meesha koowaad ee deeqdani diiradda saaryaso waa in la booqdo, la ogaado waxa haya, la baaro, oo la daaweeyo qoysaska bulshada Amishka kuwaasi oo laga yaabo inay waajahayaan khalkhal hidde-side. Dhammaan natiijooyinka cilmibaarista waxa lala wadaagaa xarumaha caafimaad ee kale, dhakhaatiirta, qoysaska, iyo bulshooyinka Amishka ee kale. Iyadoo adeegsanaysa cilmibaaris, Rugta Caafimaadka ee Golaha Naafooyinka Kobaceed (DDC Clinic) waxay fasiraysaa cilmibaarista hidde-side ee ka timid Shaybaadhka waxayna aqoonsataa wixii khalkhal hidde-side jira. Rugta Caafimaadka DDC waxay ka bixinaysaa la-talin bartilmaameedsan oo loogu talagalay rugo kala duwan oo ku yaala Deegaanka Holmes.

Marka ay raadsanayso deeqda Amishka, waxay u taagan tahay isku tagga bulshooyin hidde-side ahaan xiran oo kala duwan. Khalkhalka hidde-siduhu wuxuu ku badan yahay degmooyinka go'doonsan, khalkhalka qaarkiina waa mid dhif ah, ama gooni ah, oo leh halista ah inuu kordhiyo heerka dhimashada ee Carruurta Amishka.

Waxa ugu wayn ee Mashruuca Bulshada Amish ee 2012-2016 ay heleen wuxuu ahaan in la gaaro bulshada Amishka ee Degmada Holmes.

Ogaanshaha cudurka ee xilli hore waxay ka dhigan tahay jawaabo ay helayaan qoysasku markii aysan sanado badan waxba helin. Daawaynta xilli hore ee carruurta halista ku jirtaana waxay horseeddaa hoos u dhac naafada ah iyo tayada nolosha bulshada oo sare u kacda.

Mashruucu wuxuu diiradda saarayey 2017-2021 ballaarinta dadaalkan iyo inuu siiyo adeegyo bulshooyinka Amishka ee Ohio oo dhan.

Shaqadii 2017 iyo kadib waxa ka faa'iday bulshooyinka Amishka ee Ohio oo dhan iyadoo lahayd yoolalka soo socda:

- Taageeridda cilmibaaris la ballaariyey, isbarbardhigga xaaladaha khalkhalka hidde-side ee dhifta ah ee bulshooyin badan oo Amishka ah.
- Soosaaridda ilaa 30 baaritaan oo cusub iyo in lagu siiyo liiska baaritaankan la ballaariyey Amishka Ohio kharashka ugu yar ee suurtoagal; iyo
- Ballaarinta adeegyadeena waxbarashada & gaarista si aanu ugu darno la-talinta hidde-side (shaqo dhawaan shaqaale loo qoray) iyo adeegyada taageerada ee loogu talagalay qoysaska Amishka iyo xirfadlayaasha caafimaad ee u shaqeeya.

Adeegyadan la ballaariyey waxa kamid ah cilmibaaris, ballaarinta tirada iyo jiritaanka baaritaan hidde-side oo raqiis ah, siinta adeegyo waxbarasho iyo la-talinta hidde-side ee dhakhaatiirta iyo qoysaska, iyo kordhinta wacyagalinta qoysaska Amishka ee leh khalkhalada hidde-side ee dhifta ah, oo ay kujirto in diiradda la saaro dhallinyarta kahor inta aysan guursan oo aysan qoysas samayn.

Deeq-helaha la rabaa wuxuu Kiliniga Naafada Koboceed (DD Clinic) kala shaqayn karaa xarunta hormuudka ah ee hidde-sidaha si diiradda loo saaro khalkhalada gaarka ah ee laga yaabo inay saameeyaan tiro badan oo bulshada Amishka iyo Bulshada Aan Amishka ahayn ah ee Ohio.

#### **Hawlaha muhiimka ah:**

- Adeegyada waxa kujiri doona: Baaritaan Hidde-side oo cid kasta ah: La Balaadhiyay
- Tabobar shaqada dhexdeeda lagu siinayo Macalimiinta Amishka ee Carruurta Baahiyaha Gaarka ah, markii loo baahdo.
- U qabashada Kulamo Xirfadlayaasha Caafimaad kusaabsan Caafimaadka Hidde-sidaha Amishka

#### **Natiijooyinka:**

IFA 1.2: Tirada xubnaha qoyska ee kaqaybqaatay hawlaha Goluhu taageeray ee loogu talagalay inay kordhiyaan aqoontooda ku aaddan sida looga qaybqaato go'aanada saamaynta ku leh qoyska, noloshu dadka kale, iyo/ama nidaamyada: 700

SC 1.3.4: Tirada dhaqanada ugu wanaagsan ee lagu taageero hawlaha Golaha: 3

\*ODDC waxay go'aaminaysaa qanacsanida macmiilka ee halwaha Goluhu taageero ama fuliyo. Deeq-helayaasha waxa looga baahan doonaa inay ka kaalmeeyaan ODDC hannaankan.

### **Natiijooyinka muddada dhaw:**

Iyadoo uu jiro dhakhtar labaad oo loo shaqaaleeyey golaha ictiraafka ee Hidde-barashada iyo Caafimaadka Uurkujirta (Genetics and Internal Medicine), Kilinigga Naafada Kobaceed waa xarunta hormoodka hidde-sidaha ee Gobolka Ohio. Tani waxay u saamixi doontaa mashruuca inuu diiradda saaro khalkhallo gaar ah oo saamayn kara in badan oo ka mid ah bulshada Amish ama Aan Amishka ahayn ee Ohio.

### **Natiijooyinka muddada fog:**

Sii wadista cilmibaarista iyo soosaaridda si loo ballaariyo tirada baaritaannada hidde-side iyo kulan.

DDC Clinic waxay martigalin doontaa kulamo xirfadlay oo laba-sanadle ah si ay u barto xeeldheerayaasha caafimaadka goboleed ee khalkhalada hidde-side ee dhifta ah ee saamaynaya bulshooyinka Ohio ee Amishka iyo kuwa Aan Amishka ahayn. Yoolka guud waa dhisidda wacyigalinta ka dhex jirta takhasusaadka iyo xarumaha caafimaad kuwaasi oo jooga xirfadaha iyo goobaha juquraafiyeed ee ugu haboon inay gacan uga gaystaan wax-ka-qabadka xilli hore.

### **Macluumaadka lagu maalgalinayo:**

**2022, 2023, 2024, 2025, 2026**

*Fadaraalka:	\$50,000.00
Lacagta u Dhiganta:	<u>\$16,666.66</u>
Wadarta:	\$66,666.66

\*Sii socoshada maalgalintu waxay ku xirnaan helitaanka lacagta.

### **Qaabka maalgalinta:**

Tartan leh

### **Deeq-helaha:**

Waa La Go'aaminayaa

## QUWAYNTA WARSIDAHHA CAAWINTA EE E-DIVERSITY

Sharciga Dawladda 106-402 - Oct. 30, 2000- 114 STAT.1704

(F) WADA SHAQAYNTA IYO ISKU DUWIDDA HAY'ADAHA DHEXDODA.--

Goluhu waxa dhici karta inuu taageero oo uu fuliyo hawlo si uu sare ugu qaado wada shaqaynta iyo isku duwidda hay'adaha dhexdooda si ay sidii hore si ka fiican ugu adeegaan, taageeraan, kaalmeeyaan, ama ugu doodaan shakhsiyaadka leh naafooyinka koboceed iyo qoysaskooda.

(7) DHAQANKA AAN DIIDAYN.--Oraahda "dhaqanka ku haboon", waxa la isticmaalaa iyadoo la eegayo adeegyada, taageerooyinka, ama kaalmada kale ee loo fuliyo ama bixiyo qaab tixgalinaysa waxa dadku aaminsan yahiiin, qaababka dadka dhexdooda, dabeecadaha, luuqadda, iyo habdhaqanka shakhsiyaadka helaya adeegyada, taageerooyinka, ama kaalmada kale, oo ay u helayaan qaab leh suurto galnimada ugu wayn ee lagu hubinayo inay sida ugu badan uga qaybqaataan barnaamijka laga hadlayo.

(5) dadaalo gaar ah ayey waajib tahay in loo galo si loo xaqiijiyo in shakhsiyaadka leh naafooyinka koboceed ee ka soo jeeda dadka laga tirada badan yahay iyo qoysaskoodu inay ku raaxaystaan fursado kordhay oo macne leh si ay u helaan una isticmaalaan adeegyada bulshada, taageerooyinka la khaasyeelay, iyo qaababka kale ee kaalmada ee ay heli karaan shakhsiyaadka leh naafooyinka koboceed ee kale iyo qoysaskoodu;

### **Yoolka (hadafka):**

Dadka naafooyinka leh iyo qoysaskoodu waxay sidii hore si ka badan u heli doonaan adeegyada iyo teknoolojiyadda taasi oo sare u qaadaysa hoggaaminta, helitaanka, badbaadada, madaxbannaanida, gaarista, sinnaanta, ku dhexjirka bulsho, caafimaadka, fursadaha shaqo, iyo bulshada.

### **Ujeedada iyo saamaynta mashruuca:**

Dhammaadka sanad xisaabeed kasta, warsiduhu wuxuu kordhin doonaa aqoonta iyo wacyigalinta 700 oo daneeye oo ay kujiraan dadka leh naafooyinka iyo qoysaskooda taasi oo kusaabsan faa'idooyinka wada shaqaynta hay'adaha dhexdooda ee dhaqanka aan diidayn iyo xujayn; akhristayaashana waxa lagu boorin doonaa inay muddadiiba mar kaqaybqaataan xujo halkaasi oo ay tallaabo ka qaadayaan macluumaad la wadaagay. Shakhsiyaadka leh naafooyinka ee ka soo jeeda bulshooyinka la hagraday waxa loo dooran doonaa hoggaaminta Xujooyinka.

## **Gogoldhigga, asbaabta, iyo baaxadda mashruuca:**

Warsidaha Caawinta ee e-Diversity wuxuu ahaa laba bille si onlayn ah loo soo saaro waxaana kafaala qaaday Gudiga Gaarista ee Golaha Naafooyinka Koboceed ee Ohio (Outreach Committee of the Ohio Developmental Disabilities Council). Ujeedadu waa inuu siiyo macluumaad dhinacyada danaynaya oo kusaabsan baahida sare u qaadista iskaashi iyo isku duwid hay'adaha dhexdooda ah oo dheeraad ah taasi oo keenaysa in la helo hay'ado siiya adeegyo dhaqanka aanay is diidayn bulshooyinka la hagraday ee Ohio.

Xeeladaha gaarista dhaqanka ugu wanaagsan iyo macluumaadka kale ee la xiriira ayey heli doonaan hay'adaha danaynaya, deeq-helayaasha Goluhu iyo dadka leh naafooyinka iyo qoysaskoodu iyagoo ka helaya xogtaasi e-Diversity taasi oo muujinaysa baahida loo qabo in sare loo qaado wada shaqayn iyo isku duwid hay'adaha dhexdooda ah oo dheeraad ah taasi oo keenaysa in la helo hay'ado siiya adeegyo dhaqanka aanay is diidayn bulshooyinka la hagraday ee Ohio.

Warsidaha Caawinta ee e-Diversity sida himilada Gudiga Gaaristu dhigayso wuxuu sii wadi doonaa waxa soo socda:

- Korhdinta wacyigalinta ee adeegyada ay heli karaan dadka laga tirada badan yahay ee leh naafooyinka koboceed.
- Kordhinta wacyigalinta fursadaha deeqda iyo maalgalinta.
- Kordhinta fahmida arrimaha saamaynaya dadka laga tirada badan yahay ee leh naafooyinka koboceed.
- Ku darista lafagur iyo guudmar codbixin.

Warsidaha Caawinta ee e-Diversity sidoo kale waxa kamid ah qodobada soo socda:

1. Codbixinta iyo xeeladaha kaqaybgalka ee kale
2. Xayeysiis ka samaynta dagalada warbaahinta bulshada
3. Qaybta Khuburada (Experts Corner)
4. Waxyaalaha Muhiimka ah ee Barnaamijka/Hay'adda
5. Dhaqanada ugu Fiican
6. Fursadaha Xiriiridda
7. Su'aalaha Badanka la Iswaydiiyo
8. 6 qaybood
9. Qaybta elektarooniga ah
10. 8 bog
11. Midab buuxa
12. Gudaha emeylka waxa ku qoran
13. PDF
14. Liiska emeylada isdiiwaangalinta/ka bixidda
15. Linki aadaya websaytka
16. 8 bog & midab buuxa



Kaalmada Naafooyinka Koboceed iyo Sharciga Xeerka Xuquuqda ee 2000 (Bill of Rights Act of 2000)

NATIJOOYINKA-Kongareesku wuxuu ogaaday in-

- naafonimadu tahay qayb dabiici ah oo aadanuhu soo waajahaan taasi oon yaraynayn xaqa shakhsiyaadka leh naafooyinka koboceed ee ah inay u noolaadaan si madaxbannaan, inay ammuurahooda maamushaan oo iyagu ay doortaan sida ay u noolaanayaan, iyo inay si buuxda uga qaybqaataan oo ay gacan ka gaystaan waxtarka bulshooyinkooda iyagoo u maraya isdhexgal iyo u dhannaansho dhammaystiran ee dhanka dhaqaalaha, **siyaasadda**, bulsheed, dhaqan, iyo xagga waxbarashada ummadda Marayakanka;
- in badan oo kamid ah shakhsiyaadka leh naafooyinka koboceed iyo qoysaskoodu inaysan heli karin taageero iyo adeegyo habboon, oo ay kamid yihiin helitaanka teknoolojiyadda dadka caawisa, ee ka imanaysa nidaamyada adeegga caadiga ah iyo kawa takhasuska ah, waxayna ku sii jiraan xaalad ayna waxba helin **ama wax ka dhiman yihiin**;
- shakhsiyaadka leh naafooyinka koboceed sida badan waxay u baahan yahay adeegyada bulshada, taageerooyinka la khaasyeelay, iyo qaababka kale ee kaalmada kuwaasi oo inta ay nool yihiin u soconaya, kuwaasi oo ugu wax-ku-**oolnimo badan marka loo siiyo qaab abaabulan**;
- waxaa jirta baahi in la xaqiijiyo in adeegyada, taageerooyinka, iyo kaalmada kale loo siiyo qaab aysan dhaqanka is **diidayn**, kaasi **oo xaqiijinaya in shakhsiyaadka ka soo jeeda qoomiyadaha iyo dadka laga tiro badan yahay si buuxda loogu daro dhammaan hawlaha lagu bixiyo cinwaankan**;
- dadwaynuhu waxay u baahan yihiin inay war badan ka ogaadaan awoodaha iyo xirfadaha shakhsiyaadka leh naafooyinka koboceed, gaar ahaan xaaladaha shakhsiyaadka la siiyo adeegyada, taageerooyinka, iyo kaalmada ay u baahan yihiin;
- maadaama shakhsiyaadka leh naafooyinka koboceed oo tiradoodu sii kordhayso ay nool yihiin, wax baranayaan, shaqaynayaan, oo kaqaybqaadanayaan dhammaan dhinacyada nololaha, waxa jirta **baahi sii kordhaysa oo loo qabo shaqaale si wacan u tabobaran** oo awood u leh inay bixiyaan adeegyada, taageerooyinka, iyo qaababka kale ee kaalmada tooska ah ee loo baahan yahay si ay awood ugu siiyaan shakhsiyaadka inay fuliyaan hawlahaas;
- waxaa loo baahan yahay inuu jiro dadaal dheeraad ah oo lagu qorayo shaqada shakhsiyaadka ka soo jeeda dadka laga tiro badan yahay si ay ugu adeegaan shakhsiyaadka leh naafooyin ak iyo qoysaskooda.

Ujeedada Kaalmada Naafooyinka Koboceed iyo Sharciga Xeerka Xuquuqda ee 2000 (Developmental Disabilities Assistance and Bill of Rights Act 2000) waa xaqiijinta in shakhsiyaadka leh naafooyinka koboceed iyo qoysaskoodu ay kaqaybqaataan nashqadaynta iyo inay helaan adeegyada bulshada, taageerooyinka la khaasyeelay, iyo qaababka kale ee kaalmooyinka ee ay u baahan yihiin kuwaasi oo sare u qaadaya aayo-ka-tashiga, madaxbannaanida, waxsoosaarka, iyo isdhexgalka iyo u dhannaanshaha dhammaan dhinacyada nolosha bulshada iyadoo loo marayo barnaamijyo dhaqamada waafaqsan oo cinwaankan lagu oggolaaday, oo ay kujiraan gaar ahaan:

Golayaasha Gobolka ee qaabilsan Naafooyinka Koboceed ee gobal kastaa inay kaqaybgalaan u-doodista, xirfad dhisidda, iyo hawlaha isbaddalka nidaameed--gacan ka gaysto nidaam dhammaystiran oo abaabulan, macmiilka iyo qoysku udub dhexaad u yihiin, macmiilka iyo qoysku hagayaan, oo ay kujiraan adeegyada bulshada ee loo baahan yahay, taageerooyinka la khaasyeelay, iyo qaababka kale ee kaalmada sare u qaadaysa aayo-ka-tashiga shakhsiyaadka leh naafooyinka koboceed iyo qoysaskooda;

Warsidaha Caawinta ee e-Diversity wuxuu samayn doonaa waxyaalaha soo socda:

- Aqoonsiga faa'idooyinka uu u leeyahay bulshooyinka la hagrada ee naafooyinka leh iyo natiijooyinka ka dhasha wada shaqaynta iyo isku duwiddda hay'adaha dhexdooda ee dhaqanka aanay is diidayn
- Bixinta xeelado sheegaya in tallaabo la qaado taasi oo wax lagaga qabanayo arrimaha saamaynta ku leh dadka laga tiro badan yahay ee leh naafooyinka koboceed
- Fududaynta xiriirka ka dhexeeya daneeyayaasha (dadka leh naafooyinka, qoysaskooda, bixiyayaasha adeegyada, hay'adaha, sharci-dejiyayaasha, iwm.) ee diiradda saaraya daboolista baahiyaha dadka laga tiro badan yahay ee leh naafooyinka koboceed

Inta lagu jiro 5 sano ee soo socda, Goluhu wuxuu jeclaan lahaa in deeq-heluhu sii wado inuu diiradda saaro waxa soo socda:

- Aqoonsiga faa'idooyinka uu u leeyahay bulshooyinka la hagrada ee naafooyinka leh iyo natiijooyinka ka dhasha wada shaqaynta iyo isku duwiddda hay'adaha dhexdooda ee dhaqanka aanay is diidayn
- Bixinta xeelado sheegaya in tallaabo la qaado taasi oo wax lagaga qabanayo arrimaha saamaynta ku leh dadka laga tiro badan yahay ee leh naafooyinka koboceed
- Fududaynta xiriirka ka dhexeeya daneeyayaasha (dadka leh naafooyinka, qoysaskooda, bixiyayaasha adeegyada, hay'adaha, sharci-dejiyayaasha, iwm.) ee diiradda saaraya daboolista baahiyaha dadka laga tiro badan yahay ee leh naafooyinka koboceed

## **Qodobada cusub waxa kujiri doona waxa soo socda:**

- **Sanduuqa Kala-jaadnimada, Caddaaladda, iyo u Dhannaanshaha:** Warside kasta waxa ku qornaan doona aalado akhristayaashu ku ridan karaan Sanduuqooda DE&I (Kala-jaadnimada, Caddaaladda, iyo u Dhannaanshaha). Kuwan waxa kamid noqon doona buugaag iyo maqaalo, app-yo, fiidyawyo, aalado qiimayneed, waxyaabo caadi ah, siyaasado, iyo habraacyo, iwm.; macluumaad ku qalabayn doona akhristayaasha inay si wacan ugu diyaarsanaadaan inay u gargaaraan bulshooyinka leh naafooyinka koboceed ee la hagraday.
- **Meesha Diiradda Degmadu Saarayso:** Meesha diiradda dadaalada gaaristu saaran tahay ee mid kasta oo kamid ah labada mandaqadood ee Ohio ayaa lagu iftiimin doonaa warsidaha. Kani wuxuu ku kala duwanaan karaa inuu noqdo waraysi laga qaado xubin guddida ah, hoggaamiye bulsho, u-doode, shakhsi leh naafo, daryeele, iwm. AMA wuxuu noqon karaa sheeko kusaabsan urur iyo dhaqanadiisa, natiijooyinkiisa, iwm.
- **Xujee Akhristayaasha:** Warsiduhu wuxuu leeyahay qaybo ku xujayn doona akhristaha inuu tallaabo ka qaado mawduucyada qaar.

## **Hawlaha muhiimka ah:**

- Aqoonsiga arrimaha taagan iyo "dhaqanada ugu wanaagsan" kuwaasi oo diiradda saaraya siinta adeegyada ayna dhaqanka is diidayn bulshooyinka leh naafooyinka ee la hagraday.
- Soo qaadashada cilmibaaris, xeeldheerayaal, iyo barnaamijyo kuwaasi oo sheegaya arrimaha iyo dhaqanada diiradda saaraya siinta adeegyada ayna dhaqanka is diidayn bulshooyinka leh naafooyinka ee la hagraday.
- Soosaaridda maqaalo macluumaadka bixinaya arrimahan iyo dhaqanadan.
- Abuurista xeelado tallaabo qaadis oo halabuur leh kuwaasi oo kaqaybgalinaya akhristayaasha.
- Samaynta shabakad maqal iyo muuqaal ah oo daneeyayaasha ah kuwaasi oo kaqaybgalaya helitaanka xalal toos ah oo lagu daboolayo baahiyaha dadka laga tiro badan yahay ee leh naafooyinka koboceed.

## **Natiijooyinka:**

SC 1.3.4: Tirada dhaqanada ugu wanaagsan ee lagu taageero hawlaha Golaha: 10

\*ODDC waxay go'aaminaysaa qanacsanida macmiilka ee halwaha Goluhu taageero ama fuliyo. Deeq-helayaasha waxa looga baahan doonaa inay ka kaalmeeyaan ODDC hannaankan.

### **Natijoooyinka muddada dhaw:**

- Kordhinta wacyigalinta akhristayaasha ee arrimaha iyo dhaqanada ugu wanaagsan ee diiradda saaraya siinta adeegyada aysan dhaqanka is diidayn bulshooyinka leh naafooyinka ee la hagraday.
- Kordhinta fahamka akhristayaasha ee natijoooyinka cilmibaarista iyo dhaqanada ugu wanaagsan ee keenaya siinta adeegyada aysan dhaqanka is diidayn bulshooyinka leh naafooyinka ee la hagraday
- Kordhinta tirada akhristayaasha ee kaqaybgalaya doodaha kana qaybqaadanaya tallaabo qaadista ee diiradda saaraya siinta adeegyada aysan dhaqanka is diidayn bulshooyinka leh naafooyinka ee la hagraday.
- **Xujaynta Akhristayaasha-** Warsiduhu wuxuu leeyahay qaybo ku xujayn doona akhristaha inuu tallaabo ka qaado mawduucyada qaar.

### **Natijoooyinka muddada fog:**

Tirada akhristayaasha ee kororta waxay awood u yeelan doonaan inay wadaagaan macluumaad kusaabsan faa'idooyinka sheegista mushkiladaha iyo fulinta dhaqanada ugu wanaagsan ee la xiriira siinta adeegyada aysan dhaqanka is diidayn bulshooyinka leh naafooyinka ee la hagraday.

Koror ku yimaadda tirada akhristayaasha ee bixinaya xalalka halabuurka leh ee sida wanaagsan u saamaynaya dadka laga tiro badan yahay ee naafooyinka koboceed leh.

### **Macluumaadka lagu maalgalinayo:**

**2022, 2023, 2024, 2025, 2026**

*Fadaraalka:	\$30,000.00
Lacagta u Dhiganta:	<u>\$10,000.00</u>
Wadarta:	\$40,000.00

\*Sii socoshada maalgalintu waxay ku xirnaan helitaanka lacagta.

### **Qaabka maalgalinta:**

Tartan leh

### **Deeq-helaha:**

Waa La Go'aaminayaa

## KA GANACSIGA DADKA IYO BULSHOYINKA NUGUL

114 STAT. 1682 SHARCIGA DAWLADDA 106-402-OCT. 30, 2000  
(H) XUQUUQDA AADANAHA.--Qorshuhu waa inuu bixiyo in xuquuqda aadanaha ee shakhsiyaadka leh naafooyinka koboceed (gaar ahaan shakhsiyaadka aan lahayn qoys ilaaliya) kuwaasi oo qaata adeegyada barnaamijyada lagu caawiyo cinwaan-hoosaadkan loo dhawri doono si waafaqsan qaybta 109 (la xiriirta xuquuqda shakhsiyaadka leh naafooyinka koboceed). (A) ka ilaalinta shakhsiyaadka leh naafooyinka koboceed gaboodfal, dayac, uga faa'idaysi arrimo jinsi iyo maaliyadeed, iyo ku xadgudubka sharciga iyo xuquuqda aadanaha, si markaa shakhsiyaadkan aysan ugu sugnaan khatar badan oo ka sarraysa tan ay ku sugan yihiin dadwaynaha caadiga ah; iyo (5) shakhsiyaadka leh naafooyinka koboceed waxay khatar badan ugu jiraan oo ka badan ta dadka caadiga ah gaboodfal, dayac, uga faa'idaysi arrimo jinsi iyo maaliyadeed, iyo ku xadgudubka xuquuqdooda sharci iyo aadane, si markaa shakhsiyaadkan aysan ugu sugnaan khatar badan oo ka sarraysa tan ay ku sugan yihiin dadwaynaha caadiga ah; (5) dadaalo gaar ah ayey waajib tahay in loo galo si loo xaqiijiyo in shakhsiyaadka leh naafooyinka koboceed ee ka soo jeeda dadka laga tirada badan yahay iyo qoysaskoodu inay ku raaxaystaan fursado kordhay oo macne leh si ay u helaan una isticmaalaan adeegyada bulshada, taageerooyinka la khaasyeelay, iyo qaababka kale ee kaalmada ee ay heli karaan shakhsiyaadka leh naafooyinka koboceed ee kale iyo qoysaskoodu;

### **Yoolka (hadafka):**

Dadka naafooyinka leh iyo qoysaskoodu waxay sidii hore si ka badan u heli doonaan adeegyada iyo teknoolojiyadda taasi oo sare u qaadaysa hoggaaminta, helitaanka, badbaadada, madaxbannaanida, gaarista, sinnaanta, ku dhexjirka bulsho, caafimaadka, fursadaha shaqo, iyo bulshada.

### **Ujeedada iyo saamaynta mashruuca:**

Marka la gaaro dhammaadka 2022, "Warbixin" ayaa la qori doonaa taasi oo ka sheekaynaysa ka ganacsiga aadanaha ee Ohio gaar ahaan sida ay ula xiriirto dadka leh naafooyinka koboceed waxaana warbixintan ku qornaan doona talobixino kusaabsan dhaqannada ugu wanaagsan ee sida wax looga qabanayo dhibaataada marka la eego tixgalinaha maalgalinta mustaqbalka.

## **Gogoldhigga, asbaabta iyo baaxadda mashruuca:**

Ka ganacsiga aadanuhu waa ku xadgudub aad u xun ee xuquuqda iyo sharafta aasaasiga ah ee qofka. Shakhsiyaadka leh naafooyinka qaar waxa dhici karta inay aad ugu sii nugul yihiin in looga faa'idayso ka ganacsiga aadanaha. Muruqmaalka khasabka ku shaqeeya iyo ka ganacsiga jinsiga dadka waa qaabab argagax leh oo ah gaboodfalka qof leh naafo ama aan lahayn Labaduba waa dambi sida uu dhigayo Xeerka Dhawrista Dhibbanaha ka Ganacsiga Dadka (Trafficking Victims Protection Act of 2000 (TVPA)) ee fadaraalka. Pub. L. 106-386. (Shabakadda Xuquuqda Naafada Heer Qaran)

Sharciga fadaraalku wuxuu ku qeexayaa "ka ganacsiga jinsiga" inuu yahay "shaqaalaynta, qarinta, qaadista, siinta, helitaanka, khayaamaynta, ama dallaalista qof iyadoo ujeedadu tahay ka ganacsi jinsi, kaasi oo ka ganacsiga jinsiga loo fulinayo xoog, khiyaamayn, ama khasbid, ama kaasi oo qofka lagu qancinayo inuu sameeyo falka noocan ah aanu wali gaarin da'da 18 jir." Khasbidda, khiyaamaynta, ama khasbidda ma aha wax loo baahan yahay in lagu samaynayo qof ka yar da'da 18 jirka oo ku lug leh ka ganacsi jinsi sababtoo ah carruurta ma oggolaan karaan inay qof wayn galmo la sameeyaan. Carruurta waa fududahay in laga faa'idayso oo la adeegsado, markaa waa u nugul yihiin in laga ganacsado. (Tammy J. Toney-Butler; Olivia Mittel -University of Louisville Xogtii ugu Dambaysay : Agoosto 10, 2020.)

Waaxaha boolisku waxay sameeyeen 98 xiritaan sanadkii hore intii ay ku guda jireen baaritaano ka ganacsiga aadanaha ah gudaha Ohio, iyadoo soo helay 181 dad dhibbane noqon kari lahaa. Warbixintu waxay sheegaysa 85 baaritaan oo gobolka ka qabsoomay inay horseedeen 113 tuhmane oo ka ganacsi aadanaha ku lug leh iyo 68 tuhmane oo isku dayey inay lacag galmo ka bixiyaan. Warbixinta oo ay soosaareen Guddida Ka Ganacsiga Aadanaha ee Xeer-ilaaliyaha Guud, sidoo kale waxay sheegtay badbaadinta 17 dad dhibbanayaal noqon karayey iyo u gudbinta 67 dhibbane adeegyada bulshada. Ugu dhawaan 5,000 oo sarkaal ayuu u dhammaaday tabobar ka ganacsiga aadanaha ah. Sharciga gobolku wuxuu kordhiyay ciqaabaha la saarayo dadka lagu helo inay ku lug lahaayeen ka ganacsiga jinsiga ee carruurta ama dadka leh naafooyinka koboceed.

Ohio si gaar ah ayey ugu nugushahay ka ganacsiga aadanaha sababtoo ah waxay leedahay magaaloyin waawayn, degmooyin baadiyaha ah, bulsho guurguur badan oo muhaajiriin ah, iyo sidoo kale shan jid oo waawayn oo si fudud loogu gali karo gobolada iyo Kanada. 1,032 carruurta Ohio ah ayaa noqda dhibbanayaan ka ganacsiga jinsiga aadanaha sanad kasta.

Ohio waxay kaga jirtaa kaalinta shanaad dhammaan gobolada la soo sheegay inay ka dhaceen kiisaska ka ganacsiga aadanaha iyadoo Toledo tahay magaalada afraad ee ugu sarraysa waddanka oo dhan ee loo qorto dhibbanayaasha ganacsi sharci darro ah. (Feb 10, 2020 <https://odh.ohio.gov>)

Ohio dhab ahaantii waxay Maraykanka kaga jirtaa kaalinta afraad marka la eego isticmaalka ugu badan ee dadka jinsi ahaanta looga ganacsado," ayuu dhahay Bruce Keller oo ka tirsan Compass Ministries, oo ah urur ku dadaala inuu siiyo rajo iyo adeegyo haweenka ahaa dhibbanayaal looga faa'idaystay arrimo ka ganacsi jinsi ah. (Feb 22, 2019 <https://www.cleveland19.com>)

Xafiiska Xarunta Tabobarka Dhibbanayaasha Dambiyada iyo Kaalmada Farsamo (Office for Victims of Crime Training and Technical Assistance Center) waxay **faahfaahin** ka bixisay nuglaanshaha kordhinaysa halista in dadka leh naafooyinka laga ganacsado. Qaarkood hoos ayaa lagu iftiimiyey:

1. **Dadka ka ganacsiga dadka ku hawlani waxay raadinayaan dhibbanayaal leh naafooyin si ay galaangal ugu helaan** 'dheefahooda dawladda sida dheefaha Supplemental Security Income (SSI) ama Social Security Disability Insurance (SSDI).
2. **Shakhsiyaadka leh naafooyinku waxay u baahan karaan daryeel daboolaa baahiyahooda aasaasiga ah, waxaana dhici karta in daryeelahani ka faa'idaysto ku tiirsanidan oo ku khasbo dhillaysi ama ku shaqaysi.** Xataa haddii daryeelaha laftiisu aanu ahayn qofka ka ganacsiga wada, dadka leh naafooyinku waxa dhici karta inay barteen u hoggaansamidda rabitaanka daryeelahooda maadaama ay ku tiirsan yihiin. Haddaba, waxa dhici karta inuu caadi la noqdo dheellitir la'aanta awoodda ee xiriirkoodu, taasi oo u baddali karta xiriirkooda mid ka ganacsade aadane ama gaboodfale.
3. **Shakhsiyaadka leh naafooyinka qaarkood waxay u baahan karaan teknoolojiyadda dadka caawisa ama taageerooyin dheeraad ah oo xagga isgaarsiinta iyo/ama hadalka ah.** Tani waxay saamayn kartaa awooddooda inay caawimo helaan oo sheegaan gaboodfalka loo gaysanayo waxayna u baahan karaan kaalmada dambiilaha si uu u turjumo waxay doonayaan. Marka la eego dhibbanayaashan, dhibaataysnaanta aamusani waxay yeelanaysaa micne siday tahay ah.
4. **Dadka leh naafooyinku waxa dhici karta inay ku nool yihiin hooy go'doon kujira oo markaa ay baahi wayn u qabaan saaxiibo iyo xiriiro.** Hal tusaale oo ka yimi Khadka Tooska ah ee Ka Ganacsiga Dadka ee Qaranka, qof wayn oo dhibbane noqon kari gaaray oo lahaa naafooyinka koboceed ayaa laga qalqaalsaday xarun tabobarka madadaalada iyo xirfadaha ah. Dambiilaha hawshan kujiray wuxuu jilayey inuu yahay nin saaxiib la ah, waxaanu ku qanciyeey dhibbanaha inay rumaystay in la-taliyayaasha, qoyska, iyo saaxiibadu aysan rabin inay noqoto qof madaxbannaan. Wuxuu isticmaalay cabsida ay ka qabtay in loola dhaqmo sidii ilmo yar, taasi oo ku keentay inay go'doon ka gasho kuwa xannaanayn lahaa. Markii dambe wuxuu ku qanciyeey inay gasho ganacsi jinsi oo gurigooda k baxsan.
5. **Dambiilayaasha dadka ka ganacsadaa sidoo kale waxay u beegsadaan shakhsiyaadka leh naafooyinka takoorka bulsheed iyo nacaybka ay waajahaan darteed.** Tani waxay ku sababtaa maamulada iyo xataa qoysaskooda iyo saaxiibada inaysan rumaysan dhibbanayaasha markii ay soo sheegaan gaboodfal loo gaystay. Tani sida badan waxa la kulma dhibbanayaasha leh

naafooyinka saamaynta gaarsiiya shaqaynta garasho, caqli ama isgaarsiin ama shakhsiyaadka leh dhibaato xagga caafimaadka dhimirka ah.

Halkan Ohio, nooca ugu badan ee ka ganacsiga aadanuhu waa ka jinsiga, iyadoo dhibbanayaashuna u badan yihiin haween qaangaar ah. Tani kama dhigna inaanu dhahayno dhibbanuhu ma noqon karo qof nin ah, laakiin kiisaska intooda badan halkan Ohio waa haween dhibbanayaashu. Ilaa 2016, qiyaastii 1,196 kiis oo ka ganacsiga aadanaha ah ayaa la soo sheegay halkan Ohio. Istaatistigiskani wuxuu sii waday inuu kordho sanad kasta wuxuuna ka imanayey khadka tooska ah ee ka ganacsiga aadanaha.

Dambiilayaasha ka ganacsada dadku waxay ku dagaan dhibbanayaasha iyagoo isticmaalaya af-miinshaarnimo, been iyo khayaano, iyagoo u ballan qaadaya nolol iyo fursado fiican oo ay lacag ku sameeyaan. Ujeedadu ma aha jacayl ee waa lacag samayn. Dhibbanaha waxa dhici karta in la gado ama xooggiisa ama xubintiisa taranka laga faa'idaysto. (<https://www.thenoproject.org>)

Dadka u dooda xuquuqda naafada iyo baarayaashu waa inay door muhiim ah ka ciyaaraan aqoonsiga iyo kahortagga ka ganacsiga shakhsiyaadka leh naafooyinka maadaama baaxadda dhibaataadu ay sidii la moodayey ka wayn tahay.

Goluhu wuxuu jeclaan lahaa inuu maalgaliyo mashruuc lagu samaynayo "Warbixin" kusaabsan arrinta ka ganacsiga dadka maadaama ay la xiriirto dadka leh naafooyinka. Warbixintu waa warbixin ama hage maamul soosaaro taasi oo sida badan ka hadlaysa dhibaatooyin iyo sida loo xallinayo. Caadi ahaan ujeedada warbixintu waa in lagu doodo in meelaha qaar ay yihiin dhinaca ugu wanaagsan oo la aadayo ama in xalalka qaar yihiin kuwa ugu haboon ee dhibaato gaar ah. Marka loo isticmaalayo ujeedooyin u-doodis, waxay saamayn ku yeelan kartaa hannaanka go'aan-qaadashada ee siyaasadaha, habraacyada, iyo sharci-dejinta hadda iyo mustaqbalka.

Wajiga Koowaad ee mashruuca, Goluhu wuxuu jeclaan lahaa in "Warbixintan" ay bixiso macluumaad kusaabsan dhibaataada, xogta, iyo talobixinaha. Isagoo ka duulaya talobixinaha, Goluhu wuxuu go'aamin doonaa talobixinta ay tahay inuu maalgaliyo inta lagu jiro sanadada ka harsan Qorshaha Gobolka ee 5 Sano. Ujeedooyin soo bandhigid darteed, Goluhu wuxuu jeclaan lahaa in la beegsado meelaha dadka saboolka ah deggan yihiin ee Bartamaha Ohio taasi oo ka dhigan meelaha Columbus u jira 24 mayl. Tan waxa kamid noqon kara magaalooyinka:

Westerville, Groveport, Bexley, Lockbourne, New Albany, Upper Arlington, Grove City, Etna, Dublin, Canal Winchester, Derby, Powell, Lithopolis, Bellfontaine, Worthington, Commercial Point, Delaware, Orient, Newark, Reynoldsburg, Marion, Pickerington, Mr. Gilead, Blacklick, Mt. Vernon, Ashville, Harrisburg, Galloway, Carroll iyo Hilliard.



## Hawlaha muhiimka ah:

Warbixinta waa inay kujiraan macluumaad kusaabsan waxa soo socda:

- Aqoonsiga xeeladaha kahortagga (iyo xeeladaha soo celinta--soo celinta xeeladaha daryeelka xog-ogaalka u ah dadka & dhibta gaarta)
- Dhaqannada ugu wanaagsan ee la shaqaynta dadka ka badbaada ka ganacsiga aadanaha kuwaasi oo ah dad naafo ah iyo dad naafo ah oo aan caddaan ahayn.
- Aqoonsiga caqabadaha iman kara iyo gaabisyada adeegyada (adeegyada ka ganacsiga dadka iyo adeegyada dadka leh naafooyinka koboceed) ee dhibbanayaasha ka ganacsiga aadanaha kuwaasi oo ah dad naafo ah iyo dad naafo ah oo aan caddaan ahayn.
- Warbixin ku saabsan waxa laga ogyahay adeegyada ka ganacsiga aadanaha iyo adeegyada dadka leh naafooyinka koboceed ee la siiyo dhibbanayaasha ka ganacsiga aadanaha ee ah dad naafo ah iyo dad naafo ah oo aan caddaan ahayn
- Sanadka 3, bixinta xog baahsan oo gobolka oo dhan ah (tani waxay naga caawinaysaa inaan helno baaxadda dhibaata ee Ohio) taasi oo kusaabsan ka ganacsiga/ku gaboodfalka dadka leh naafooyinka (waxaanu jecelnahay in xogta loo qaybiyo qaab naga caawinaysa aqoonsiga nooca gaboodfalka si aanu markaa u kala sooci karno wixii caadi ahaan loo yaqiinay gaboodfal jidheed iyo waxa uu yahay ka ganacsiga/ka faa'idaysiga aadanaha).
- Siinta macluumaad kusaabsan wax-ka-qabadyada laga isticmaalo bulsho gaar ah kuwaasi oo muujinaya dhaqan rajo wanaagsan ka bixinaya in dadka leh naafooyinka laga ilaaliyo ka ganacsi/ka faa'idaysi. Waxaanu doorbidaynaa tusaalayaal ka yimaadda gudaha Ohio, laakiin taas haddii la waayo, macluumaadka gobolada kale ayaa na anfici kara si aanu u soosaarno barnaamijyada/mashaariicda halkan.
- Tusaalayaasha waxa waajib ah inay kujiraan macluumaad faahfaahsan oo kusaabsan wax-ka-qabadyada/xeeladaha iyo xogta aasaasiga ah iyo tan natiijada ah taasi oo muujinaysa guusha barnaamijka ama dhaqanka rajada fiican leh.
- Macluumaadka kusaabsan caqabadaha haysta dadka dhibaata ka badbaaday... dhibta qofka gaartay, caqabadaha aqoonsiga bixiyayaal adeeg oo cusub, iwm.
- Si fiican u fahmida waxa/haddii ay jiraan is-shabbahyo ka dhexeeya dambiiyayaasha iyo sida ay ku helayaan dadka leh naafooyinka.
- Maxay adeeg bixiyayaasha Ohio (iyo gobolada kale) samaynaayan si ay u noqdaan qaar aqoon iyo xirfad u leh arrinkan? Waa maxay tilaabooyinka diyaarsan si loo ilaaliyo dadka nugul? Waa maxay tabobarka iyo dhaqanka daryeelka ee xog-ogaalka u ah dhibta qofka gaartay ee diyaarsani?
- Aqoonsiga sida mashaariicda wakhtigan ee Ohio iyo gobolada kale ay kharashka ugu bixiyaan wax-ka-qabadyada u diyaarsan
- Dadka leh Naafooyinka (Bulshada kale ee nugul)
- Xogta guud
- Sharci-dejinta
- Dadka deggan deegaanada Magaalada
- Daawaynta

- Tabobarka loogu talagalay Kobcinta Xirfadleyda kaasi oo uu kujiro tabobarka Aqoonta Dhaqanka

**Natijooyinka:**

SC 1.3.3: Tirada dhaqanada wanaagsan ee la abuuray: 1

SC 1.3.4: Tirada dhaqanada ugu wanaagsan ee lagu taageero hawlaha Golaha: 3

SC 1.4: Tirada dadka la tabobaray ama la affixiyey iyadoo loo marayo hindisayaasha nidaameed ee Golaha: 150

\*ODDC waxay go'aaminaysaa qanacsanida macmiilka ee halwaha Goluhu taageero ama fuliyo. Deeq-helayaasha waxa looga baahan doonaa inay ka kaalmeeyaan ODDC hannaankan.

**Natijooyinka muddada dhaw:**

Soosaaridda agab macluumaad si kor loogu qaado wada shaqaynta lala leeyahay hay'adaha iyo ururada kale si wada xaajood looga yeesho dadka leh naafooyinka kuwaasi oo la soo galiyey ka ganacsiga aadanaha.

**Natijooyinka muddada fog:**

Yoolka muddada fog waa go'aaminta sida ay tahay maalgalinta Gobolka Ohio ee xagga dejinta Shuruuc iyo Qawaaniin saamayn ku yeelanaya arrinkan, maadaama Ohio tahay meesha 4<sup>aad</sup> waddanka oo dhan xagga ka Ganacsiga Aadanaha.

U-doodista tabobar, waxbarasho, iyo wacyigalin.

**Khayraadka lagu maalgalinayo:**

*Fadaraalka:	\$30,000.00
Lacagta u dhiganta:	<u>\$10,000.00</u>
Wadarta:	\$40,000.00

\*Sii socoshada maalgalintu waxay ku xirnaan helitaanka lacagta.

**Qaabka maalgalinta:**

Tartan leh

**Deeq-helaha:**

Waa La Go'aaminayaa

## **BULSHADA LGBTQ-ga IYO DADKA LEH NAAFOOYINKA EE OHIO**

SHARCIGA DAWLADDA 106-402-OCT. 30, 2000 (B) GAARISTA.--Goluhu wuxuu taageeri karaa oo uu fulin karaa hawlo gaaris ah si uu u aqoonsado shakhsiyaadka leh naafooyinka koboceed iyo qoysaskooda kuwaasi oon haddii kale dareenka Goluhu aanu u soo jeesteen, wuxuuna ka kaalmaynayaa oo uu awood u siinayaa shakhsiyaaska leh naafooyinka iyo qoysaskooda inay helaan adeegyada, taageerooyinka la khaasyeelay, iyo noocyada kale ee kaalmooyinka, oo ay kujiraan helitaanka la qabsiga gaarka ah ee adeegyada bulshada ee caadiga ah ama adeegyada takhasuska ah.

(b) UJEEDADA.--Ujeedada cinwaankan waa hubinta in shakhsiyaadka leh naafooyinka koboceed iyo qoysaskoodu ay kaqaybqaataan nashqadaynta iyo inay helaan adeegyada bulshada, taageerooyinka la khaasyeelay, iyo qaababka kale ee kaalmooyinka ee ay u baahan yihiin kuwaasi oo sare u qaadaya aayo-ka-tashiga, madaxbannaanida, waxsoosaarka, iyo isdhexgalka iyo u dhannaanshaha dhammaan dhinacyada nolosha bulshada iyadoo loo marayo barnaamijyo dhaqamada waafaqsan oo cinwaankan lagu oggolaaday.

(5) dadaalo gaar ah ayey waajib tahay in loo galo si loo xaqiijiyo in shakhsiyaadka leh naafooyinka koboceed ee ka soo jeeda dadka laga tirada badan yahay iyo qoysaskoodu inay ku raaxaystaan fursado kordhay oo macne leh si ay u helaan una isticmaalaan adeegyada bulshada, taageerooyinka la khaasyeelay, iyo qaababka kale ee kaalmada ee ay heli karaan shakhsiyaadka leh naafooyinka koboceed ee kale iyo qoysaskoodu;

### **Yoolka (hadafka):**

Dadka naafooyinka leh iyo qoysaskoodu waxay sidii hore si ka badan u heli doonaan adeegyada iyo teknoolojiyadda taasi oo sare u qaadaysa hoggaaminta, helitaanka, badbaadada, madaxbannaanida, gaarista, sinnaanta, ku dhexjirka bulsho, caafimaadka, fursadaha shaqo, iyo bulshada.

### **Ujeedada iyo saamaynta mashruuca:**

Marka la gaaro dhammaadka 2022, "Warbixin" ayaa la qori doonaa taasi oo lagu eegayo oo aasaasaysa xog aan ka jirin Ohio oo kusaabsan bulshada LGBTQ maadaama ay la xiriirto dadka leh naafooyinka koboceed. "Warbixintan" waxa kujiri doona talobixino kusaabsan dhaqanada ugu wanaagsan ee sida loo sheego mushkiladaha si loo helo maalgalinta mustaqbalka.

## **Gogoldhigga, asbaabta, iyo baaxadda mashruuca:**

Cilmibaaris ayaa muujisay in dadka LGBT ay aad ugu dhaw yihiin marka loo eego dadka caadiga ah inay naafo noqdaan oo ay waajahaan caqabado nidaamsan marka raadinta shaqaalaynta, bulshada, iyo waxyaalaha kale. Xataa 29 sano kadib ansixintii ADA, shaqo badan ayaa wali harsan si loo hubiyo in dadka leh naafooyinka, oo ay kujiraan dadka LGBT ee leh naafooyinka, ay si buuxda oo siman adeegyada bulshada Ameerikaanka ka jira u helaan. Qiyaastii 3-5 milyan oo dadka LGBT ah ayaa leh naafooyin. (Xarunta Horumarka Ameerikaanka (Center for American Progress))

Center for American Progress (Xarunta Horumarka Ameerikaanka) waxay xustay dhawr caqabadood oo gooni ah oo haysta dadka LGBTQ ee leh naafooyinka sida:

**Xaddidnaanta helitaanka adeegyo ay LGBT kujiraan iyo qaar si buuxda ay u heli karaan.** Helitaanka daryeel caafimaad, adeegyada bulshada oo raqiis ah, la heli karo, oo loo dhan yahay, iyo waxyaalo kale waa wax ku adag inay helaan dadka LGBT ee leh naafooyinku. Tani waxay si gaar ah u sii khusaysaa bulshooyinka magaalada ka baxsan. Kaliya ma aha in dadka ku nool meelaha magaalada ka baxsan ay u dhaw yihiin inay yeeshaan naafooyin,<sup>5</sup> laakiin sidoo kale masaafadda loo baahan yahay in la socdaalo si loo helo adeeg bixiyayaal LGBT u adeegi kara iyo adeegyo ay si buuxda u heli karaan, barnaamijyada bulshada, iyo waxyaalo kale, ayaa u sabab ah in dadka LGBT ee leh naafooyinka ee ku dhaqan meelo magaalada ka baxsan inay halis wayn ugu jiraan go'doomin iyo sare u kac ku yimaadda takoorka lagu hayo.

Marka la eego dadka leh naafooyinka koboceed ee LGBTQ ka tirsan, haasaawuhu wuxuu noqon karaa hawl adag. Hay'adaha ayaa hadda bilaabaya inay garawsadaan baahida loo qabo adeegyo LGBTQ-gu ku jiraan, iyo la shaqaynta naftaa-u-doodisyada si ay u soosaaraan kooxo taageero. (slate.com)

## **Gardarraysiga iyo takooridida dhallinyarta LGBTQ-ga ee leh naafooyinka.**

Dhallinyarta LGBTQ ee leh naafooyinku waxay sheegaan inay aad u sarrayso dhibaateynta lagu hayo iyo inay aad ugu dhaw yihiin in la gardarraysto ama la dhibaateeyo marka loo eego ardayda aan lahayn naafooyinka.<sup>6</sup> ardayda LGBTQ ee leh naafooyinka aad ayey ugu dhaw yihiin in la anshaxmariyo dugsiga iyo inay ka saaqidaan dugsiga, marka loo eego ardayda LGBTQ ee aan lahayn <sup>naafooyinka</sup> .

**Ka dhexmuuqasho la'aanta labada bulshood.** Dadka LGBTQ ee leh naafooyinku sida badan waxay sheegaan inay dhibaato badan tahay in aqoonsigooda si buuxda loo garawsado. Meelaha diiradda saara naafada, waayoaragnimadooda gaarka ah dadka LGBT ahaan waxa dhici karta inaan la garawsan. Iyo in meelaha LGBT, adeegyada iyo tafiilaadku aysan noqon qaar loo dhan yahay oo la wada heli karo, oo ay kujiraan isticmaalidda dhismayaasha ama musqulaha, tarjumaadda ASL iyo/ama qoraalka hoosta ku soo qorma ee CART ee dadka aan waxba maqlayn ama maqalkoodu culus yahay, iyo waxyaalo kale.

Columbus, **Ohio** waxa loo yaqaan degmada fanka, laakiin waxay leedahay bulsho xooggan oo **khaniisiin** ah iyo naadiyo iyo baarar fara **badan** oo khaniisiinta u dooda. Wakhtigan, magaaladu sidoo kale waxay ku faani kartaa inay kujirto 15 ugu sarreeya ee 50 magaalo ee ugu waawayn waddanka iyadoo leh boqolkiiba 4.3 -- ama 4,427 -- oo kamid ah dadka qaangaarka ah inay yihiin dumar khaniisiin ah, rag khaniisiin ah, labeeb ama ninaw-naag marka la eego tirokoob cusub oo ay samaysay Gallup. (dispatch.com)

Goluhu wuxuu jeclaan lahaa inuu maalgaliyo mashruuc lagu abuurayo "Warbixin" kusaabsan arrinta LGBTQ maadaama **ay** la xiriirto dadka leh naafooyinka. Warbixintu **waa warbixin ama** hage maamul soosaaro taasi oo sida badan ka hadlaysa dhibaatooyin iyo sida loo xallinayo. Caadi **ahaan ujeedada warbixintu waa** in lagu doodo in meelaha qaar ay yihiin meesha ugu wanaagsan la aadayo ama in xalalka qaar yihiin kuwa ugu wanaagsan ee dhibaato gaar ah. Marka loo isticmaalayo ujeedooyin u-doodis, **waxay saamayn** ku yeelan kartaa nidaamyada go'aan-qaadashada ee siyaasadaha, habraacyada, iyo sharci-dejinta hadda iyo mustaqbalka.

Waxaa jirta xog kooban oo kusaabsan waayoaragnimada dadka LGBTQ-ga iyo dadka aan caddaanka ahayn ee naafooyinka leh--iskaba dhaaf dadka LGBTQ ee aan caddaanka ahayn ee naafooyinka leh, ururin iyo lafagur xogeed oo dheeraad ah oo horumarsan ayaa loo baahan yahay. U-doodayaasha, cilmibaarayaasha, iyo siyaasad-dejiyayaasha waa inay ballaariyaan aragtidooda ah cidda ay yihiin dadka la nool naafooyinka iyo kuwa ugu badan ee la dayacay. (Talada Center on American Progress)

Wajiga Koowaad ee mashruuca, Goluhu wuxuu jeclaan lahaa in "Warbixintan" bixiso macluumaad kusaabsan dhibaataada, xogta, iyo talobixinaha. Warbixinta waa inay kujirtaa sida hay'aduhu ay u siin karaan adeegyo ayna dhaqanka is diidayn bulshada LGBTQ oo ay kujiraan dadka leh naafooyinka koboceed oo ay kujiraan dadka aan caddaanka ahayn ee leh naafooyinka koboceed. Isagoo ka duulaya talobixinaha, Goluhu wuxuu go'aamin doonaa talobixinta ay tahay inuu maalgaliyo inta lagu jiro sanadada ka harsan Qorshaha Gobolka ee 5 Sano. Ujeedooyin soo bandhigid darteed, Goluhu wuxuu jeclaan lahaa in la beegsado magaaloooyinka ku yaala Bartamaha Ohio taasi oo ka dhigan meelaha u jira 25 mayl Columbus. Tan waxa kamid noqon kara magaaloooyinka:

Westerville, Groveport, Bexley, Lockbourne, New Albany, Upper Arlington, Grove City, Etna, Dublin, Canal Winchester, Derby, Powell, Lithopolis, Bellfontaine, Worthington, Commercial Point, Delaware, Orient, Newark, Reynoldsburg, Marion, Pickerington, Mr. Gilead, Blacklick, Mt. Vernon, Ashville, Harrisburg, Galloway, Carroll iyo Hilliard.

3 Sano gudahood, mashruucu wuxuu bilaabi doonaa inuu fiiriyo bulshooyinka meelo kala duwan deggan si ay uga caawiyaan aqoonsiga caqabadaha kala duwan sida: helitaanka daryeel caafimaad oo dhaqanka ayna is diidayn (xafiisyada bixiyaha/isbitaalada/guriga), gaadiid, helitaanka adeegga internetka, dabecadaha/dhalleecaynta bulshada, jiritaanka arrimo bulsho oo la mid ah iyo fursado bulsheed, habraacyada iyo caqabadaha guriyeynta/shaqaalaynta, helitaanka iyo dareemidda soo dhawaynta bixiyayaasha adeegyada bulsheed ee kale, iwm.

#### **Hawlaha muhiimka ah:**

- Soosaaridda "Warbixinta".
- Ballaarinta ururinta xogta iyo tabinta waayoaragnimada dadka LGBTQ ee leh naafooyinka koboceed iyo sidoo kale dadka LGBTQ ee aan caddaanka ahayn ee leh naafooyinka koboceed.
- La shaqaynta hay'adaha kale sida DODD iyo shaqaalahooda innagoo u sheegayna hawsha aynu ku jirno ee la xiriirta dadka leh naafooyinka koboceed.
- Tabobarka Tixgalinta Dhaqanka.
- Abuurista kooxo arrin gaar ah.
- U bixinta tabobar ujeedooyin waxbarasho oo ay kujirto kobcinta xirfadeed.
- Sanadka 3 qabashada macluumaadka kusaabsan bulshooyinka magaalada ka baxsan.
- Sanadka 3 fiirinta dadka ku nool magaalada gudaheeda iyo duleedyada magaalada si loo aqoonsado caqabadaha haysta iyo halka ay aadka u muuqdaan.

#### **Natiijooyinka:**

SC 1.3.3: Tirada dhaqanada wanaagsan ee la abuuray: 3

SC 1.3.4: Tirada dhaqanada ugu wanaagsan ee lagu taageero hawlaha Golaha: 3

SC 1.4: Tirada dadka la tabobaray ama la aflixiyey iyadoo loo marayo hindisayaasha nidaameed ee Golaha: 200

\*ODDC waxay go'aaminaysaa qanacsanida macmiilka ee halwaha Goluhu taageero ama fuliyo. Deeq-helayaasha waxa looga baahan doonaa inay ka kaalmeeyaan ODDC hannaankan.

**Natijooyinka muddada dhaw:**

In la gaarsiiyo mashruuca hay'ado iyo kooxo kale, gaar ahaan bulshada naafada ah si loo abuuro danayn hawlaha mashruuca ah.

**Natijooyinka muddada fog:**

Hawlaha mashruucu waxay abuuri donaa saamayn ay ku sababaya ururadu inay la qabsadaan dhaqanada ugu wanaagsan si ay u abuuraan ama u siiyaan adeegyo dhaqanka aysan is diidayn bulshada LGBTQ kuwaasi oo leh naafooyin koboceed.

**Khayraadka lagu maalgalinayo:**

*Fadaraalka:	\$30,000.00
Lacagta u Dhiganta:	<u>\$10,000.00</u>
Wadarta:	\$40,000.00

\*Sii socoshada maalgalintu waxay ku xirnaan helitaanka lacagta.

**Qaabka maalgalinta:**

Tartan leh

**Deeq-helaha:**

Waa La Go'aaminayaa



**GOLAHA NAAFOOYINKA KOBACEED EE OHIO (OHIO  
DEVELOPMENTAL DISABILITIES COUNCIL (ODDC))**

Sharraxaadda Mashruuca

2022 – 2026

**Marka la eego  
Dhanka  
Siyaasadda Dawladda**

**Shaqaalaha lala Xiriirayo: Paul Jarvis  
(614) 644-5545  
[Paul.Jarvis@dodd.ohio.gov](mailto:Paul.Jarvis@dodd.ohio.gov)**

## DEEQDA MAALINTA WACYIGALINTA & U-DOODISTA DADKA LEH NAAFOOYINKA KOBOCEED

42 USC 15025 (c)(5)(I) Samaynta Iskaashi iyo Kaqaybqaadashada Muwaadinka Goluhu wuxuu taageeri karaa oo uu fulin karaa hawlo uu dadwaynaha ku barayo awoodaha, doorbidyada, iyo baahiyaha shakhsiyaadka leh naafooyinka koboceed iyo qoysaskooda iyo inuu soosaaro oo taageero iskaashiyo taageera ajandaha siyaasadda ee Golaha, oo ay kujiraan tabobarka naftaa-u-doodista, waxbaridda siyaasad-dejiyayaasha, iyo xirfadaha hoggaaminta muwaadinka.

### **Hadafka:**

Siinta fursado badan oo kobcinta hoggaaminta ah ee dadka naafada koboceed leh, xubnaha qoysaskooda iyo ciddii ay iskaashi leeyihiin. Soo bandhigidda fursado kala duwan oo lagu kobcinayo xirfadaha ay u baahan yihiin si ay u noqdaan hoggaamiyayaal u dhaqdhaqaaqa naafada.

### **Ujeedada iyo saamaynta mashruuca:**

Dadka leh naafooyinka koboceed, xubnaha qoysaskooda iyo saaxiibada iyo qaar kale waxay noqon doonaan qaar qayb ku leh hawsha nidaamka u-doodista iyagoo u maraya maalin wacyigalin iyo u-doodis abaabulan ah oo mar kaliya ah.

### **Gogoldhigga, asbaabta, iyo baaxadda mashruuca:**

Dadka leh naafooyinka iyo xubnaha qoysaskoodu iyagaa ah u-doodayaasha naftooda markay timaaddo gaarsiinta warkooda ee dadka caadiga ah iyo siyaasad-dejiyayaasha. Waxay ahayd mid ku timid dadaalkooda, nafharkooda iyo dhiiranidooda in fahamka dadwaynaha iyo siyaasaddu ka haystaan awoodaha iyo kartiyaha dadka leh naafooyinka ay horumartay Ohio.

Dadaalo abaabulan oo ay galeen Golaha iyo ururada kale dartood, isbaddalo wanaagsan ayaa ku dhacay siyaasadda dawladda ee Ohio marka la eego xagga shaqaalaynta, adeegyada guriga iyo bulshada, daryeelka caafimaadka, waxbarashada gaarka ah, iyo xuquuqda madaniga. Horumarradan xagga siyaasadda dawladda ah waxay ka dhasheen dadaal ay sameeyeen shakhsiyaadka leh naafooyinka kuwaasi oo socdaal ku tagay caasimadda gobolka oo si fool ka fool ahna ula kulmay sharci-dejiyayaasha iyo shaqaalahooda si ay ugu doodaan isbaddal.

Wajiga isbaddalka siyaasadda dawladda ee Ohio ma aha Golaha Naafooyinka Koboceed, laakiin taas baddalkeeda waa, shakhsiyaadka leh naafooyinka iyo xubnaha qoysaskooda kuwaasi oo Goluhu taageeray si ay ula kulmaan sharci-dejiyayaashooda oo sheekadoodana u sheegaan. Deeqda Maalinta Wacyigalinta iyo U-doodista Naafooyinka Koboceed waxay ku xoojin doontaa dadaalkaasi qorshayn iyo abaabul hal dhacdo ah.

### **Hawlaha muhiimka ah:**

Deeq-helaha Maalinta Wacyigalinta iyo U-doodista Naafooyinka Koboceed wuxuu qorshayn doonaa, si sanadle ah, hal maalin u-doodis hoosta laga soo bilaabay in laga fuliyo caasimadda gobolka. Deeq-heluhu wuxuu masuul ka ahaan doonaa soosaaridda iyo hirgalinta xeeladaha kuwaasi oo si guul ah:

U shaqaalayn doona dadka leh naafooyinka, xubnaha qoysaskooda, saaxiibadooda iyo dadka kale ee kaqaybqaata dhacdada maalinta kaliya ah ee ka dhacaysa caasimadda gobolka. Si gaar ah waxa loo eegayo waa inay kujiraan shaqaalaynta kaqaybqaatayaasha ka soo jeeda qoomiyadaha kala duwan. Yoolka dhinaca mashruucani wuxuu noqon doonaa gaarista kaqaybqaadashada dhacdada taasi oo si siman ay matalaad ugu yeelanayaan dadka laga tiro badan yahay ee bulshada Ohio (sida lagu muujiyey Xogururinta Bulshada Ameerikaanka). Sidoo kale waa in xoogga la saaro shaqaalaynta kaqaybqaatayaasha ka soo jeeda degmo kasta ee Aqalka Hoose iyo Aqalka Sare ee Ohio.

- U qaybinta wixii la heli karo kaqaybqaatayaasha, oo ay kujiraan agabka ay soosaareen Goluhu si ay u caawiyaan saamayn ku yeelashada siyaasad-dejiyayaasha wixii kusaabsan arrimaha siyaasadda dawladda.
- Abaabulidda booqashooyinka sharci-dejinta ee kor u qaadaysa saamaynta u-doodista ee kusaabsan siyaasad-dejiyayaasha dawladda. Abaabulku wuxuu u baahan karaa diiwaangalin, isku lammaanaynta u-doodayaasha iyo tabobar kulan, si loo hubiyo in wakhtiga laga faa'ideeyo.
- Ururinta iyo jamcinta waayoaragnimada kulamada u-doodayaasha.
- Helista in warbaahinta la galiyo Maalinta Wacyigalinta iyo U-doodista Naafooyinka Koboceed taasi oo siinaysa xubnaha dadka caadiga ah macluumaad kusaabsan arrimaha siyaasadda dawladda taasi oo horumarin doonta gaarsiinta adeegyada iyo awoodda nidaamka dadka leh naafooyinka.

Mashruucan waxaa hagd iyo kaalmo laga siin doonaa aasaasidda arrinka loo jeedo iyo agabka tabobarka ee dhacdada Golaha Naafooyinka Koboceed ee Ohio.

### **Natiijooyinka:**

IFA 1.1: # dadka leh naafooyinka koboceed ee kaqaybqaatay hawlaha Goluhu taageeray ee loogu talagalay inay kordhiyaan aqoontooda ku aaddan sida looga qaybqaato go'aanada saamaynta ku leh noloshooda, nolosha dadka kale, iyo/ama nidaamyada. Bartilmaameedka Sanadka Koowaad: 200

IFA 1.2: Tirada xubnaha qoyska ee kaqaybqaatay hawlaha Goluhu taageeray ee loogu talagalay inay kordhiyaan aqoontooda ku aaddan sida looga qaybqaato go'aanada saamaynta ku leh qoyska, nolosha dadka kale, iyo/ama nidaamyada. Bartilmaameedka Sanadka Koowaad: 50

IFA 2.1: Kadib kaqaybqaadashada hawlaha Goluhu taageeray, boqolkiiba inta dadka leh naafooyinka koboceed oo sheegay in u-doodistoodu korodhay shaqada Golaha dartii. Bartilmaameedka Sanadka Koowaad: 85%

IFA 2.2: Kadib kaqaybqaadashada hawlaha Goluhu taageeray, boqolkiiba inta xubnaha qoysaska sheegay in u-doodistoodu korodhay shaqada Golaha dartii. Bartilmaameedka Sanadka Koowaad: 85%

SC 2.2: # dadaalada Golaha ee la fuliyey si loogu baddalo qaababka wajihidda ee kala daadsan nidaam wada socda oo wax ku ool ah oo xaqiijinaya in shakhsiyaadka leh naafooyinka koboceed iyo qoysaskoodu ay kaqaybqaataan nashqadda oo ay u helaan adeegyada bulshooyinka baahan, taageerooyinka shakhsiga ah, iyo noocyada kale ee kaalmo ee sare u qaadaya aayo-ka-tashiga, madaxbannaanida, waxsoosaarka, iyo midaynta iyo ka wada qaybgalka dhammaan dhinacyada nolosha ee bulshada. Bartilmaameedka Sanadka Koowaad: 1

\*ODDC waxay go'aaminaysaa qanacsanida macmiilka marka la eego halwaha Goluhu taageero ama fuliyo. Deeq-helayaasha waxa looga baahan doonaa inay ka kaalmeeyaan ODDC hannaankan.

### **Natiijooyinka muddada dhaw:**

Shakhsiyaadka leh naafooyinka, xubnaha qoysaska iyo xirfadlayda waxay kaqaybqaadan doona dhacdo barnaamij halkaasi oo ay ka heli doonaan tabobar iyo wargalin kusaabsan adeegyadan wakhtigan.

Dadka leh naafooyinka, xubnaha qoysaska iyo xirfadlayda waxa laga qaybgalin u-doodis iyagoo la kulmaya siyaasad-dejiyayaasha heer gobol.

### **Natijooyinka muddada fog:**

Marka la gaaro 2026, guddida qorshaynta dhacdada ayaa ka koobnaan doona ugu yaraan lix naftaa-u-doode. U-doode ka socda degmo kasta oo gobolka ah ayaa kaqaybqaadan doona barnaamijka oo kaqaybgali doona u-doodista.

### **Macluumaadka lagu maalgalinayo:**

#### **Sanad Kasta**

*Fadaraalka	\$35,000
Lacagta u Dhiganta:	<u>\$11,666</u>
Wadarta:	\$46,666

\*Sii socoshada maalgalintu waxay ku xirnaan helitaanka lacagta.

### **Qaabka maalgalinta:**

Tartan ah  
Mashruucani wuxuu raaci doonaa kaltirsiga sanad xisaabeedka fadaraalka.

### **Deeq-helaha:**

Waxa lagu go'aamin dib-u-eegis tartan.

## **ISKAASHIGA U-DOODISTA SHARCI-DAJINTA FEDERAALKA (FEDERAL LEGISLATIVE ADVOCACY PARTNERSHIP (FLAP))**

42 USC 15025 (c)(5)(J) Wargelinta Siyaasad-dejiyayaasha

Goluhu wuxuu taageeri karaa oo uu fulin karaa hawlo uu ku siinayo siyaasad-dejiyayaasha macluumaad isagoo taageeraya oo fulinaya daraasado iyo lafaguryo, macluumaad ururinaya, oo soosaaraya oo qaybinaya siyaasado iyo habraacyo tusaale ah, macluumaad, qaabab, xeelado, natiijooyin, go'aano, iyo talobixino. Goluhu waxa dhici karta inuu toos u siiyo macluumaad siyaasad-dejiyayaasha Fadaraalka, Gobolka, iyo deegaanka, oo ay kujiraan Kongareeska, laanta fulinta Fadaraalka, Badhasaabada, sharci-dejinta Gobolka, iyo hay'adaha Gobolka, si uu u kordhiyo awoodda siyaasad-dejiyayaashani ay ku bixinayaan fursado ay ku xoojinayaan ama ku hirgalnayaan adeegyada caadiga ah si loo daboolo baahiyaha, ama loo siiyo adeegyo khaas ah, shakhsiyaadka leh naafooyinka koboceed iyo qoysaskooda.

### **Yoolka (hadafka):**

Siinta fursado badan oo kobcinta hoggaaminta ah ee dadka naafada koboceed leh, xubnaha qoysaskooda iyo ciddii ay iskaashi leeyihiin. Soo bandhigidda fursado kala duwan oo lagu kobcinayo xirfadaha ay u baahan yihiin si ay u noqdaan hoggaamiyayaal u dhaqdhaqaaqa naafada.

### **Ujeedada iyo saamaynta mashruuca:**

In la siiyo tabobar iyo taageero gaar ah xubnaha Golaha Naafooyinka Koboceed ee Ohio, xubnaha Golaha Nolosha Madaxbannaan ee Gobolka oo Dhan ee Ohio, iyo wakiilada Guddiyada Degmada Ohio ee Naafooyinka Koboceed si looga qaybgalo u-doodista heer fadaraal ee dawladda.

### **Gogoldhigga, asbaabta, iyo baaxadda mashruuca:**

Mashruucani wuxuu abaabuli doonaa koox ah dadka reer Ohio ee leh naafooyinka ah, xubnaha qoysaska, iyo xirfadlayda kuwaasi oo ka socda ururada is kaashanaya si ay ugu socdaalaan Washington DC si ay u helaan warbixino kookooban oo kusaabsan saamaynta siyaasadda fadaraalku ku leedahay Ohio si gaar ah iyo inay la kulmaan xafiisyada Kongareeska si ay uga warbixiyaan xogta Ohio ee gaarka ah.

Shakhsiyaadka matalaya Golaha Naafooyinka Koboceed ee Ohio, Xarumaha Nolosha Madaxabannaan iyo Guddiyada Degmada ee Naafooyinka Koboceed waxay kaqaybqaadan doonaan kulan hal maalin ah oo xog-waraysi ah waxayna la kulmi xafiisyada cidda Kongareeska u matasha iyagoo koox ah.

Mashruucani wuxuu siin doonaa taageero kharashaadka la xiriira kulamada ee dhammaan kaqaybqaatayaasha. Kharashaadka la xiriira kulamada waxa kamid ah kharashka meesha kulanka, qalabka la soo kiraysato, iyo kharashka kale ee la xiriira fulinta tabobarrada.

### **Hawlaha muhiimka ah:**

Xubnaha Golaha iyo qaar kale waxay kaqaybqaadan doonaan kulan xog-waraysi oo hal maalin ah oo kusaabsan arrimaha siyaasadda fadaraalka ee la xiriira adeegyada iyo taageerooyinka loogu talagalay shakhsiyaadka leh naafooyinka koboceed ee Ohio. Si gaar ah waxa loo eegayo waa inay kujiraan shaqaalaynta kaqaybqaatayaasha ka soo jeeda qoomiyadaha kala duwan. Kulamadu waxay siin doonaan kaqaybqaatayaasha macluumaadka loo baahan yahay in lagu caawiyo in siyaasad-dejiyayaashu wax ka ogaadaan arrimaha gaarka ah ee naafada la xiriira ee Ohio.

Xubnaha Golaha iyo qaar kale waxay la kulmi xubnaha Kongareeska iyo shaqaalahooda si ay uga qaybgalaan u-doodista iyagoo matalaya shakhsiyaadka leh naafooyinka koboceed iyo qoysaskooda.

### **Natiijooyinka:**

IFA 1.1: Tirada dadka leh naafooyinka koboceed ee kaqaybqaatay hawlaha Goluhu taageeray ee loogu talagalay inay kordhiyaan aqoontooda ku aaddan sida looga qaybqaato go'aanada saamaynta ku leh noloshooda, nolosha dadka kale, iyo/ama nidaamyada: 10

IFA 1.2: Tirada xubnaha qoyska ee kaqaybqaatay hawlaha Goluhu taageeray ee loogu talagalay inay kordhiyaan aqoontooda ku aaddan sida looga qaybqaato go'aanada saamaynta ku leh qoyska, nolosha dadka kale, iyo/ama nidaamyada: 5

\*ODDC waxay go'aaminaysaa qanacsanida macmiilka marka la eego halwaha Goluhu taageero ama fuliyo. Deeq-helayaasha waxa looga baahan doonaa inay ka kaalmeeyaan ODDC hannaankan.

**Natijooyinka muddada dhaw:**

Shakhsiyaadka leh naafooyinka, xubnaha qoysaska iyo xirfadlayda waxay kaqaybqaadan doona dhacdo barnaamij halkaasi oo ay ka heli doonaan tabobar iyo wargalin kusaabsan adeegyadan wakhtigan.

Dadka leh naafooyinka, xubnaha qoysaska iyo xirfadlayda waxa laga qaybgalin doonaa u-doodis iyagoo la kulmaya siyaasad-dejiyayaasha heer fadaraal.

**Natijooyinka muddada fog:**

Shakhsiyaadka leh naafooyinka, xubnaha qoyska iyo xirfadlaydu waxay aasaasi doonaan oo ay joogtayn doonaan inay wadahal si joogto ah ugala yeeshaan siyaasad-dejiyayaasha fadaraalka barnaamijyada iyo adeegyada saamaynta ku leh shakhsiyaadka leh naafooyinka koboceed.

**Macluumaadka lagu maalgalinayo:**

	<b>2023</b>	<b>2025</b>
*Fadaraalka:	\$16,000	\$16,000
Lacagta u Dhiganta:	<u>\$5,333</u>	<u>\$5,333</u>
Wadarta:	\$21,333	\$21,333

\*Sii socoshada maalgalintu waxay ku xirnaan helitaanka lacagta.

**Qaabka maalgalinta:**

Tartan leh

**Deeq-helaha:**

Waa la go'aaminayaa.



## KULAMADA XOG-WARAYSIGA KULANKA GUUD

42 USC 15025 (c)(5)(J) Wargelinta Siyaasad-dejiyayaasha Goluhu wuxuu taageeri karaa oo uu fulin karaa hawlo uu ku siinayo siyaasad-dejiyayaasha macluumaad isagoo taageeraya oo fulinaya daraasado iyo lafaguryo, macluumaad ururinaya, oo soosaaraya oo qaybinaya siyaasado iyo habraacyo tusaale ah, macluumaad, qaabab, xeelado, natiijooyin, go'aano, iyo talobixino. Goluhu waxa dhici karta inuu toos u siiyo macluumaad siyaasad-dejiyayaasha Fadaraalka, Gobolka, iyo deegaanka, oo ay kujiraan Kongareeska, laanta fulinta Fadaraalka, Badhasaabada, sharci-dejinta Gobolka, iyo hay'adaha Gobolka, si uu u kordhiyo awoodda siyaasad-dejiyayaashani ay ku bixinayaan fursado ay ku xoojinayaan ama ku hirgalnayaan adeegyada caadiga ah si loo daboolo baahiyaha, ama loo siiyo adeegyo khaas ah, shakhsiyaadka leh naafooyinka koboceed iyo qoysaskooda.

### **Hadafka:**

Dadka naafooyinka leh iyo qoysaskoodu waxay sidii hore si ka badan u heli doonaan adeegyada iyo teknoolojiyadda taasi oo sare u qaadaysa hoggaaminta, helitaanka, badbaadada, madaxbannaanida, gaarista, sinnaanta, ku dhexjirka bulsho, caafimaadka, fursadaha shaqo, iyo bulshada.

### **Ujeedada iyo saamaynta mashruuca:**

Dhammaadka Kulanka Guud, sharci-dejiyayaasha gobolka iyo shaqaalahoodu xog fiican ayey ka hayn doonaan qaabdhismeedka iyo adeegyada iyo taageerooyinka nidaamka naafooyinka koboceed ee Ohio, oo ay kujiraan sida siyaasadaha fadaraalka, gobolka, iyo deegaanku u saamayn karaan shakhsiyaadka leh naafooyinka koboceed, xubnaha qoysaskooda, iyo xirfadlayda ku sugan aagga naafooyinka koboceed.

### **Gogoldhigga, asbaabta, iyo baaxadda mashruuca:**

Taariikhdu markay ahayd 1992, dadka reer Ohio waxay qaateen wax ka baddal dastuurka gobolka lagu sameeyey oo dhaqangalinayey xaddidaadyo muddo xileedka xubnaha Kulanka Guud ee Ohio. Wakiilada gobolku waxay ku eg yihiin afar muddo xileed oo xiriir ah oo soconaya laba sano, sanatarada gobolku waxay ku eg yihiin laba muddo xileed oo xiriir ah oo soconaya afar sano.

Ilaa markii la dhaqangaliyey xaddidaada muddo xileedka, Aqalka Wakiilada ee Ohio iyo Sanatkuba waxay la kulmeen isbaddalo waawayn oo ka dhacay xagga aqoon hay'adeed taasi oo ururo maamuleed oo fara badan ay qiimeeyaan. Afarta sano ee xiga, ugu dhawaan 1/3 Aqalka Wakiilada Ohio iyo 1/2 Aqalka Sanatka Ohio waxa khusayn doona xaddidaadaha muddo xileedka. Tiradan xisaabta kuma darsato wixii xubno cusub ah ee labada gole ka tirsan ee ku fadhiyo guul ay ka soo hooyeen doorasho ay galeen. Dib-u-eegid lagu sameeyey shaqaalaha sharci-dejinta ee Golaha

Wakiiladu wuxuu muujiyey in heerka shaqaale tagistu ay gaarayso ugu dhawaan boqolkiiba 85 afartii sano ee u dambeeyey.

Marka la eego u-doodayaasha leh naafooyinka, xubnaha qoyska iyo xirfadlayda kujira xayndaabka naafooyinka koboceed, kaqaybgalinta siyaasad-dejiyayaasha iyo shaqaaluhu waxay yeelan kartaa dhibaatooyin marka siyaasad-dejiyaha ama shaqaaluhu aanu waxba ka aqoon taariikhda iyo arrimaha dadka leh naafooyinka koboceed ay waajahaan. Nidaamka Ohio ee adeegyada iyo taageerooyinku waa mid si gooni ah u kakan marka la eegayo qaababka golaha degmada, cashuuraha hantida, maalgalinta Medicaid, Ka Tanaasulka Guriga iyo Bulshada, liisaska sugitaanka, hindisayaasha shaqaalaynta, hindisayaasha waxbarashada gaarka ah, ikhtiyaarada masuulnimada iyo ammaanada, iyo barnaamijyo kale oo badan oo loogu talagalay in lagu xoojiyo oo lagu horumariyo nololsha shakhsiyaadka leh naafooyinka koboceed iyo qoysaskooda. Caqabadda ka hor taagan xiriirka iyo baahiyaha uu qabo qofka leh naafadu waxay noqon karaan qaar adag iyadoo sababtu tahay qaabka kakan ee uu u samaysan yahay nidaamka gaarsiinta adeegga ee Ohio.

Mashruucani wuxuu siin doonaa tabobarro joogto ah sharci-dejiyayaasha iyo shaqaalaha si looga caawiyo inay aqoontooda ku biiriyaan nidaamka adeegga ee loogu talagalay dadka leh naafooyinka si ay u horumariyaan fahamkooda isbaddalada siyaasadda ee ay raadinayaan shakhsiyaadka leh naafooyinku, waalidiintu iyo xubnaha qoysku, iyo xirfadlayda kujira xayndaabka naafooyinka koboceed.

#### **Hawlaha muhiimka ah:**

Mashruucani wuxuu abaabuli doonaa kulamada xog-waraysiga sharci-dejineed ee loogu talagalay Kulanka Guud ee Ohio iyo shaqaalahooda. Mashruuca, oo ka helaya caawimo Golaha Naafooyinka Koboceed ee Ohio, wuxuu dejin doonaa manhaj ka kaalmayn doona siyaasad-dejiyayaasha iyo shaqaalahooda inay si wacan u fahmaan sida nidaamka naafooyinka koboceed u shaqeeyo halkan Ohio. Mashruucu wuxuu ka masuul ahaan doonaa:

- Mudaynta, isagoo caawimo ka helaya Golaha DD, kulamada xog-waraysiga kuwaasi oo ay kaqaybgalayaan shaqaalaha sharci-dejineed iyo wakiilada gobolka iyo sanatarada gobolka.
- Abaabulidda martiqaadyada iyo la socoshada imaanshaha kulan xog-waraysi oo kasta.
- Abaabulidda dadka ka hadli doona xog-waraysi kasta, oo ay kujiraan qabanqaabinta agabka, qalabka A/V, ama waxyaabaha kale ee loogu baahan yahay hadal-jeedinta, qaadista qashinka, iwm.
- Bixinta taageerada shaqaale xog-waraysi kasta.
- Helitaanka jawaabcein ama qiimayno.

Sanad kasta, mashruucu, isagoo kaashanaya Golaha Naafooyinka Koboceed, wuxuu soosaari doonaa manhaj ka kooban mawduucyada iyo taariikhaha xog-waraysiyada.

## **Natijooyinka:**

SC 1.5.1: Tirada hawlaha isbaddalka nidaamyada ee Goluhu taageeray iyadoo ururaduna si firfircoon ugu lug leeyihiin.

SC 2.1: Tirada dadaalada Golaha ee horseeday horumarka dhaqanada ugu wanaagsan ama rajada fiican leh, isbaddalada siyaasadaha, habraacyada, shuruucda ama qawaaniinta.

\*ODDC waxay go'aaminaysaa qanacsanida macmiilka marka la eego halwaha Goluhu taageero ama fuliyo. Deeq-helayaasha waxa looga baahan doonaa inay ka kaalmeeyaan ODDC hannaankan.

## **Natijooyinka muddada dhaw:**

Xubnaha Kulanka Guud ee Ohio iyo shaqaalahoodu waxay kaqaybqaadan doonaan kulamada xog-waraysiga taasi oo kordhin doonta fahamkooda barnaamijyada deegaanka, gobolka iyo fadaraalka ee saamaynta ku leh shakhsiyaadka leh naafooyinka. Kulamada labada sano ee hore, waxa la qaban doonaa ugu yaraan siddeed kulan oo xog-waraysi si loo horumariyo fahamka siyaasad-dejiyayaasha ee ku aaddan arrimaha sida Medicaid, Ka Tanaasulka Adeegyada Guriga iyo Bulshada, Arrimaha Shaqaalaha Xirfadlayda ee Taageerada Tooska ah, iyo guriyeyn, daryeel caafimaad, gaadiid iyo shaqaalayn la heli karo, la awoodi karo, oo diyaar ah.

## **Natijooyinka muddada fog:**

Marka la gaaro 2026, koox wakiilo iyo sanatarro ah ayaa sii wadi doona inay kaqaybqaataan koox siyaasad-dejiyayaal isku-aragti ah oo dadaal ugu jira horumarinta barnaamijyada iyo adeegyada naafada la xiriira ee loogu talagalay shakhsiyaadka leh naafooyinka koboceed iyo naafooyinka kale.

**Macluumaadka lagu maalgalinayo:**

*Fadaraalka:	\$35,000
Lacagta u Dhiganta:	<u>\$11,666</u>
Wadarta:	\$46,666

\*Dhammaan abaalmarinuhu waxay ku tiirsan yihiin helitaanka lacagta fadaraalka.

**Qaabka maalgalinta:**

Tartan leh

**Deeq-helaha:**

Waa la go'aaminayaa.

## DEEQAHA CILMIBAARISTA SIYAASADDA DAWLADDA

42 USC 15025 (c)(5)(J) Wargelinta Siyaasad-dejiyayaasha Goluhu wuxuu taageeri karaa oo uu fulin karaa hawlo uu ku siinayo siyaasad-dejiyayaasha macluumaad isagoo taageeraya oo fulinaya daraasado iyo lafaguryo, macluumaad ururinaya, oo soosaaraya oo qaybinaya siyaasado iyo habraacyo tusaale ah, macluumaad, qaabab, xeelado, natiijooyin, go'aano, iyo talobixino. Goluhu waxa dhici karta inuu toos u siiyo macluumaad siyaasad-dejiyayaasha Fadaraalka, Gobolka, iyo deegaanka, oo ay kujiraan Kongareeska, laanta fulinta Fadaraalka, Badhasaabada, sharci-dejinta Gobolka, iyo hay'adaha Gobolka, si uu u kordhiyo awoodda siyaasad-dejiyayaashani ay ku bixinayaan fursado ay ku xoojinayaan ama ku hirgalnayaan adeegyada caadiga ah si loo daboolo baahiyaha, ama loo siiyo adeegyo khaas ah, shakhsiyaadka leh naafooyinka koboceed iyo qoysaskooda.

### **Hadafka:**

Dadka naafooyinka leh iyo qoysaskoodu waxay sidii hore si ka badan u heli doonaan adeegyada iyo teknoolojiyadda taasi oo sare u qaadaysa hoggaaminta, helitaanka, badbaadada, madaxbannaanida, gaarista, sinnaanta, ku dhexjirka bulsho, caafimaadka, fursadaha shaqo, iyo bulshada.

### **Ujeedada iyo saamaynta mashruuca:**

Inuu siiyo Golaha, u-doodayaasha iyo siyaasad-dejiyayaasha xog iyo natiijooyin cadcad oo kooban oo la xiriira isbaddalka nidaamyada iyo xirfad dhisidda loo baahan yahay Ohio dhexdeeda, iyagoo fulinaya daraasado cilmibaaris iyo lafaguryo.

### **Gogoldhigga, asbaabta, iyo baaxadda mashruuca:**

Deeqda Cilmibaarista Xogta iyo Siyaadadda waxa loo aasaasay taageeridda ururinta iyo lafagurka xogta siin doonta Golaha, u-doodayaasha iyo siyaasad-dejiyayaasha cilmibaaris iyo natiijooyin xaqiiq ah kuwaasi oo sare u qaadaya isbaddalka nidaameed iyo xirfad dhisidda si loo horumariyo adeegyada iyo taageerooyinka loogu talagalay dadka leh naafooyinka koboceed iyo qoysaskooda.

Arimaha waxyaalaha daraasad walba oo lagu fulinayo deeqdan, oo ay kujiraan xuduudaha iyo baaxadda, waxaa aqoonsan doonaa Guddida Mushkiladaha, waxaana deeq-helaha gaarsiinaya Gudiga Siyaasadda Dawladdad ee Golaha. Daraasadaha iyo lafaguryada uu Goluhu raadinayo waxa kamid noqon kara, laakiin kuma eka, Shaqaalayn, Guriyeynta, ka Tanaasullada, Gaadiidka, Waxbarashada, Waxbarashada Sare, Caafimaadka, iyo Taageerooyinka Bulshada.

## **Hawlaha muhiimka ah:**

Cilmibaarista lagu fuliyo deeqdan waxay ka koobnaan kartaa waxa soo socda:

- Ururinta iyo jamcinta xogta heerarka deegaan, gobol iyo qaran,
- Bixinta lafagurrada isbarbardhigeed ee adeegyada iyo taageerooyinka Ohio iyo gobolada kale.
- Aqoonsiga natiijooyinka la xiriira qaababka cusub ama gaarka ah ee adeegyada iyo/ama taageerooyinka, iyo
- Lafagurka saamaynaha.

Daraasad kasta oo dhammaata waxa xayiri doona Golaha si loo taageero wacyigalinta dadwaynaha iyo dadaalada u-doodista ee Golaha iyo deeq-helaha heshiiska ku wada jira. Daraasadaha dhammaada waxa adeegsan doona Golaha si uu ugu wargeliyo u-doodayaasha isbaddalada siyaasadda dawladda ee munaasabka ah kuwaasi oo taageeraya horumar ku yimaadda natiijooyinka anfacaya dadka leh naafooyinka koboceed iyo qoysaskooda.

## **Natiijooyinka:**

SC 2.2: # dadaalada Golaha ee la fuliyey si loogu baddalo qaababka wajahidda ee kala daadsan nidaam wada socda oo waxtar leh oo xaqiijinaya in shakhsiyaadka leh naafooyinka koboceed iyo qoysaskoodu ay kaqaybqaataan naqshadda oo ay helaan adeegyada bulshooyinka baahan, taageerooyinka shakhsiga ah, iyo noocyada kale ee kaalmo ee sare u qaadaysa aayo-ka-tashiga, madaxbannaanida, waxsoosaarka, iyo midaynta iyo ka wada qaybgalka dhammaan dhinacyada nolosha ee bulshada: 1

\*ODDC waxay go'aaminaysaa qanacsanida macmiilka marka la eego halwaha Goluhu taageero ama fuliyo. Deeq-helayaasha waxa looga baahan doonaa inay ka kaalmeeyaan ODDC hannaankan.

## **Natiijooyinka muddada dhaw:**

Mashruucu wuxuu soosaari doonaa warbixin sanad mashruuceed kasta taasi oo kordhin doonta aqoonta iyo fahamka mawduucyo gaar ah oo la xiriira baahiyaha iyo jamashooyinka dadka leh naafooyinka koboceed iyo xubnaha qoysaskooda iyo daneeyayaasha kale ee kujira xayndaabka naafooyinka koboceed.

## **Natiijooyinka muddada fog:**

Isagoo adeegsanaya natiijada warbixino cilmibaaris oo badan oo kolba la soosaaray, Golaha Naafooyinka Koboceed ee Ohio waxa loo tixgalin doonaa isha xog la isku hallayn karo oo sax ah oo la xiriirta hawlaha isbaddalka nidaamyada iyo xirfad dhisidda marka la eego u-doodayaasha iyo siyaasad-dejiyayaasha.

**Macluumaadka lagu maalgalinayo:**

	<b>2023</b>	<b>2025</b>
*Fadaraalka	\$100,000	\$100,000
Lacagta u Dhiganta:	<u>\$33,333</u>	<u>\$ 33,000</u>
Wadarta:	\$133,333	\$133,000

\*Sii socoshada maalgalintu waxay ku xirnaan helitaanka lacagta.

**Qaabka maalgalinta:**

Tartan leh

**Deeq-helaha:**

Waa La Go'aaminayaa.

**QIIMAHA DADKA LEH NAAFOOYINKA**  
**(Barashada Xirfadeed/ Sharci-dejinta Iyadoo la**  
**shaqaalaynaya Dadka leh Naafooyinka)**

42 USC 15002 Qeexdim

(27) Hawlaha Aayo-ka-tashiga - Oraahda "hawlaha aayo-ka-tashiga" waxa looga jeeda hawlaha keena in dadka leh naafooyinka koboceed, oo helaya kaalmada ku haboonayd, ay ku helayaan -- ...(E) taageero, oo ay kujirto taageero maaliyadeed, si ay uga qaybqaataan iskaashiyada, si ay xog u siiyaan siyaasad-dejiyayaasha, iyo inay door ka ciyaaraan soosaaridda siyaasadaha dawladda ee saamaynta ku yeelanaya shakhsiyaadka leh naafooyinka koboceed.

(30) Adeegyada shaqaalaynta ee la taageeray - Oraahda "adeegyada shaqaalaynta ee la taageeray" waxa looga jeedaa adeegyada awoodda u siiya shakhsiyaadka leh naafooyinka koboceed inay ka qabtaan shaqo tartan leh nidaam shaqeed midaysan, marka la eego xaaladda shakhsiyaadka leh naafooyinka koboceed - (A)(i) kuwaas oo shaqaalaynta tartanka leh aan barigii hore heli jirin; ama (ii) kuwaas oo shaqaalaynta tartanka laga gooyay ama laga hakinayey iyadoo ay ugu wacan tahay naafooyin daran oo jira; iyo (B) kuwaas oo noocooda naafanimada iyo siday u weyntahay darteed, u baahan adeegyada shaqaalaynta la taageeray ee kooban ama adeegyo wakhtiga loo kordhiyey si ay u qaban karaan shaqada noocan ah.

42 USC 15025 (c)(5)(G) Abaabul la samaynta golayaasha, guddiyada, iyo barnaamijyada la xiriira.

Goluhu wuxuu taageeri karaa oo uu fulin karaa hawlo si uu u xoojiyo abaabulka adeegyada ee - (i) golayaasha, hayadaha, ama guddiyada kale, ee ay oggol yihiin shuruucda Fadaraalka ama Gobolka, ee la xiriira shakhsiyaadka leh naafooyinka (sida golaha abaabulka hay'adaha dhexdooda ee Gobolka oo lagu aasaasay qaybta C ee Xeerka Waxbarashada Shakhsiyaadka leh Naafooyinka (20 U.S.C 1431 et seq.), Golaha Baxnaaninta Gobolka iyo Golaha Nolasha Madaxabannaan ee Gobolka oo Dhan oo lagu aasaasay Xeerka Baxnaaninta ee 1973 (29 U.S.C. 701 et seq.), golaha qorshaynta caafimaadka dhimirka ee Gobolka oo lagu aasaasay cinwaan-hoosaadka B ee cinwaanka XIX ee Xeerka Adeegga Caafimaadka Dadwaynaha [42 U.S.C. 300x et seq.], iyo hawlaha lagu oggolaaday qaybta 3003 ama 3004 ee cinwaanka 29, iyo hay'ado fulinaya golayaal, hay'ado, ama guddiyo kale ee la midka ah;



**Yoolka (hadafka):**

Siinta fursado badan oo kobcinta hoggaaminta ah ee dadka naafada koboceed leh, xubnaha qoysaskooda iyo ciddii ay iskaashi leeyihiin. Soo bandhigidda fursado kala duwan oo lagu kobcinayo xirfadaha ay u baahan yihiin si ay u noqdaan hoggaamiyayaal u dhaqdhaqaaqa naafada.

**Ujeedada iyo saamaynta mashruuca:**

Mashruucani wuxuu leeyahay ujeedo cad oo ah u helitaanka fursado shaqaalayn oo buuxa/dhiman ama tabobar shaqo oo loogu talagalay shakhsiyaadka leh naafooyinka qaybta sharci-dejinta ee dawladda.

**Gogoldhigga, asbaabta, iyo baaxadda mashruuca:**

Hay'adda Fursadaha ee dadka reer Ohio ee leh Naafooyinka (OOD), oo ah Barnaamijka Baxnaaninta Xirfadeed ee gobolka, hadda waxay ka samaysaa Barnaamijka Baridda Xirfadeed si ay uga hesho shaqaalayn loogu talagalay dadka leh naafooyinka laanta fulinta ee dawladda. Hay'addu waxay si guul leh ugu meelaysay shakhsiyaadka leh naafooyinka shaqaalayn iyo tabobar shaqo, hase yeeshee, diiradda barnaamijku waxay saarnayd oo ay ku xaddinayd ku meelaynta hay'adaha sare ee dawladda.

Goluhu wuxuu raadinaya inuu ballaariyo baaxadda barnaamijkan jira si uu ugu helo fursado shaqaalayn iyo tabobar shaqo shakhsiyaadka leh naafooyinka taasi oo uu uga raadinayo Aqalka Wakiilada ee Ohio, Aqalka Sanatka ee Ohio, Guddida Adeegga Sharci-dejineed, Xafiiska Karraaniga Aqalka Wakiilada, Xafiiska Karraaniga Sanatka, ama hay'adaha ama ururada kale ee ku shaqeeya amarka laanta sharci-dejinta ee dawladda. Sidoo kale, fursadaha inay ka shaqo-galaan sharci-dejinaha heer dawladda deegaanak (sida, guddoomiyayaasha degmada, golyaasha deegaanka, township trustees, iwm) ama heerka fadaraal ee dawladda (sida, Xafiiska Aqalka Wakiilada Degmada ee Maraykanka, Xafiisyada Aqalka Sanatka Degmada ee Maraykanka, iwm.) ayaa sidoo kale la dhiirigaliyaa.

Mashruucan waxa loogu talagalay inuu kabo, laakiin inuu baddalayn, Barnaamijka Baridda Xirfadeed.

**Hawlaha muhiimka ah:**

Maalgalintu waxay siin doontaa taageero OOD si ay u ballaarisoo baaxadda Barnaamijka Baridda Xirfadeed si ay ugu hesho shaqaalayn dadka leh naafooyinka. Hawlaha muhiimka ah waxa kujiri kara, laakiin kuma eka, shaqaalaynta murashaxiinta mutaystay, tabobar shaqada ku gaar ah, ka qabanqaabinta fursado meelayneed sharci-dejinta, siinta taageero la socosho si ay u horumariso fursadaha guulaysiga, iyo hawlaha kale ee ay OOD ama Golaha Naafooyinka Kobaceed u arkaan inay daruuri yihiin oo habboon yihiin.

**Natijooyinka:**

SC 1.1: Tirada siyaasadaha iyo/ama habraacyada la abuuray ama la baddalay: 2

SC 1.3.1: Tirada dhaqanada rajada leh ee la abuuray: 2

SC 1.3.2: Tirada dhaqanada ugu wanaagsan ee la taageeray iyadoo la marayo hawlaha Golaha: 2

SC 1.3.3: Tirada dhaqanada wanaagsan ee la abuuray: 1

\*ODDC waxay go'aaminaysaa qanacsanida macmiilka marka la eego halwaha Goluhu taageero ama fuliyo. Deeq-helayaasha waxa looga baahan doonaa inay ka kaalmeeyaan ODDC hannaankan.

**Natijooyinka muddada dhaw:**

Tirada dadka leh naafooyinka koboceed ama naafooyinka kale kuwaasi oo ka dalbada shaqo sharci-dejinta way kordhi doonaan sidoo kale waxa kordhi doona waxbarashada kusaabsan fursadahan iyo xirfadaha shaqada ee loogu baahan yahay in lagu guulaysto shaqaalaynta noocan ah.

**Natijooyinka muddada fog:**

Hay'adaha sharci-dejintu waxay ku shaqaalayn doonaan dadka leh naafooyinka heer ay ku matali karaan bulshada reer Ohio ee leh naafooyinka.

**Macluumaadka lagu maalgalinayo:**

**2022-2026 (sanadk kasta)**

*Fadaraalka:	\$50,000
Lacagta u Dhiganta:	<u>\$16,666</u>
Wadarta:	\$66,666

\*Maalgalintu waxay ku xirnaan helitaanka lacagta.

**Qaabka maalgalinta:**

Qoondaynta aan Tartanka Lahayn (Waxa jirta kaliya hal urur ama shirkad oo u soo baxay kaasi oo fulin kara mashruuca.)

**Deeq-helaha:**

Opportunities for Ohioans with Disabilities Agency (Fursadaha dadka reer Ohio ee leh naafooyinka)